# DACWAD ISTARAATIIJIYADEED: HAGGAHA TALLAABO SHARCI

SYSTEMIC JUSTICE



# TUSMADA


Fariin ka timi Systemic Justice 2
Hordhac 3
Isticmaalida haggaha 4


## 1. WAA MAXAY DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?


Waa maxay dacwad? 6
Maxaa ka dhiga dacwad mid istaraatiiji ah? 7
Waa maxay dacwad istaraatiijiyadeed? 8


## 2. MAXAY QABAN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?


Hordhac: Maxay qaban kartaa dacwad istaraatiijiyadeed? 10
Kor u qaadista xogta iyo muuqashada mawduuc 11
Dardar gelinta ama kicinta ololeyaasha 12
U-xaqiijinta xaqiiqooyin dad ama bulshooyin 13
Hubinta in shakhsiyaadka iyo kooxuhu ay ilaalinayaan waajibaadkooda sharcigu faray 14
Qaabeynta iyo dhaqaajinta waxa sharcigu ka yidhi arrin gaar ah 14
Aasaasitaanka xuquuqo shakhsi oo (cusub) 15
Laalista sharciyadda aan caddalada ahayn 16
Bandhigida xaddidaadaha xeerarka jira ama hab-raacyadda 16
Balaadhinta galaangalka caddaalada 17
Qaabaynta xaaladaha taageeraya ololayaasha bulshada iyo dhaqdhaqaaqyada 18
Soo koobidda waxa ay dacwada istaraatiiji sameyn karto 18


## 3. SIDEE LOO ADEEGSAN KARAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?


Hordhac: Sidee loo adeegsan karaa dacwad istaraatiijiyadeed? 20
La macaamilka kiisas sharci oo kala duwan: 21
- Xeerka ciqaabta 22
- Xeerka Madaniga 23
- Xeerka Hay'adaha 23
Tallaabooyinka dacwada 24
- Hanjabaad dacwad-furis 25
- Kiis u gudbinta maxkamada iyo dhagaysiga 25
- Kiis xallin 26
- Kiis ku guulaysi 27
- Kiis ku guuldarraysi iyo racfaan 27
- Dib u dacwoodis 28
Soo koobidda sida loo adeegsan karo dacwad istaraatiijiyadeed 28


## 4. GOORMA AYAAD ISTICMAALI KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?


Hordhac: Goorma ayaad isticmaali kartaa dacwad istaraatiijiyadeed? 30
- Marka isbeddelka siyaasad uu qaadanayo waqti dheer 31
- Marka ay dhaqangelin la'aan joogto ah ka jirto xeer ama siyaasad jirta 32
- Marka loo baahdo in la kordhiyo cadaadiska oo si degdeg ah loo kobciyo wacyiga 33
- Marka aad ogaato in aanu ahayn arrin iskii u jira 35
- Marka arrinta aan waligeed la horgeyn maxkamadaha / kiisaska hore loo horgeeyay maxkamadaha aanay u adeegayn caddaalada 36
- Marka aad rabto inaad awood ku siiso bulshadaada ama dhaqdhaqaaqaaga helitaanka caddaalada 37
- Marka aad u baahan tahay inaad la wareegto arrimaha sharciga ee khuseeya adiga iyo bulshadaada 38
U-hoggaansanaanta xeerarka habraacyada kale 39
Waqti gelinta riixidda isbeddelka ee maxkamadaha hortooda 40
Ku xisaabtanka kharashaadka dacwada (mid dhaqaale iyo mid aan dhaqaale ahayn) iyo kharashaadka dacwada 41
Soo koobidda goorta aad adeegsan karto dacwad istaraatiiji 42


## 5. XAGGEE GEYN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?


Hordhac: Xaggee geyn kartaa dacwad istaraatiijiyadeed? 44
Maxkamadaha qaran 45
Hay'adaha kale ee qaran 46
Maxkamadaha heer gobol 47
- Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub 47
- Maxkamada Caddaalada ee Midawga Yurub 48
Hay'ado ama maxkamado caalamiya 50
Soo koobidda halka aad gayn karto dacwad istaraatiiji 51


## 6. YAA GUDBIN KARA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?


Hordhac: Yaa gudbin kara dacwad istaraatiijiyadeed? 53
Shaqsiyaad 54
Kooxo 55
Ururro 56
Danta dadweynaha 57
Qaababka kale ee dacwad-ku-jiraha 57
Qaababka kale ee loogu lug-yeelankaro 58
Soo koobidda cidda gudbin karta dacwad istaraatiiji 59

Jawaab u helidda su'aalahaaga 60
Wax badan oo kale oo ku saabsan Systemic Justice 61

# FARIIN KA TIMI SYSTEMIC JUSTICE

Dacwada istaraatiijiyadeed waxay noqon kartaa aggab awood badan oo loo isticmaali karo u-dagaalanka caddalad helista takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha. Waxay gacan ka geysan kartaa helista isbeddel ku dhaca xeerarka, sharciyadda, siyaasadaha, ama dhaqamada. Haddana, bulshooyinka la hayb-sooco badanaa ma awoodaan in ay ka faa'iidaystaan awooda buuxda ee u dacwoonta aragtiyahooda iyo ololeyaashooda.

Bulshooyinku waa in ay awood u yeshaan in ay sameeyaan xulashooyin la ogyahay oo ku saabsan sida ay doonayaan in ay ugu daraan dacwada istaraatijyadeed ololayaashooda isbeddel doon. Ka Systemic Justice ahaan, waxa aanu hiigsanaynaa in aanu gacan ka geysano kor u qaadida aqoonta iyo awooda ururada, dhaqdhaqaaqyadda, iyo iskaashatooyinka anaga oo horumarinayna aggabyada ku saabsan dacwada istaraatiijiyadeed, bixinaynana aqoon-isweydaarsiyo iyo tabobar,  sidoo kalena marti-gelinayna wicitaano si aan wax uga qabano su'aalaha bulshooyinka.

Halka uma joogno in aanu gebi ahaanba la wareegno ama dejino ajendaha. Aggabyada aanu bixino waxa loogu talogalay dadka ka fekeraya in laga yaabo in iyaga loogu talogalay qaadista tallaabo sharci, iyo cidda rajaynaysa in ay wax badan ka barato dacwada istaraatiijiyadeed, iyagoo ku salaynaya ujeeddooyinkooda gaarka ah.

SYSTEMIC JUSTICE,
THE MOVEMENTS' LAW FIRM

# HORDHAC

Waxa lagu qeexay "geedi-socodka keenista ama ku difaacista dacwad maxkamada sharciga ah" dacwadu waxay noqon kartaa aggab awood badan marka la eego u-dagaalanka caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha. Dacwadu waxay leedahay heerar kala duwan, qaarbana kuwo kale waa ka caansanyihiin, waxayna leeyihiin codsiyo badan oo kala duwan oo loogu talogalay helitaanka isbeddel nidaam.

Fahmida waxa ay tahay dacwada istaraatiijiyadeed, waxa ay qaban karto, iyo sida, goorta, iyo mesha lagu isticmaali karo waa qayb ka mid ah waxyaabaha ay tahay in aad maanka ku hayso marka aad ka fekerayso doorka ay ka ciyaari karto helitaanka caddaalada takoorka, bulshada iyo dhaqaalaha.

Haggahani waxa uu si qoto dheer kuugu sharixi doonaa qaybaha aasaasiga ah ee dacwada istaraatiijiyadeed iyo waxa ay u qaban karto ololahaaga isbeddel doonka ee guddaha maxkamadaha iyo bannaankoodaba. Sharixida qaybaha aasaasiga ah ee dacwada istaraatiijiyadeed, hagguhu wuxuu bixinayaa sawir dhamaystiran oo ku saabsan siyaabo kala duwan oo loo qaadi karo tallaabo sharci. Wixii ka baxsan maxkamada dhexdeeda, waxa jira waddooyin badan oo aad uga qayb noqon karto dacwad istaraatiijiyadeed. Fahmid hordhac ah oo ku saabsan dacwada iyo codsiyadeedu waxa ay faa'iido u noqon kartaa u beddelista falanqaynta sharci u doodis  iyo shaqo olole, iyo ka qayb noqoshada horumarino sharci, xoojinta dadaalada dhaqdhaqaaq, iyo xoojinta ka qayb galka dooda dadweynaha. Iyada oo la adeegsanayo tusaalayaal la taaban karo oo xaqiiqada ku salaysan, haggahan waxa ujeedkiisu yahay in uu muujiyo qaar ka mid ah waddooyinka dacwada istaraatiijiyadeed ugu addeegi karto aragtidaada.



# ISTICMAALIDA HAGGAHA

Hagguhu kuma qeexayo dacwada istaraatiijiyadeed qaab dhismeed aqooneed, ama falanqayn sharci oo adag. Beddelkeeda, waxaad ka heli doontaa aggab ay ka buuxaan codsiyo laga soo dheegay kiisas xaqiiqo ah oo muujinaya istaraatiijiyadaha badan ee sharci ee u addeegaya ololayaasha isbeddel doonka ah ee daafaha dunida. Waxa aanu mudnaanta siinay qayixida iyo galaangalka loo yeelanayo aggabkan isticmaalka fudud kaas oo kuu soo bandhigaya noocyada kala duwan ee dacwada istaraatiijiyaaded si uu gacan uga geysto u-dagaalanka caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha.

Haggahan waxa lagu saleeyay lix su'aalood oo muhiim ah, mid walba oo ka mid ahna waxa ay jawaab ka bixinaysaa dhinac gaar ah oo ka mid ah dacwada istaraatiijiyeed. Su'aalahani waa:

- WAA MAXAY DACWAD ISTARAATIIJIYEED??
- MAXAY QABAN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYEED?
- SIDEE LOO ISTICMAALI KARAA DACWAD ISTARAATIIJIYEED?
- GOORMA AYAY TAHAY IN AAD ISTICMAASHO DACWADA ISTARAATIIJIYEED?
- HALKEE GEYN KARTAA DACWADA ISTARAATIIJIYEED?
- YAA SOO GUDBIN KARA DACWADA ISTARAATIIJIYEED?

Qayb walba waxa ay ka koobantahay sharaxaado guud oo ay badhitaarayaan soo koobino laga sameeyay kiisas xaqiiqo ah, kuwo yaryar iyo kuwa waaweyn labaddaba. Tusaale kasta waxa uu muujinaya dhinacyada khuseeya geedi-socodka dacwada istaraatiijiyadeed ee ka dhigta kiiska mid istaraatiiji u ah riixida isbeddelka.

Haggahan dijitaalka ah dhexdiisa, waxa aad si toos ah ugu boodi kartaa su'aasha aad inta badan danaynayso. Si aad sawir fiican uga hesho dacwada istaraatiijiyeed, waxa aanu ku talinaynaa in aad mushaaxdo haggaha, qayb ilaa qayb.

Haggahani sinaba beddel uguma aha la-talinta sharci, laakiin waxa aanu rajaynaynaa in uu si weyn kaaga caawiyo kala miirka geedi-socodka dacwada. Haddii aadan helin jawaab aad u rabtay su'aal gaar ah oo aad qabtay kuna saabsan dacwada istaraatiijiyadeed, waad noosoo sheegi kartaa adiga oo su'aalahaaga iimayl noogu soo diraya kuna soo hagaajinaya knowledgeandpower@systemicjustice.ngo

Su'aalaha aad soo gudbiso maanka ayaa lagu hayn doonaa si dib loogu tafatiro nuquladda danbe ee mustaqbalka ee haggahan iyo sido kale si loogu dhiso aggabyo iyo waxyaabo kale oo faa'iido leh oo ku tacaluqa dacwada istaraatiijiyadeed.

Erey-bixino muhiim ah ayaa lagu qeexayaa haggahan dhexdiisa. Haddii aad jeclaan lahayd aad fahamto luuqadda iyo macnayaasha lagu isticmaalo dacwada dhexdeeda, waxa laga yaaba in aad u aragto faa'iido in aad tixraacdo "Ereyada caddaalada: Qaamuuska ereyada aasaasiga ah ee sharciga" kaas oo laga heli karo mareegtayada.

Waxa aanu rajaynaynaa in haggahani kaa caawiyo in aad fahamto doorka dacwada istaraatiijiyadeed ay ka ciyaari karto ololahaaga isbeddelka.

Aggabkan waxa soo saaray Systemic Justice, shirkadda sharciga ee dhaqdhaqaaqa. Halkan wax badan kaga ogoow Systemic Justice.

Ka bixinta hordhac dacwada istaraatiijiyadeed, haggahani waxa uu wax badan ka taabanayaa qaar ka mid ah su'aalaha aasaasiga ah ee la xidhiidha geedi-socodka dacwada isagoo bixinaya tusaalayaal. Tusaalayaasha la isticmaalay waa kuwo loo xushay si ay u muujiyaan taatiko gaar ah ama habraac ku saabsan dacwada istaraatiijiyadeed. Tani waxa ay la macno tahay in dhamaan tusaalayaasha kiisasku anay khasbiyan la jaanqaadayn qiyamka iyo habraacyada Systemic Justice ee qaadashada dacwad istaraatiijiyadeed. Laakiin waa mid ka mid ah sababaha shaqaddayadu ugu faro-adaygtay noqoshada mid cad: maxaa yeelay dacwadaha ay dabada ka riixayaan bulshadu ee ku saabsan caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaaluhuba waa kuwo si mug leh aan uga muuqan xayndaabka dacwadaha.

Haggahan waxa la nashqaddeeyay iyadoo lagu salaynayo baahiyo lagu aqoonsaday geedi-socod la-talineed lala yeeshay ururo, bulshooyin, iyo dhaqdhaqaaqyo ka shaqeeya caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha ee gobolka Golaha Yurub. Waxa aanu sii waddi doonaa in aanu horumarino aggabyada kana dhigno qayb ka mid ah shaqaddayada si aanu u dhisno aqoonta iyo awooda bulshooyinka u dagaalamaya caddaalada.

CUTUBKA KOOWAAD:

# WAA MAXAY DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?



# WAA MAXAY DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Erey-bixinta "dacwad istaraatiijiyadeed" waxa loo kala jabin karaa labaddeeda qaybood ee: dacwad iyo istaraatiijiyad.

## WAA MAXAY DACWAD?

Dacwad waa geedi-socod lagu xalinayo khilaaf ama wax lagaga qabanayo waxyeelo iyada oo loo marayo u gudbinta cabasho sharci hay'ad rasmi ah oo leh awood ay ku gaadho go'aano la xadhiidha cabashadaas.

"Cabashada sharci" waa geedi-socod lagu soo bandhigayp xaqiiqooyin gaar ah, iyo sidoo kale soo bandhigida doodo, la horkeeno hay'ad rasmi ah iyada oo la muujinayo in qof kale ama cidi ay jabisay sharciga.

Gudbinta cabasho sharci oo ka dhan ah qof, iyo ku doodista in ay jabiyeen sharciga, waxa kale oo loogu yeedhaa dacweyn qof.

Marka laga go'aan gaadhayo cabasho sharci, hay'ada rasmiga ah waxay awooda in ay si rasmi ah u caddeyso in sharciga la jabiyay waxana ay dabiqi kartaa xaddidaado cayiman oo ka dhan ah cidda masuulka ka ah jabinta sharciga. Qaar ka mid ah xaddidaadaha waxa ka mid ah:


- **Soo bandhigida go'aan qeexaya hay'ada sababaheeda kalifay gaadhista natiijooyinkeeda (tan waxa mararka qaarkood loo yaqaana "xukun", kaas oo kaddib hadhow ay isticmaali karaan hay'adaha kale marka ay go'aan ka gaadhayaan kiisas la mid ah;**

- **U-baahashada in shakhsi ama koox jabisay sharciga ay bixiyaan caddad lacageed, tan waxa ay noqon kartaa hab ganaaxa ama waxa laga yaaba in ay noqoto hab magdhow ah oo si toos ah loo siinayo kuwii wax ku waayay ama ku dhaawacmay sharci jabinta;**

- **Amrida shakhsi ama koox kuwaas oo jabiyay sharciga in ay qaadaan tallaabo cayiman, ama ay ka waantoobaan qaadida taalaabo cayiman, sida iyaga oo ku samaynaya wax ka beddel siyaasadooda ama joojinaya dhaqan takoor;**

- **Codsashada in wax ay sameeyaan kuwa kale khasbiyan qayb kama aha kiiska. Tusaale ahaan, kuwasi waxa ay noqon karaan hay'ado dawliya ama dawladda samaynaysa baadhista ama beddelaysa sharciga.**

Hay'ada rasmiga ah ee la macaamisha cabashooyinka sharci inta badan waa maxkamad. Waddamada badankooda, maxkamadaha ayaa ah hay'adaha koowaad ee awooda u leh go'aan ka gaadhista cabashooyinkaas oo kale iyo meel-marinta caddaalada.




# MAXAA KA DHIGA DACWADA MID ISTARAATIIJI AH?

U isticmaalka dacwad si istraatiji ahi waa geedi-socodka aqoonsashadda iyo dabagalka cabashooyin sharci oo la xushay oo qayb ka ah qorshe muddo dheer oo lagu gaadhaayo yool ama yoolal. Cabashooyinkan waxa laga yaaba in lagu xusho rajada laga qabo in maxkamadu ay cabashooyinka lasoo bandhigey xukun u xukunto, ama waxa laga yaaba in lagu xusho sababtoo ah waxa ay gacan ka geysan karaan gaadhista yoolal kale oo aragti. Yoolalkan waxa laga yaaba in la gaadho iyada oo aan xataa loo baahanayn helista go'aan maxkamadeed oo togan.

Yoolalka la dabagalo iyadoo loo marayo dacwad waxa ay sameeyaan istaraatiijiyad balaadhan ama dhaqdhaqaaq si loogu helo isbeddel bulsho iyo nidaam. Waxa lagu taageeri karaa tallaabooyin kale, sida ololayaal, mudahaaraad, iyo u doodis.

## DARAASAD KIIS:

## SINNAANTA GUURKA: U-DAGAALANKA DHEER EE SHARCI EE AQOONSIGA

Guddaha Mareykanka, guurka dadka isku jinsiga waxa si rasmi ah loogu aqoonsaday xuquuq aasaaasi ah iyadoo ay u aqoonsatay Maxkamada sarre ee Mareykanka 2015-kii. Si kastaba ha ahaatee, tani waxa ay ahayd hal kiis oo keliya, oo ay ku ladhantahay geeddi istaraatiijiyadeed oo loo galey sinnaanta guurka ee Mareykanka. Dacwada ku saabsan guurka dadka isku jinsiga ah taariikhdeedu waxa ay dib ugu noqotaa 1970-kii, laakiin in badan oo ka mid ah dadaaladan horre waxay ahaayeen kuwo guul-dareystay waxana keliya ay sii xoojiyeeen xeerka midoobida sharciga ahi in uu keliya ka dhex samaysmi karo nin iyo naag.

Horraantii 1990-kii, kooxo mudaharaadayaal ah ayaa bilaabay ku soo bandhigida "guurka ka mid noqoshada qoyska" hoolalka caasimada. In badan oo ka mid ah mudaharaadayaashu waxa ay ka biyo diideen midowga guurka ee caadiga ah, laakiin waxa ay aamineen in weli la gaadhsiiyo cidkasta. Waxa jirey aqoonsi si toos ah ugu socday maxkamada oo lagu raadinayay aqoonsiga guurka dadka isku jinsiga ah waxana dalabkani ahaa mid codsashadiisu ku adagtahay garsoorayaasha jamhuuriga wakhtigaas. Waxa la abuuray istaraatiijiyad lagu dabogalo sheegashooyin sharci oo si balaadhan ugu gogol-xaadhaya kiis raadinaya aqoonsiga buuxa ee guurka dadka isku jinsiga ah.

Kiisaskani waxa ay ku bilaabmeen sheegashooyin la loolamaya sharciyadda oggolaaday takoorka ka dhanka ah dadka jinsigooda wax ka daya, dumarka jinsigooda wax ka daya, iyo dadka labadda jinsiba daneeya (Romer v. Evans), iyo dadka ku lugta leh ficilada, dhaqanada ama xidhiidhada dadka jinsigooda wax ka daya, dumarka jinsigooda wax ka daya, iyo dadka labadda jinsiba daneeya (Lawrence v. Texas).

Intaa kaddib, waxa la gudbiyay kiisas raadinayey aqoonsiga guurarka dadka isku jinsiga ah kuwaas oo sharci ahaan looga aqoonsaday Mareykanka wixii ka baxsan, (US v. Windsor).Kiisasku sidoo kale waxa ay dhaliyeen walaac khuseeya loolanka ku aadan wax ka beddelada dastuurka ee la doonayay in lagu xaddido guurka lamaanayaasha kala jinsiga duwan (Hollingsworth v. Perry). Ugu danbeyn, 2015-kii, tiro kiisas ah ayaa yimi maxkamada sarre ee Mareykanka kuwaas oo lagu doonayay aqoonsi rasmi oo guurka dadka isku jinsiga ah ka dhigaya mid xuquuq ahaan uu ilaaliyo dastuurku. (Obergefell v. Hodges). Kiisaskani waxa ay dhiseen go'aanka taariikhiga ah ee ugu danbeyntii ka dhigey guurka dadka isku jinsiga ah mid uu ilaaliyo Dastuurka Mareykanku.

# WAA MAXAY DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Dacwada istaraatiijiyadeed waa geedi-socodka u gudbinta cabashooyinka sharci maxkamad iyadoo ujeeddadu tahay keenista isbeddel ku saabsan bulsho. Caadi ahaan waxa ay ka kooban tahay saddex waxyaabood:

**1. Kiiska ujeedkiisu waa keenista isbeddel.**

Inta badan, kiisasku waxa ay qayb ka yihiin olole balaadhan oo lagu doonayo isbeddel. Tan waxa laga yaaba in ay noqoto isbeddel lagu sameeyo sharci ama siyaasad ku hareeraysan arrin cayiman, ama beddelista sida sharciyaddaas loo turjumo ama loo dabaqo. Waxay noqon kartaa beddelista sida loo gaadho go'aanada maxkamada dhexdeeda, ama tallaabooyinka ama hab-dhaqanada dadka kale. Waxay noqon kartaa samaynta isbeddel qaab-dhismeed, nidaam ama hay'adeed.

**2. Saamaynta kiisku way ka qoto dheer tahay dhinacyada keenaya kiiska.**

Kiiska keliya laguma dagaalamo maxkamadaha dhexdooda si ay uga helaan natiijooyin cida samaysay sheegashada sharci. Natiijada laga helo dacwada keliya faa'iido uma aha shakhsiyaadka sida tooska ah ugu lugta lahaa kiiska. Beddelkeedase, waxa ay sidoo kale saamaynaysa koox dad ah oo balaadhan, si qaab wanaagsan loogu adeego caddaalada.

**3. Kiisku waxa uu qayb ka yahay istaraatiijiyad balaadhan ama dhaqdhaqaaq.**

Tani waa qayb muhiim ah: dacwada istaraatiijiga ahi way ka macno badantahay kiis maxkamadeed oo keliya – waxa laga hawlgalaa iyada oo ay dhinac socoto dadaalo kale oo ka baxsan maxkamada dhexdeeda. Dadaadaladan kale waxa ay badanka ka kooban yihiin u doodis, loobiyeyn, ama olole. Tan sidoo kale waxa ka mid ah isticmaalka dacwad si loo sameeyo wacyi-gelin ku saabsan arrin ama bilaabista dood dadweyne. Xaaladan oo kale, waxaynu u-tixraaci karnaa dacwada mid ka mid ah aggabyada sanduuqa aggabyada ololaha isbeddelka.

CUTUBKA LABAAD:

# MAXAY QABAN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

# MAXAY QABAN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Dacwad istaraatiijiyadeed waxay gacan ka geysan kartaa keenista isbeddel iyadoo maraysa waddooyin badan. Isbeddelkani waxa laga yaaba in uu si toos ah uga yimaado sida ay u xaliso cabashada sharci maxkamadu. Go'aanka maxkamadu waxa laga yaaba in uu ku filnaado inuu keeno isbeddelka loo baahanyahay, laakiin waxa laga yaaba in isbeddelka lagu keeno qaab dadban. Tani waxay badanaa ku timaada muuqalka dibadeed ee kiiska kaas oo uu ka dhasho caddaadis dadweyne.

Waa kuwan qaar ka mid ah noocyada saameyneed ee dacwada istaraatiijiyadeed ka dhasha::

- **kor u qaadista xogta iyo muuqashada mawduuc**
- **aasaasitaanka xuquuqo shakhsi oo (cusub)**
- **dardar gelinta ama kicinta ololayaal**
- **burburinta xeerarka aan caddaalada ahayn**
- **u-xaqiijinta xaqiiqooyin dad ama bulshooyin**
- **soo bandhigida xaddidaadaha xeerarka jira ama hab-raacyada**
- **hubinta in shakhsiyaadka iyo kooxuhu guddanayaan waajibaadkooda si waafaqsan sharciga**
- **balaadhinta galaangalka caddaalada**
- **qaabeynta iyo dhaqaajinta waxa sharcigu ka yidhi arrin gaar ah**
- **qaabeynta bii'ooyinka iyo xaaladaha taageera shaqadda riixista isbeddelka**



## KOR U QAADISTA XOGTA IYO MUUQASHADA MAWDUUC

Keenista kiis maxkamada waxa uu keenaa fursad kor loogu qaado wacyiga dadweynaha ee ku saabsan arrin. Dacwada waxa laga yaaba in keliya lagu qaato ujeedada koowaad ee kor u qaadida muuqaalka iyo wacyiga ku saabsan caddalad daro gaar ah. Kiisaska maxkamaduhu waxa ay awoodan in ay dhaliyaan soo jiidasho muuqaal oo weyn waxana ay sameeyaan "dabin" ama "dhacdo" loogu talogalay in warbaahintu kaga warbixiyaan arrinka guud ee kiiska lagu falanqaynayo, iyo sidoo kale shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ku lugta leh.

Bulshooyinka gudbinaya dacwad waxay haystaan fursad ay ku qaabeeyaan sheekada uu ku dhisanyahay kiisku. Soo bandhigida sheekadani waxay gacan ka geysan kartaa beddelista haddalka guud ee dadweynuhu ka qabo arrin, ama waxay ku khasbi kartaa kuwa haya awooda in ay qaadan tallaabo.

### DARAASAD KIIS:

## SOO AF-JARIDA BEEGSASHADA TAKOORKA AH EE XUDUUDAHA NETHERLAND: IYADA OO LA ISTICMAALAYO MAXKAMADAHA IYO OLOLAYAAL DADWEYNE SI LOO XAKAMEEYO HAY'ADAHA

Abriil 2018-kii, Mpanzu Bamenga waxa uu kasoo noqonayay shir, isagoo soo maray gegidiisa diyaaraha ee maxaliga ah ee Eindhoven. Intii uu ku jirey gegida, waxa safka kala baxay si ay u hubiyaan ciidamada boqortooyada ee Netherland ee milateriga booliska ah ee xuduudaha. Keliya dadka madowga ah ayaa safka looga saaray hubintaas, waxana uu weydiiyay sarkaal sababta keentay. Sarkaalku waxa uu ku jawaabay in lagu soo wargeliyay "Tahriibiye lacageed oo Nayjeeriyaan ah" oo usoo socdaalayay Netherland waxa kale oo uu u sheegay in ay xog khatara ku heleen "nin si fiican u lebbisan, degdeg u socda oo leh muuqaal qof aan Netherlandis ahayn" sidaasna ay u sameeynayaan hubinta. Intaa waxa uu ku daray, in iyaga sharcigu u xilsaaray, "Ka hortaga soo gelitaanka danbiilayaasha iyo argagixisada Netherland" ay na ku qasbanyihiin isticmaalka tiro tilmaamayaal ah, oo ay ka mid tahay muuqaalada qofka ee ku salaysan jinsiyada ama qoomiyada (sida midabka jidhka), si loo xusho socdaalayaasha maraya hubinada amniga.

Mpanzu waxa uu la shaqeeyay qof kale oo isna la kulmay takoor ku salaysan jinsiyad iyo qoomiyad oo kasoo gaadhay gegi diyaaradeed oo ku taal Netherland, iyo Isbahaysi ay sameeyeen ururo, ay ku jiraan Dutch Section of the International Commission of Jurists (NJCM), Amnesty International Nederland, Controle Alt Delete, iyo RADAR. Waxana matalaysay hay'ada aan faa'iido doonka ahayn ee dacwada istaraatiijiyeed ee Netherland ee PILP iyo shirkada kaalmada sharci ee Houthoff. Isbahaysigu waxa uu iska kaashaday abuurista kiis sharci oo ka dhan ah tallaabooyinka Ciidamada Boqoortooyada ee Netherland. Kiiskoodu waxa uu ku dooday in dawladda Netherland ay jabisay xeerka ka dhanka ah takoorka iyada oo si takoor ku salaysan ay u tuhmayaan socdaalayaasha Ciidamada Boqortooyada ee Netherland marka loo eego goobaha hubinada ee gegiyada diyaaradaha ee Netherland. Waxa ay ka dalbadeen maxkamada in ay joojiso isticmaalka qoomiyada ama jinsiyada loo isticmaalayo geedi-socodyada xulashada iyo xogaha garashada khatarta ee loo isticmaalo hubinadaas.

Juun 2021-kii, maxkamada Degmadda ee Hague waxay qabatay dacwad dhagaysiyo ku saabsan kiiska. Mpanzu waxa uu yimi goobta dacwada isaga oo sita boodh ay ku xardhantahay "Ciidamada Boqortooyada ee Netherland: joojiya takoorka beegsiga ah" Saddex bilood kadib dacwad dhagaysiyadan, maxkamadu waxa ay xukuntay in booliska xuduuduhu ay sii wataan siyaasadooda hadda ee ku aadan xulashada dadka ee ku salaysan qoomiyada ee hab-raacyada baraha-kantarool ee xuduudaha sababtoo ah, sida ay haddalka u dhigeen, muuqalada shakhsiyeed, sida midabku, waxa uu noqon karaa tilmaam lagu garan karo dhalashadooda. Waxa ay ku adkaysteen hubinada amni ee noocan ahi in ay sii socdaan loona isticmaalo ujeedooyin socdaal.

Isbahaysiga lagagama adkaan natiijadan, Xukunkan horre waxa uu taageeraya siyaasadii horre u jirtay ee Ciidamada Boqortooyada ee Netherland, inkastoo aanu u hiilinayn kiiska Mpanzu, waxa lagu caddeyay dukumenti in Wasiirka Difaacu uu taageeray takoorka beegsiga ah ee ku salaysan jinsiyadda iyo qoomiyada. Soo bandhigida go'aankan caddaalad darada ah ee maxkamadu, isbahaysigu waxa ay awoodeen in ay muujiyaan in jiritaanka arrintani ay ka baxsantahayba labada shakhsi ee kiiska, waxana ayba kor u qaadeen wacyi-gelin dadweyne oo ku saabsan cunsurinimada iyo beegsiga takoor ee ka jira Netherland iyagoo abuuray cadho dadweyne. Shabakadaha wararka ayaa bilaabay inay ka warbixiyaan sheekooyinka "guul-dareysiga" iyagoo adeegsanaya luuqado kala duwan oo adduunka lagaga hadlo. Tusaale ahaan, Al Jazeera waxa ay luuqada Ingiriisiga warkeeda doorka roon leh cinwaan uga dhigtay "Maxkamad ayaa hadda xaqiijisay: si aad u noqoto Dutch waa in aad noqoto caddaan" sidoo kale Ka-warbixiyaha Guud ee la dagaalanka cunsuriyada iyo takoorka ee Golaha Yurub ayaa waraaq u qorey Wasiirka Caddaalada ee Dutch-ka uu kaga codsanayo in uu laalo go'aankan.

Noofembar 2021-kii, xilli ay socdaan wararka taban ee ku saabsan go'aanka maxkamada, Ciidamada Boqortooyada ee Netherland ayaa sheegay in ay joojinayaan isticmaalka beegsiga jinsiyadeed iyo qoomiyadeed marka ay xulanayaan dadka si loo mariyo hubinta xuduuda. Si kastaba ha ahaate, ficiladoodu uma muuqan in ay si xaqiiqo ah isu beddeleen. Maajo 2022-kii, go'aankii horre ee maxkamadaha Dutch-ka ayaa rafcaan laga qaatay, Febraayo 2023-kii, maxkamada rafcaanka ee Dutch-ku waxa ay xukuntay in siyaasada xulashadu ay tahay mid midab-takoor ah waxana ay si rasmi ah u mamnuucday beegsiga jinsiyadeed iyo qoomiyadeed ee xuduudaha.

# DARDAR GELINTA AMA KICINTA OLOLEYAASHA

Dacwadu waa waxqabad adag oo muuqda kaas oo bulshooyinka awood u siinaya abuurista ololeyaal iyo hagaajinta dadaalada ku xeeran. Waxa ay soo bandhigtaa geedi-socod kaas oo bulshooyinku ku samaystaan dalabaadyo ama "codsiyo" ay ka rabaan maxkamadaha.

Sidoo kale waa waxqabad adag oo leh tiro yoolal ah oo loo adeegsan karo ololayn ama u doodis: sida gudbinta dacwada, qabashada dhageysiyada maxkamada (kuwaas oo badanaa dadweynaha u furan), soo bandhigida go'aanka ugu danbeeya, iyo rafcaan ka qaadashada go'aanada taban. Tallaabooyinkan ka midka ah geedi-socodku waxa ay soo bandhigayaan fursado suurtagal ah oo loo helayo loobigareyn, tallaabo toos ah, mudaharaad, muujino, ama ka qayb gelinta arrinka warbaahinta.

DARAASAD KIIS:

## CODAD BADAN: KU MUDAHARAADITAANKA GUDDAHA IYO DIBEDDA MAXKAMADA

Maalmaha dhageysiyada dacwada iyo go'aanka badanaa waxa loo isticmaala fursado si loo mudahaaraado iyo si kor loogu qaado wacyi-gelin ku saabsan arrinka. Tusaale ahaan, tirooyinka dacwad dhageysiyada kiiska ka dhanka ah soo jeedinta siyaasada dib u celinta dadka ka raadinaya magan-galyada UK ee la geynayo Rwanda waxa loo isticmaalay fursado mudaharaad oo ka dhan ah midab-takoorka magan-gelyo ee UK iyo nidaamka socdaalka kuwaas oo ay sameeyeen kooxo sida Stand Up To Racism.

Guddaha Mareykanka 2021-kii saddex dumar ah ayaa carqaladeeyay dhagaysiyo hadal oo ka socday Maxkamada Sarre ee Mareykanka. Sidan waxa ay ku sameeyeen mudaharaad ka dhan ah laalista kiiska uur iska soo ridista muhiimka ah Roe v. Wade. Waxa ay ku qayliyeen, "xaqa doorashada lanagama qaadi karo" iyo "U codee xuquuqdayada aanu wax ku doorano". Markii iyaga loo xukumay mudaharaadkan dartii, garsoorihii xukunka ridey ayaa sheegay, inkastoo aanay raali ka ahayn tallaabada, waxay awoodeen in ay fahmaan.

Geedi-socodka dhisida kiis iyo gudbinta cabasho sharci oo loo gudbiyo maxkamad waxay sidoo kale noqon kartaa dadaal waddareed. Dadka aan qareenada ahayn waxay awoodaan in ay qayb ka noqdaan sido kalena iska kaashadaan kiis iyaga oo noqonaya kooxo ka tirsan kiiska, ugana qayb qaadanaya ka markhaatiyaal ahaan ama xeeldheerayaal ahaan, ama uga qayb noqonaya ka kormeerayaal ahaan ama ka taageerayaal ahaan maxkamada dhexdeeda. Ka qayb noqoshada balaadhan iyo ka qayb qaadashada kiis waxa ay muujisaa wacyi balaadhan oo taageero iyo ka go'naansho ku aadan arrin.

DARAASAD KIIS:

## U-DAGAALANKA NOLOSHA SHAQO EE DADKA JIDHKOODA KA GANACSADA EE MAXKAMADAHA SCOTTISH-KA

Maarso 2022, Golaha caasimadda Edinburgh waxay noqdeen golihii koowaad ee Scotland ee mamnuuca kalaabyada tumashada. Wakhtigaas, waxa ku yaalay 4 kalaab caasimada dhexdeeda. Goluhu waxa uu dabaqay mamnuucida kaddib laba wadatashi dadweyne oo si liidata loo xayaysiiyay, kuwaas oo midna uusan u muuqan helista taageero loogu muujinayo xaddidaadahan. Markii ay ka fekerayeen mamnuucida, goluhu waxa ay cuskadeen "caddeymo" ka koobnaa kuwo aan sal iyo raad lahayn, xad-gudub ah, iyo bayaano dareen oo la dhalan-rogey oo ku saabsan goobaha madadaalada galmada iyo dadka jidhkooda ka ganacsada.

Muddo bil ah guddaheeda markii lagu dhawaaqay go'aanka mamnuucida kalaabyada tumashada, ururka dadka jidhkooda ka ganacsada ee United Sex Workers ayaa bilaabay olole lagu fangaraynayo ka hortag sharci oo ka dhan ah go'aanka golaha. Isla wakhtigaas, saddex ka mid ah goobaha madadaalada galmada ee Edinburgh ayaa gudbiyay kiis. Ururku waxa uu doonayay in uu kusoo biiro kiiska qaybna ka noqdo si ay horre ugu dhigaan booskooda hadda.

Qareenada matalayay ururka ayaa la wadaagay in goluhu si adag isugu dayay in uu ka hortago in iyagu aanay qayb ka noqon kiiska, waxana ka mid ahayd isku dayista kordhinta khatarta in ururku bixiyo magdhowyo xaddi badan haddii uu ku guul-daraysto kiiska. Iyadoo taasi jirto, ugu danbeyntii waa loo oggolaaday in ay qayb ka noqdaan kiiska.

Intii lagu guddo jirey dacwad dhageysiyada, saddex qof oo ka ganacsada jirkooda kana shaqeeya kalaabyada tumashada ee Edinburg ayaa si toos ah ugu gudbiyay bayaan maxkamada. Waxa ay sheegeen sida mamnuucida keliya aanay ugu waayin shaqooyinkoodii iyada oo lagu jiro dhaqaale burbur laakiin ay sidoo kale halis u gelisay guryahooda iyo xidhiidhadooda sababto ah waxa ay ku qasbanaadeen in ay ka tagaan caasimada si ay shaqo u helaan. Mina, mid ka mid ah dumarka usoo gudbiyay bayaanka maxkamada, ayaa wadaagtay maalintii dacwad dhageysiga tidhina "waanu ku diirsanay [...] in codadkayaga la maqlo. Waxa aanu dareemaynay in codadkayaga ay dhaggaha ka fureysteen goluhu. Waxay ahayd mid murugo leh araga xaddiga lacageed ee goluhu u isticmaalayay qareenada si ay nooga qaadan shaqooyinkayaga, laakiin waxanu nahay kuwo rajo leh kaddib dacwad dhageysiga,"

Febraayo 10-keedii 2023-kii, maxkamada ayaa laashay mamnuucidii golaha ee kalaabyada tumashada ee Edinburgh. Waxay xukuntay in golaha lagu majara habaabiyay wax ka qabashada arragtiyo aan sal iyo raad toona lahayn markii ay ka fekerayeen siyaasada iyo in go'aankaasi ahaa mid ku xad-gudbaya xuquuqaha dadka jidhkooda ka ganacsada ee ixtiraamista noloshooda shakhsi iyo qoys. Go'aanka ka dib, Ururka Dadka Jidhkooda ka Ganacsada ayaa yidhi "Keliya tani maaha guul weyn oo usoo hoyatay dadka jidhkooda ka ganacsada ee Edinburgh, kuwaas oo aan hadda wajahayn suurtagalnimadii shaqo caydhin mug weyn iyadoo dhexda lagaga jiro dhaqaale burbur, laakiin tani waxay naruuro u tahay dhamaan xuquuqda dadka ka ganacsada jidhkooda ee guud ahaan Britain."

# U-XAQIIJINTA XAQIIQOOYIN DAD AMA BULSHOOYIN

Ka hor inta aanay maxkamaduhu gaadhin go'aan, waa in ay ugu horreyn sameeyaan "xaqiiqooyinka go'aaminta", marka si kale loo dhigo,: ku go'aan qaadashada waxa xaqiiqadu tahay waa waxa ay ku salayn doonaan go'aankooda. Geedi-socodka dacwada waxa ka mid ah xaddidaado badan, xeerar, iyo hab-raacyo fududeeya oggaanshaha xaqiiqada muran sharciyeed.

Maxkamaduhu waxa ay leeyihiin awoodo baadhiseed iyo xaqiiqo-raadin. Waxa ay sidoo kale hubiyaan waxtartka iyo caddaalada baadhitaanada ay sameeyeen kooxaha kale ee dadweynuhu. Waxana ay amri karaan in dukumeentiyo gaar ah ama hoose daaha laga qaado oo la horkeeno maxkamada ama cidda kale ee kiiska ku lugta leh si caddaalada loogu adeego.

Kuwa siiya xogta maxkamada waa in ay ku dhaartaan run ahaanshaha waxa lasoo bandhigey; waa in ay sheegaan "runta oo dhan, oo aan waxkale wehelin". Been u sheegista maxkamad badanaa waxa laga dhaxlaa ganaaxyo daran. Maxkamaduhu sidoo kale waxa ay awood u leeyihiin in ay shakhsiyo ku amraan in ay caddeyn hor keenan iyaga.

Dhageysiyada maxkamadu badanaa waa kuwo furan, oo kor u qaada daah-furnaanta geedi-socodka iyo xaqiiqoyinka la hor keenay maxkamadaha hortooda labadaba. Weliba, go'aanada ay gaadhaan waa kuwo lasoo bandhigo oo si balaadhan loo heli karo. Go'aanadan waxa qayb ka noqon doona xaqiiqooyinka go'aaminta rasmiga ah ee maxkamada – ama runta – kiiska.

Dhamaan arrimahani waxay la macno yihiin in maxkamaduhu noqon karaan aggab awood badan oo loo isticmaali karo helista aqoonsi rasmi ah oo khuseeya in dhibaato dhacday, jirto arrin gaar ahi, ama in wax gaar ahi dheceen. Waxa ay soo bandhigi kartaa xaqiiqooyin horre loo inkirey. Waa caddeyntan ama xaqiijintan ta dadka qaar u dabagalaan dacwad maxkamadeed, iyagoo ugu danaynaya nafahooda iyo ta bulshooyinkoodaba.

### DARAASAD KIIS:

## XEERKA ELLA: DHAXAL HAWO NADIIF AH

Ella Roberta Adoo Kissi-Debrah waxa ay 2004-tii ku dhalatay Koonfurta Bari ee London. Waxay ahayd ilme faraxsan, ciyaarta isboortiga, ahna ilmo hal-abuur leh, oo lahayd riyo ah noqoshada dhakhtarka gar-gaarka degdega ah ee cirka. Intii aanay gaadhin 7 sanno jir, waxa ku dhacday xiiq. Waxana inta ka danbeeyay sannado badan oo ay la daalaa dhacaysay xanuuno, uu ka mid yahay noocyo kala duwan oo qufac daran ah iyo dhigitaano cisbitaal.

Febraayo 15-keedii 2013-kii, kaddib saddex toddobaad dhalashadeedii sagaalaad, Ella waxay u geeriyootay xiiq daran oo soo boodo ah. Ma jirin hal meel oo lagu xusay in sababta suurtagalka ah ee xanuunkeeda iyo dhimashadeedu tahay hawo wasakhow. Shahaadadeeda dhimashada ee asalka ah waxa lagu qeexay in ay u geeriyootay "neef-qabatin daran" Hooyada Ella, Rosamund, ayaa bilowday sameynta baadhis waxana ay ogaatay in waddada cidhiidhiga ah ee South Circular Road, ee u dhow meesha ay ku noolaayeen, in ay lahayd heerar sharci-darro ah oo nitrojiin laba-ogsaydh ah oo ay sababtay taraafiku. La-taliye dhinaca neefta ah oo eegay warbixintii caafimaad ee Ella ayaa is na war la mid ah sheegay aaminayna in ay qayb ka ahayd waxyaabaha keenay dhimashadeeda.

Rosamund kaddibna waxa ay go'aansatay in ay gudbiso kiis kaas oo furi kara baadhis maxkamadeed oo lagu sameeyo dhimashada Ella. Baadhista maxkamadu waa mid ay hor kacayso maxkamadu si looga gungaadho dhimashada qof, waxana badanaa sameeya koronaro kuwaas oo ah garsoorayaal khibrad leh. Diisambar 2020-kii, oo ay daba socotay baadhis maxkamadeed oo cusub oo eegaysay doorka hawo wasakhawgu uu ka ciyaaray dhimashadii Ella. Koronarku waxa uu ogaadaay in "Elle u dhimatay Xiiq ay gacan ka geysatey hawo wasakhow badan". Waxa kaloo la ogaaday in Xiiqda Elle ay ahayd mid neef-qabatin caadi ah iyo mid neef-qabatin xumaaday ah labaddaba oo ay keentay heerar sharci-darro ah oo nitrojiin dioxide ah iyo waxyaabo illi ma aragtay ah oo ka yimi hawo wasakhowga taraafika. Waxa sidoo kale la aqoonsaday in hooyada Ella, ee Rosamund, aanan la ogeysiin khataraha caafimaad ee hawo wasakhowga iyo suurtagalnimada qaadista neef-qabatowga xumaadey ee Xiiqda

Tani waxay ahayd markii koowaad ee taariikhda sharciga la xukumey in hawo wasakhow uu yahay sabab keentay dhimasho, iyo in lagu liis-gareeyo shahaadada dhimashada in hawo wasakhow yahay sababta dhimashada. Rosamund waxa ay sii wadatay u ololaynta Xeerka Ella, kaas oo la horkeenay Baarlamaanka UK Maajo 2022-kii, si ay u aasaasaan xuquuqda helista hawo nadiif ah ee guddaha UK.

# HUBINTA IN SHAKHSIYAADKA IYO KOOXUHU AY ILAALINAYAAN WAAJIBAADKOODA SHARCIGU FARAY

Dacwadu waa macnaha koowaad ee u-qabashada kuwa jooga jagooyinka awooda waajibaadkooda sharcigu faray. Mararka qaar ma jiraan wax ka khaldan sharciga laftiisa. Beddelkeeda, keliya waan loo hoggaansamin ama waddo fiican iyadoo la marayo baan dadka lagu qasbin.

Maxkamaduhu waxay ku khasbi karaan kuwa jabinaya sharciga in ay qaadaan ama ka waantoobaan tallaabooyin cayiman si ay si fiican ugu hoggansamaan waajibaadkooda sharci. Marka si kale loo dhigo, dacwadu waxay noqon kartaa macnaha koowaad ee in sharciga la dabaqo. Dacwadu waxa ay si wanaagsan u hubin kartaa in xeerku shaqaynayo oo loo hoggansamay, si loo hubiyo in kuwa awooda hayaa aanay uga baxsan iska indha-tirka waxa iyaga laga filayey ee hoos yimaada.

DARAASAD KIIS:

## GOOBO LOOGU TALOGALAY BULSHADA: ISKA CAABBINTA KA DHANKA AH DHISME DHISEYAASHA

I2017-ka dhexdiisa, magaalo lagu magacaabo Shrewsbury oo ku taal UK, ayaa hay'adeeda dawladda hoose iibisay qayb ka mid ah jardiin dadweyne si shirkad gaar loo leeyahay uga dhisto 15 guri oo qaali ah. Ku dhowaad 100 sano ka hor tan, jardiinkaas waxaa loo hibeeyay bulshada deegaanka si ay ugu nastaan uguna adeegsaddaan aag madadaalo ahaan. Markii qayb ka mid ah la iibiyay, bulshada lagalama tashan mana jirin wax ogeysiis dadweyne ah oo laga bixiyay iibka. Tani waxay ahayd mid ka hor imaanaysa shuruucda iyo xeerarka dowladaha hoose.

Koox ka mid ah dadka deegaanka ayaa u gudbiyay arrintaas maxkamad intii u dhaxaysay 2017-kii ilaa 2023-kii. Intii lagu guddo jirey arrinta, kiiskii waxa uu gaaray heerka maxkamadeed ee u sareeya UK (Maxkamada Sare). Maxkamada Sare waxay go'aamisay in dhulka si khaldan loogu wareejiyay dhisme dhise gaar ah, waxayna ay laashay oggolaanshihii dhismaha gaarka ah ee guriyeynta. Hay'ada Dawladda Hoose ayaa markaas sheegtay inay qorsheyneyso in dhulkaas dib loogu celiyo dadweynaha.

# QAABEYNTA IYO DHAQAAJINTA WAXA SHARCIGU KA YIDHI ARRIN GAAR AH

Shuruucda waxaa loogu talagalay in ay cid walbaa galaangal u yeelan karto loona qoro qaab cad oo qoddobaysan. Waxa loogu taloglay inay ka caawiyaan dadka inay xakameeyaan ficiladooda iyagoo raacaya waxa ku qoran sharciga. Sidoo kale, waxa ay dadka u suurtageliyaan inay si cad u fahmaan waxa dhici kara haddii aysan u hoggaansamin sharciga.

Isla wakhtigaas, sharcigu ma qeexi karo dhammaan xaaladaha kala duwan ee dhici kara. Taasi waxay la micno tahay in mararka qaar ay jiraan dabacsanaano iyo fasiraad loo baahdo marka sharciga lagu dabaqo xaalado gaar ah. Dabacsanaantan sharci ee jirta darteed, waxa macquul ah in kiisas loosoo gudbiyo maxkamada dalbanaya fasiraado ku saabsan waxa sharcigu qabo iyadoo looga gol leeyahay in si sax ah loo ixtiraamo xuquuqda, iyo in caddaalada si fiican loogu addeego, mustaqbalka codsiyada la xidhiidha sharcigaas.

DARAASAD KIIS:

## CADDEYNTA XEERKA: HAGAAJINTA NIDAAMKA DAWLADEED EE GALAANGALKA GURIYEYNTA

Ireland dhexdeeda, dadka u baahan taageero guriyeynayd bulsho waxa qasab ahayd in ay ka codsadaan dawladda hoose halkaas oo looga tixgelin jirey "deeggaan caadi ah". 2016-kii, qoys ka tirsan bulshada socdaalayaasha ayaa ka codsaday dawladdooda hoose in lagu daro liiska dadka hela guriyeynta bulsheed. Codsigoodii waala diidey, iyada oo maamulku ku doodayo in aanay ahayn "deeggaanayaal caadi ah" oo ku dhaqan degmadda sababtoo ah waxa ay "si sharci-darro ah ku degganaayeen gaadhi-guri yaalay hanti gaar loo leeyahay" si kale marka loo dhigo, maamulku waxa ay u fasirayeen erey-bixinta "deeggaan caadi ah" shuruudo dheerad oo ah deggene "sharci ah" ama "sharciga u hoggansan".

Koomiishanka Xidhiidhada Goobta Shaqadda, oo ah hay'ad dawladeed oo ka masuul ah goobaha shaqadda iyo xuquuqaha shaqaalaha iyo xidhiidhada, ayaa helay in "arrinka sharciyadda aan lagu xusin [xeerka] iyo [marka loo eego] arragtidooda, soo saarista shuruudahan dheeraadka ah ayaa si aan miisaanayn u saamaynaysa xubnaha bulshada socdaalayaasha ah sida darteedna ay tani tahay takoor". Koomiishanku waxa uu amray in magdhow la siiyo qoyska, waxana ay soo jeediyeen in siyaasada dib loo eego oo shuruudaha sharciyeed la lalaalo marka la fasirayo "deggaan caadi ah".



## AASAASITAANKA XUQUUQO SHAKHSI OO (CUSUB)

Xeerarku waxa ay aasaasan xuquuqo sharci, kuwaas oo ah kuwo u adeegaya dano gaar ah ama xaq u yeelasho gaar ah oo sharcigu ilaaliyo . tani waxa ay la macno tahay in ay siiyaan shakhiyaadyo sharci sheegasho oo la fulin karo marka kuwo kale jabiyaan xeerka. Xuquuqahani waxa ay taaban karaan dhinacyo kala duwan oo bulshada ah ama nolosha shakhsi, sida shaqaalaysiinta, ganacsiga, ama wax la xidhiidha hantida. Xuquuqaha bini'aadantinimo waa nooc ka mid xuquuq sharci kuwaas oo si gaar ah loogu beegsanayo ilaalinta xoriyada aasaasiga ah ee uu qofkasta leeyahay, sida xuquuqda noolaanshaha, xuquuqda takoor la'aanta, iyo xuquuqda waxbarashada.

Marka la gaadhayo go'aano ku saabsan xuquuqo shakhsi, maxkamaduhu waxa ay haystaan fursad ay ku caddeyn karaan xayn-daabka iyo asalka xuquuqahaas. Tani waxa ay xoojin kartaa xuquuqda shakhsi ee hoos timaada xeerarka jira. Tusaale waxa noqon kara, hadda oo kale, in "xuquuqda guursashada" aan lagu xaddidin lamaanayasha kala jinsiga ah.

Xaaladaha qaar, waxa laga yaaba macquul inay noqoto in maxkamaduhu aasaasaan xuquuqo "cusub". Marka si kale loo dhigo, aqoonsashada jiritaanka xuquuqo cayiman oo awal aan la hubin jiritaankooda ama la malaynayay in aanayba jirin xuuqahaasi.

Maxkamaduhu tan way samayn karaan iyagoo fasiraya xeerarkii horre u jirey. Tusaale ahaan, Hindiya, Dastuurka dalku wuxuu sheegaya in dowladda looga baahan yahay inay "[kor u qaado] heerka nafaqada, tayada nolosha shacabkeeda, iyo caafimaadka dadweynaha" Maxkamaduhu waxay u fasireen in tani sidoo kale ka dhigan tahay in dadku leeyihiin "xuquuqda helista cunto". Guddaha Ireland, maxkamaduhu waxay sheegeen in "xuquuqda shaqadda" ay tahay xuquuq shakhsiyeed oo uu Dastuurku damaanad qaaday, inkasta oo aan si cad loogu xusin Dastuurka.



### DARAASAD KIIS:

## AQOONSIGA XUQUUQDA HELISTA BII'OOYIN CAAFIMAAD LEH

Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Ameerika ee Inter-American Court of Human Rights waxa ay leedahay awood ay ku dhaqan geliso xuquuqaha uu damaanad qaaday Heshiiska Xuquuqda Aadanaha ee Ameerika ee u dhexeeya dalalka cayiman ee saxiixay heshiiskaas. Heshiiskaasi si toos ah ugama hadlo arrimaha cimilada ama deegaanka. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu ku waajibinayaa dowladaha inay qaadaan tallaabooyin lagu xaqiijinayo "dhammaan xuquuqaha ku gadaaman dhaqaalaha, bulshada, waxbarashada, sayniska, iyo dhaqanka" ee gobolka.

Iyadoo la raacayo go'aano kala duwan, Maxkamada Inter-American waxay aqoonsatay in xuquuqda "bii'ad caafimaad leh" ay qayb ka tahay xuquuqahaasi. Waxay si cad u sheegtay in xuquuqdan ay ilaalinayso qaybaha deegaanka sida kaymaha, badaha, webiyada, iyo waxyaabaha dabiiciga ah ee kale, iyagoo xuquuq u leh si gaar ah. Si kooban, Maxkamadu waxay xuquuqdan ka fasirtay Heshiiska Ameerika inkasta oo aan si cad loogu xusin heshiiska.

## LAALISTA SHARCIYADDA AAN CADDALADA AHAYN

Waa wax suurtagal ah in maxkamadaha qaar ay laalaan ama sharciyadda ka xayuubiyaan xeerar jira ama qawaaniin haddii loo arko in ay jabinayaan xeer kale oo ka sarreeya ama ka muhiimsan. Tani waxa ay la macno tahay in xeerkaasi uu si degdega u laalmayo. Tani waxa ay dhici kartaa, tusaale ahaan, haddi xeer lagu helo in uu kasoo horjeedo xeerkarka caalamiga ah, xeerarka xuquuqda bini'aadamka, ama dastuurka dalka.

### DARAASAD KIIS:

### SHARCI KA XAYUUBINTA SHARCIGA ISLAAM-FOOBIYADDA EE TALYAANIGA

Sannadkii 2015-kii, waxaa dalka Talyaaniga laga ansixiyay sharci loo yaqaanay "sharciga ka dhanka ah masaajida". Sharcigani wuxuu ka dhigayay mid aad u adag in la dhiso goobo cibaado oo aan ka tirsanayn Kaniisadda Katooliga wuxuuna lahaa shuruudo iyo tallaabooyin badan oo adag oo ay tahay in la maro si oggolaansho loo helo. Waxaa lagu dabaqay mid ka mid ah gobollada ugu dadka badan Talyaaniga, wuxuuna sharcigu xaqiijiyay in aan masaajidyo laga dhisi karin halkaas.

Kiis arrintaas ku saabsan ayaa la horgeeyay maxkamadaha Talyaaniga, ugu dambeyntiina wuxuu gaadhay Maxkamada Dastuuriga ah ee ugu sarreysa dalka. Maxkamadu waxay sheegtay in "sharciga ka dhanka ah masaajida" uu yahay mid aan Dastuuri ahayn. Marka si kale loo dhigo, maxkamadu waxa ay heshay in sharcigani jebinayo xeerar ka mid ah Dastuurka Talyaaniga. Xeerarka la ogaaday in uu kasoo horjeeday sharcigani waxa ka mid ahaa xorriyadda diinta iyo sinnaanta dhammaan dadka ee ku aaddan cibaadada. Sharciga si toos ah ayaa loo laalay, taasoo ka dhigan in uusan mar dambe wax sharci ah noqon karin aanayna dabiqi karin maxkamadaha iyo hay'adaha dawligu. Wixii ka dambeeyay go'aanka maxkamada, sharcigu wax saameyn ah ma uusan yeelan.

Mararka maxkamaduhu aanay lahayn awooda noocaas ah, waxa macquul noqon kara in ay dalbadaan in xeerar la laalo ama wax ka beddel lagu sameeyo. Si kastaba ha ahaatee, tani waxa ay la macno tahay in sharci dejintu ay qaadan tallaabo si ay u keenaan isbeddelka la sheegay, madama maxkamaduhu aanay lahayn awooda inay sidaas sameeyaan.

## BANDHIGIDA XADDIDAADAHA XEERARKA JIRA AMA HAB-RAACYADDA

Kiisaska maxkamadeed waxa ay daaha ka qaadi karaan daldaloolada, meelaha aan la ogeyn, ama xaddidaadaha hadda ka jira xeer ama siyaasad. Dacwadu waxay awooda in ay qasabto kuwa awooda haya si ay u qaadan tallaabo ay ku hagaajinayaan aaggagan xeerku ka xagal-daacayo.

Sida uu dhigayo xeerka xuquuqda aadanuhu, tusaale ahaan, dawladduhu waxa laga rabaa in ay qaadan tallaabo si ay u hubiyaan xuquuqda dadka oo dhan in la ixtiraamo lana ilaaliyo. Tan waxa ka mid noqon kara qaadista tallaabo sharci dejineed, iyo la jaanqaadka xeeraar munaasib ah iyo siyaasado si loogu ilaaliyo xuquuda aadanaha. Meelaha aan tallaaboyinkan laga qaadin, maxkamadaha ayaa lagu wargelin karaa si ay daaha uga qaadaan aaggagaas uguna khasbaan dawlada in ay qaado tallaabo ay ku saxayso.

### DARAASAD KIIS:

### CADDAALADA NAAFONIMO EE INTA LAGU GUDDO JIRO DHIBAATOOYINKA CAAFIMAAD: U QABANTA DAWLADDA JARMALKA MASUUL

Intii lagu guddo jirey cudurkii safmarka ahaa ee COVID-19, adeegyada caafimaadka adduunka oo dhan waxaa ku dhacay culays weyn. Taas ayaa keentay in ay jirto suurtogalnimo badan oo ah in dhakhaatiirtu u baahdaan isticmaalka nidaam loo yaqaan "triage", oo ka saacidaya in la go'aamiyo qofka mudan in daaweyn degdeg ah loo bilaabo marka aysan jirin aggab ku filan dhammaan bukaanada.

Sagaal qof oo naafonimo qaba ayaa cabasho u gudbiyay maxkamadaha dalka Jarmalka, iyagoo ku doodaya in maqnaanshaha sharciyo ama tilmaamo cad oo lagu hago go'aanada nidaamka triage ay khatar ku tahay dadka naafada ah, maadaama laga yaabo in si takoor leh loola dhaqmo. Maxkamada Dastuuriga ah ee Fadaraalku waxay la qaadatay dooddooda, waxayna amar siisay dowladda in ay dejiso sharciyo gaar ah oo lagu hagayo go'aamada triage-ka si dadka naafada ah loo ilaaliyo. Isla go'aanka dhexdiisa, Maxkamadu waxay cuskatay in sharciyadda sinnaanta ee hore u jiray aysan ku filnayn in ay difaacaan dadka naafada ah marka xaaladuhu aad u daran yihiin sida baahida daryeelka degdegga ah ayna tahay in wax badan ay qabtaan sharci dejintu.

# BALAADHINTA GALAANGALKA CADDAALADA

Dacwadu waxa ay bixisaa fursado kuwaas oo ay siiso shakhsiyaadka si ay u isticmaalan xuquuqdooda, uga hortagaan takoorka, iyo in ay madaxa u saaraan masuuliyada go'aan qaatayaasha wixii la xidhiidha tallaabooyinkooda sharci darrada ah. Waxay awooda in ay bixiso waddooyin loo maro caddaaalada oo awal laga yaabo in aanay jiri lahayn fursadaheedu. Si kastaba ha ahaatee, waddooyinkan loo marayo caddaaladu keliya waxay xaqiiqdii u adeegayaan caddaalada haddi cid walba galaangal u yeelan karto.

Maxkamaduhu waxay leeyihiin door ay ka ciyaaran balaadhinta galaangalka caddaalada iyo hubinta khaladaadka sharci in la saxo. Maxkamaduhu waxay leeyihiin awooda ay tan ku samayn karaan marka ay qaabaynayaan hannaanadooda iyo geedi-socodyada maareynta caddaalada. Maxkamaduhu waxa laga yaaba in loo soo jeediyo in ay laalaan ama ay wax ka qabtaan caqabado ka hortaggan ama xagal-daaciya caddaalad in ay helaan bulshooyin ama shakhsiyaad hor keena iyaga kiisas.

Hal tusaale waxa noqon kara dib uga fekerka caddadka ama nooca caddeyneed ee looga baahanyahay shakhsi ama bulsho ka hor inta aanay samayn sheegashooyin marka dhinaca kale laga eego addag in la caddeyo. Tani badanaa waxay qayb ka tahay kiisaska takoorka, kuwaas oo caddeyntu ay mar noqon karto wax aan jirin, adagtahay in la helo, ama ayba u gacan gasho dadka awooda leh.

### DARAASAD KIIS:

## CADDAALADA KIIS TAKOOR OO BILJIYAAN AH: DALBASHADA IN LA CUSKADO CADDEYN COD

2022-kii, Maxkamad Bilji ah ayaa u oggolaatay shakhsi in uu usoo gudbiyo duubis cod maxkamada taas oo la xidhiidha kiis takoor oo shaqaalaysiin ah. Tani waxa ay ahayd cod duubista wada sheekaysi ay la yeelatay shaqaalaysiiyaheeda, kaas oo usoo bandhigayay iyada heshiis shaqo oo gelin ah (beddelka mid labadda gelinba ah) sababtoo ah waxay ahayd xaamilo. Shaqaalaysiiyuhu kama war hayn in codka laga duubay.

Go'aankeeda qirashada caddeynta, maxkamada Biljan waxay tidhi "su'aasha caddeyntu waxa ay adayg ku tahay dhibanayaasha takoorka sababtoo ah cidda wax duubaysaa iyagu guud ahaan u dhaqmi mayso si furan. Xaqiiqda ah in dubiinada ay maxkamuduhu u aqoonsan karaan nooc ka mid ah caddeynta waxay xoojinaysa waxtarka xuquuqaha dhibenayaasha takoorka".

Galaangalka loo leeyahay caddaalada waxa kale oo lagu taageeri karaa aqoon-dhiska maxkamdaha iyadoo loo marayo geedi-socod dacwadeed. Tusaale ahaan, daaha ka qaadida caddaalad-darrada takoor, bulsho, iyo dhaqaale ee ka jira geedi-socodyadooda iyo go'aan gaadhistooda. Tani waxay ku qasbi kartaa in ay wajahaan hannaanadooda caddalada daradda ah ee ku milmay nidaamyaddooda iyo ku qancinta in ay iyagu qaadan tallaabo si ay u keenaan isbeddelka loo baahanyahay si wax looga qabto arrimahan nidaam.

### DARAASAD KIIS:

## WAJAHISTA TAKOORKA KA DHANKA AH DADKA MADOWGA AH EE NIDAAMKA CADDAALADA DAMBIYADDA EE KANADA

2014-kii, dacwad ciqaabeed ayaa lagu qaadday 22 jir madow ah oo ku sugan Toronto, Kanada, iyadoo lagu eedeeyay haysashada hub, taas ayaana sababtay in dadaalo joogto ah ay sameeyaan qareeno iyo dhaqdhaqaaqayaal si ay ugu muujiyaan maxkamadaha ciqaabta xidhiidhka ka dhexeeya takoorka ka dhanka ah dadka madowga ah iyo xukumida dambiyadda. Maxkamadaha ciqaabta waxa la hor keenay labo warbixinood isla wakhtigaa ninka la xukumayay, mid ka mid ah wuxuu ku saabsanaa takoorka ka dhanka ah dadka madowga ah ee bulshada Kanadiyaanka ah iyo mid kale oo ka hadlaysay taariikhda gaarka ah ee ninka la xukumay. Tani waxay keentay in ay bixiso faham balaadhan oo ku aadan takoorka iyo mahadhooyinka dhaawac ee la xiriira takoorka ee sharixi kara dambiga dhacay, sido kale waxay ka dalbadeen maxkamadaha in ay cuskadaan warbixinadan si ay usoo rogaan xukun gaaban

Kadib markii la tixgeliyay warbixinada, maxkamadii wax xukumaysay waxay soo rogtay xukun gaaban waxayna xustay in ay noqonayso "mid qiimo badan" in la helo warbixin tan la mid ah oo ay diyaar noqoto marwalba oo qof madow la xukumo. Go'aankan waxa la keenay maxkamada sare, taas oo ugu danbayntii diiday muddada xukunka ee uu soo rogay garsoorihii xukunka riday. Laakiin, si kastaba ha ahaatee, waxay aqbashay in maxkamaduhu tixgeliyaan saamaynta takoorka ka dhanka ah dadka madowga ah ee dambiilayaasha ah marka la xukumayo lana eego in "wax xidhiidh ah" ay la leedahay dambiile gaar ah. Waxa ay sidoo kale caddeysay in aan loo baahnayn muujinta "sabab xidhiidh oo toos ah" oo ka dhaxaysa dambiga iyo saamaynta taban ee nidaamka takoorka ka dhanka ah dadka madowga ah, waana in tixgelinahan oo kale lagu xisaabtamo.

Natiijada kiiskani aad ayay uga fogtahay baabi'inta cunsuriyada nidaamka caddaalada dambiyadda , laakiin waxay ku riixday makamadaha la jaanqaadista wax ka badan habraac iyo milicsiga cunsurinimada nidaam ee badhitaara kiisaska la horkeeno. Maxkamada sarre laftigeeda ayaa go'aankeeda ku furfurtay kalmadaha ah: "Waa mid ka baxsan shaki in cunsurinimada ka dhanka ah dadka madow, oo ay ka mid tahay cunsurinimada muuqata iyo ta nidaamba ay ahaayeen, haddana yihiin, mid xaqiiqo ka dhex ah bulshada Kanadiyaanka ah, gaar ahaan Aagga Weyn ee Toronto. Xaqiiqdaas waxay ka muuqataa hay'ado bulsho oo badan, oo laga xusi karo nidaamka caddalada dambiyadda. Si siman bay u caddahay in cunsurinimada ka dhanka ah dadka madow ay yeelan karto saamayn qoto dheer oo an la dareemin oo saamaysa dadka sida maalin laha ah ula kulma [...]. Cunsurinimada ka dhanka ah dadka madow waa in la qirtaa, laga hortagaa, la xakameeya, ugu danbeyna la tirtiraa."

## QAABAYNTA XAALADAHA TAAGEERAYA OLOLAYAASHA BULSHADA IYO DHAQDHAQAAQYADA

Dacwadu waxa sidoo kale laga yaabaa inay ololayaasha bulshada iyo iska-caabbinta u taageerto qaabab dadban. Kiisasku waxaa laga yaabaa inay isku dayaan hagaajinta deegaanka iyo xaaladaha lagama maarmaanka u ah u doodistooda iyo hawshooda olole.

Tusaale ahaan, dacwad ayaa loo adeegsan karaa si su-aal loo geliyo cabbudhinta noocyo gaara oo dhaqdhaqaaqyada ah, xannibaadaha saaran faafinta macluumaadka xuquuqda dadka, ama lacag-goynta faquuqa ah taasoo dhaqdhaqaaqyada ku sii adkaysa inay hawshooda qabsadaan.

Waxay ahaan kartaa go'aan istaraatiiji in lagu bilaabo kiisaska ku aaddan dhisidda awoodda bulshada, si bulshadu u noqoto mid joogta boos xooggan ama awoodeed oo ay ka duuli karto xilliga dheer, ama hormariso istaraatiijiyado adag oo mustaqbalka ah.

### DARAASAD KIIS:

### DALBASHADA AQOONSI: DARDARGELIN KA TIMI U DHAQDHAQAAQAYAASHA DEEGAANKA EE YUGRAYN

Bishii Luulyo 2000, afar shaqsi oo xiisaynayay inay daryeelaan deegaankooda ayaa isu yimi si ay koox u noqdaan. Waxay markaa dooneen inay kooxda u diiwaan geliyaan urur loogu yeedho "Guddiga Muwaadiniinta ee Daryeelka Deegaannada Asalka ah ee Dabiiciga ah ee Birisniyaak." Awoodaha maamulku way diideen inay diiwaan geliyaan ururkooda sababtoo ah xeerarka ururka looma diyaarin qaab ku salaysan sharciga dalka. Tusaale ahaan, xeerarkoodu kuma xaddidayn ficillada ururka deegaanka Birinsiyaak.

Afarta shaqsi waxay kiiskooda geeyeen maxkamadaha Ugrayn, ka dibna Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub. Intii lagu guda jiray, waxay joojiyeen ururka iyo hawlihiisiiba. Maxkamada Yurub wax cudurdaar ah uma ay helin xannibaaddii Yugrayn ee diiwangelinta ururrada. Waxay ku sii socotay inay sheegto in xeerka sharciyaynaya diiwaangelinta ururrada bulshada muwaadiniinta aanu kala caddayn awoodaha maamulkana siinayay khiyaar badan. Gunaanadka, Maxkamada Yurub waxay ogaatay in lagu xadgudbay xuquuqda shaqsiga ee xorriyadda ururrada.

Go'aanka ka dib, awoodaha maamul ee Yugrayn waxay tibaaxeen in shaqsiyaadka loo oggolaaday inay dib usoo codsadaan diiwaangelinta ayna tahay in dib u eegis lagu sameeyo go'aannadii hore ee khuseeyay ururkooda. Shan sano ka dib go'aanka, xeerka ururrada rayidka ee Yugrayn ayaa la beddelay, iyadoo gacan lagaga gaysanayo tirtirka xannibaadaha dhuleed ee saaran dhaqdhaqaaqyada.



## SOO KOOBIDDA WAXA AY DACWADA ISTARAATIIJI SAMEYN KARTO

Dacwada istaraatiiji waxay sameyn kartaa wax aad uga badan in keliya maxkamada lagu riixo inay go'aan ka gaadho sheegasho sharci. Waxay leedahay awoodda ah in la dalbado isbeddel iyadoo kor loo qaadayo wacyiga bulshada, la taageerayo dadaallada olole iyo dhisitaanka dhaqdhaqaaq, iyo beddelitaanka ama qaabaynta sharciga iyo geedi-socodyada sharci, iyo la xisaabtanka dadka awoodda haya.

Hadda waynu ognahay waxa dacwadu sameyn karto. Laakiin sidee loo isticmaali karaa si ay u sababto natiijo u adeegta caddaalada?

CUTUBKA SADDEXAAD:

# SIDEE LOO ADEEGSAN KARAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

# SIDEE LOO ADEEGSAN KARAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Adeegsiga istaraatiiji ee dacwad waxay la xidhiidhaa qorshaynta sida cabashooyin sharci oo kala duwani ay si togan u xoojin karaan wadajirna ula shaqayn karaan istaraatiijiyado kale si loo gaadho isbeddel. Waa dhif in cabasho sharci ay noqoto xalka keliya ee keenista isbeddelka loo baahanyahay, laakiin waxay qayb ka noqon kartaa geedi-socod ballaadhan oo xilliga dheer ah oo lagu gaadhayo isbeddelka ugu danbeeya.

Dacwad istaraatiiji waxay la xidhiidhaa dib u waajihidda dhibaatada, iyadoo laga bilaabayo waxa aasaaska ah ee isbeddelka u baahan. Inta badan, isbeddelkani aad ayuu uga waynaan karaa in lagu keeno hal tallaabo oo keliya. Waa tan marka muhiimadda dacwada istaraatiiji loo baahdo, iyadoo natiijada la rabo loo jejebinayo hadafyo yaryar, oo la gaadhi karo kuwaasoo lagu raadin karo tallaabo sharci. Talloobinkaa sharci midba midka kale ayuu dhisi karaa ama dhammaystiri karaa waxayna saacidi karaan u dhowaynta bulshada isbeddelka ugu danbeeya ee loo baaanyahay.

## DARAASAD KIIS:


## XUQUUQDA NOOLANSHAHA: ADEEGSIGA DACWAD SI LOO SHIDAALIYO DHAQDHAQAAQA JOOJINTA XUKUNKA DILKA

Adeegsiga dacwada ee dhaqdhaqaaqa joojinta xukunka dilka ee Maraykanka ayaa lagu qeexay "tartiibin istaraatiijiya". Beddelka inay bilawgaba kiis qaadaan iyagoo ku doonaya in la shaaciyo in xukunka dilku aanu dastuuri ahayn, wax maxkamaduhu aanay sharci ahaan awoodeen inay sameeyaan sannadihii hore ee dacwada arrintan, waxaa beddelkeeda kiisaska la waday waqti dheer.

Iyadoo la xujo-gelinayo caddaalad-darrooyinka yaryar xilli cayiman, kiisaskani waxay maxkamadaha siiyeen fursadda ah in ay dhinacyo kala duwan ka qiimeeyaan siyaasadda xukunka dilka ah si tartiib tartiib ah. Lagama horgayn hawsha "cabsida leh" qaadashada mawqif ballaadhan oo ah inay dastuuri tahay iyo in kale.

Kiis ayaa bilaabay xujo-gelinta dilka dhallinta iyo dadka naafada ah. Kiisas kale ayaa diiradda saarayay xukunka dilka ee waajibka ah, ama isdiiddooyinka sharciga ku jira sida xaqiiqada ah in kuwa aan qiran danbi ku aadan dil culus lagu fulinayo xukun dil ah, halka kuwa qirta denbigana aan lagu fulinayn. Kiisas ayaa xujo-geliyay "dhacdada maskaxeed ee dadka dilka-sugaya", waxyeellada gaadha maxaabiista sugaya dil soo fool leh laguna sii hayo qolka dadka dilka-sugaya waqti aad u dheer. Dacwad ayaa sidoo kale laga gudbiyay noocyada kala duwan ee dilka, iyadoo ahmiyad la siinayo xujo-gelin sharci oo ku aaddan hababka si gaar ah loogu tixgeliyay inay bini'aadannimada ka baxsan yihiin ee arxandarrada ah.

Waashintoon dhexdeeda, bilawgii 2010-neeyadii, daraasad ayaa laga sameeyay kiisaska xukunka dilka ee Gobolka. Daraasaddaas waxay muujisay in qofka Madowga ahi uu afar laab uga dhowyahay in dil lagu xukumo marka loo eego maxbuus isir kale oo kasta. Daraasaddaas waxa loo adeegsaday in kiis lagu geeyo ilaa Maxkamada Sare ee Waashintoon taasoo, 2018-kii, ogaatay in sharciga xukunka dilka ee Gobolku aanu dastuuri ahayn loona dabaqay hab aan sal iyo raad lahayn oo isir faquuq ah. Go'aankaasi mawqif ballaadhan kama qaadan in xukunka dilku aanu dastuuri ahayn duruuf kasta. Gobolka Waashintoon wuxuu ugu danbayn 2023-kii meel mariyay sharci soo afjaraya xukunka dilka.



# LA MACAAMILKA KIISAS SHARCI OO KALA DUWAN: CIQAABTA, MADANIGA, XEERKA HAY'ADAHA

Nidaamyada Sharci badankooda, waxaa jira saddex nooc oo sharci. Sharciyaddan waxa loogu talagalay inay qabtaan shaqooyin kala duwan oo is dhammaystiraya bulshada dhexdeeda. Waxayna kala yihiin:

## 1. Xeerka ciqaabta

Kuwani waa xeerar loogu talagalay inay joogteeyaan bulsho xasilloon oo bedqabta. Aragtidu waxay tahay in haddii qof xeerkan jebiyo uu bulshada si guud ugu keenayo dhaawac iyo waxyeello. Jebinta xeerarkaas waxa lagala kulmayaa ciqaab iyo ganaax, badanaa ay maxakamaduhu soo rogaan, taasoo u dhexayn karta ganaax lacageed ilaa xayiraad ilaa xukunno xabsi. Waxay daboolaysaa denbiyada sida dil ama weerar, laakiin waxa sidoo kale ku jira denbiyada aan ahayn "gacan-ka-hadal" sida musuq, khiyaano, ama lacag dhaqid.

## 2. Xeerka Madaniga

Kuwani waa xeerarka khuseeya dhexdhexaadinta khilaafaadka u dhexeeya shaqsiyaadka ama cidaha gaarka ah. Waxay badanaa raadiyaan in cid loo qaandhabo waxyeellada, khasaaraha ama dhaawaca ay u gaysatay cid kale. Tusaale ahaan, haddii cid ay waxyeello soo gaadho sababta oo ah qof kale oo jebiyay heshiis sharci oo kala dhexeeyay, ama uu si caadi ah u dhaawaco gef "aan denbi-ahayn" oo uu sababay qof kale - sida dhacdo shil gaadhi oo kale. Kiisaska maxkamadaha madaniga waxaa gudbiya shaqsi ama cid gaar ah oo ka gudbiya shaqsi ama cid kale. Tani waxay lid ku tahay dacwad ciqaabeedyada, kuwaasoo ay dawladdu kusoo oogto shaqsiyaadka.

## 3. Xeerka Hay'adaha

Kuwani waa xeerar khuseeya hay'adaha, oo ay ku jiraan dawladda iyo hay'adaha qaranka. Xeerarkani waxaa badanaa loogu talagalay in lagu hubiyo in waaxyaha dadwaynaha ay u dhaqmaan si sharci ah, macquulnima ah, caddaalad ah, oo u hoggaansan xuquuqda aadanaha. Maxkamaduhu waxay door muhim ah ku leeyihiin ku ilaalinta hay'adaha halbeegyada uu qeexay xeerka hay'aduhu.

Kiisaska istaraatiiji waxay ku bilaaban karaan dabbaqaadda mid ka mid ah xeerarkan, dacwad istaraatiijina waxay raadin kartaa ka faa'iidaysiga noocyo kala duwan oo sharci iyadoo loo marayo waddooyin kala duwan iyo qaabab kala duwan si loo dhaliyo isbeddel.



# XEERKA CIQAABTA

Waxay noqon kartaa in kiisasku ku lugyeeshaan xeerka ciqaabta, tusaale ahaan inay riixaan in lala xisaabtamo shakhsiyaadka qaarkood oo diidan inay u hoggaansamaan sharciga ama dhalinta isbeddelka loo baahan yahay. Denbi baadhista ama baadhistuba waxay noqon karaan fursado run sheegis iyo caddaaladeed. Dacwad ciqaabeed ayaa la raadsan karaa marka caddaalada la diido xasaanad cid leedahay awgeed, sida marka saraakiisha booliska loo ciqaabi waayo ama loo qabanwaayo denbiga inay ka masuul yihiin xadgudub ka dhan ah dadka Madowga ah. Dalalka badankooda, dacwad ciqaabeedyada ma raadsan karaan shaqsiyaadku. Waxaa qaada xeer ilaaliya guud isagoo ku metelaya dawladda. Xaaladan, bulshooyinku ama ururradu laga yaabee inay weli dawladda cadaadis ku saaraan dacwadaha noocaas ah.

Waxay noqon kartaa in kiisasku ay ku bilawdaan maxkamadayn ciqaabeed, laakiin ku dhammaadaan inay isu rogaan dacwad isku dayaysa inay qaabayso nidaamka caddaalada denbiyada. Tusaale ahaan, kuwa iska difaacaya eedaynta denbi waxay racfaan ka qaadan karaan ku dabaqaada xeerka ciqaabta ee kiiskooda iyagoo u sababaynaya inuu yahay mid dhinac u janjeedha, caddaalad-darro leh, una baahan yahay dib u habayn.

Waxay kale oo noqon kartaa in dhaqdhaqaaqayaashu si ula kac ah sharciga u jebiyaan si loo xadho, si ay toosh ugu qabtaan arrin ama u muujiyaan caddaalad-darro ka jirta nidaamka caddaalada denbiyada. Tan waxaa badanaa loogu yeedhaa dacwado muddaharaad.

DARAASAD KIIS:

## DUMINTA DHAXALKII GANACSIGA ADDOONSIGA: MUDDAHARAADAYAAL AY XEERBEEGTI XUKUN KA SII DAAYEEN

2020-kii, labo toddobaad ka dib dilkii George Floyd, tiro muddaharaadayaal ah ayaa dumiyay taallada ganacsaddihii addoonta ee Edward Colston ee Biristal, Ingiriiska, iyagoo taallada ku riday webiga Ayfon. Dhacdadan ka dib, ku dhawaad toddobaatan xusuusood oo kale oo ganacsigii addoonsiga iyo gumaystayaashii tixraac la leh ayaa laga tirtiray Ingiriiska gudihiisa.

Afar shaqsi ayaa loo xidhay waxyeello denbiyeed sababtoo ah doorkoodii riditaanka taallada, waxayna noqdeen in loogu yeedho “Afartii Colston”. Intii ay socotay maxkamadayntoodii denbi, waxay ku doodeen inay cudurdaar sharciya u haysteen tallaabooyinkooda. Waxay ku doodeen inay ahayd inay tallaabo qaadaan si looga hortago denbiga kan kasii culus oo ah suurad-xumeyn dadweyne, maadaama uu sii jiritaanka taalladu ahaa mid cadho dhalinaya, aflaggaaddo leh, oo walaac abuuraya. Waxay ku doodeen in golaha Biristal guuldarradooda ah inay meesha ka saaraan taalladan, ka sokow 30 sano oo codsiyo iyo dalabaad ka imanayeen bulshada Afrikaan-Kiribbiyaanka ah ee Biristal, ay ka dhignayd denbi edeb-darro ah oo xafiis dadweyne. Waxay sidoo kale ku doodeen in haddii denbi lagu xukumo ay ka dhignaanayso ku tumasho xuquuqdooda xorriyadda cabbirka aragtida iyo xorriyadda isu imaatinka.

Intii lagu gudajiray dhagaysiga maxkamada, fadhiisinka dadweynaha ee maxkamada waxaa buuxiyay dadka degaanka oo ku farxay markii la tusay muuqaalladii dhacdada. Afarta shaqsi waxaa xukunka ka sii daayay xeerbeegti ka dib markay maqleen cidda uu Colston ahaa, waxa uu sameeyay, sida goluhu ugu guuldarraystay inuu tallaabo qaado, iyo sida sii jiritaanka taalladu u dhalinaysay cadho ka wayn tan riditaankiisa.

# XEERKA MADANIGA

Kiisaska istaraatiiji laga yaabee inay sidoo kale adeegsaddaan xeerka madaniga. Tani waxay ku lugyeelanaysaa ka oogista maxkamadaha hortooda khilaafaadka sharci ee khaaska ah ee leh awoodda ah inay sababaan isbeddel ballaadhan. Khilaafaadkaasi waxay yeelan karaan qaabab badan, laga soo bilaabo shaqadda ilaa hantida ilaa daryeelka macaamiisha ilaa arrimaha qoyska.

DARAASAD KIIS:

## KA DOODISTA XEERARKA SHAQADDA EE FAQUUQA LEH: AQOONSASHADA RUMAYSNAAN FALSAFADEED

2008-dii, Tim Nicholson ayaa laga eryay ganacsi hanti deegaan oo wayn Ingiriiska gudihiisa. Wuxuu ku adkaystay in loo eryay maadaama oo uu rumaysnaa in bini'aadanku ku wajahan yahay isbeddel cimilo oo musiibo ah. Rumaysnaantaasi waxay ka dhignayd inuu doorbidayay inaanu ku safrin diyaarad, yareeyay cunitaankiisa hilibka, dib uga faa'iidaysan jirey hadhaaga cuntadiisa, dadka kalena ku dhiirri gelinayay inay dhimaan kaarboon soo dayntooda.

Wuxuu u baqsanaa mustaqbalka isirka aadanaha marka la tixgeliyo ku guuldarraysiga dhimista kaarboon soo daynta si heer caalamiya. Waxaa la ogaaday in rumaysnaantiisu ay liddi ku ahayd shaqaalaha sare ee shirkadda, isagiina waa la eryay.

Kiis ayuu maxkamad geeyay isagoo ku doodaya in aragtiyihiisa isbeddelka cimilada ay tahay inay ilaaliyaan xeerarka difaaca ka ah faquuqa diinta iyo rumaysnaanta falsafadeed ee shaqadda. Xarunta Racfaanka Shaqadda ee Ingiriiska ayaa ogaatay in rumaysnaantiisu ay tahay "rumaysnaan falsafadeed", sidaa awgeedna ay aqoonsatay in shaqaalaha aan lagu faquuqi karin shaqadda dhexdeeda iyadoo loo sababaynayo rumaysnaantooda dhabta ah ee dhibaatada cimilada.

# XEERKA HAY'ADAHA

Dacwado istaraatiiji oo badanbaa qayb ka noqda adeegsiga xeerka hay'adaha, oo ah hab muhiim ah oo kuwa awoodda siyaasiga ah haya lagaga xisaabiyo tallaabooyinkooda iyo is-indha tirkooda.

Tusaale ahaan, dawladda iyo hay'adaha waxaa lagu xujeyn karaa sababta ah inay ku xadgudbeen ama u dhaqmeen si halis gelinaysa ku xadgudubka xuquuqo si dastuuriya loo dhawray. Taa beddelkeeda, maxkamad ayaa lagu geyn karaa ku guuldarraysigooda inay addeecaan sharciga maareeya maamulka hay'adaha iyo sharci-dejinta. Tusaale ahaan, xeerka hay'adaha waxaa loo adeegsan karaa si loo beddelo siyaasado ama xeerar buuxinaya adeegsi aan sharci ahayn oo loo adeegsado awoodda sharci-dejinta.

DARAASAD KIIS:

## CADDAALAD U HELIDDA DADKA UU WAXYEELLEEYAY XADGUDUBKA QOYSKA

2012-kii, Ingiriisku wuxuu xeerar cusub ka soo saaray gargaarka sharciga ah. Gargaarka sharciga ah waa taageero dhaqaale oo dawladeed oo la kafaala qaadayo bixinta talo sharci ama metelaad sharci xaaladaha qaar. Xeerarkan cusubi waxay xannibaad adag saareen caddaymaha xadgudubka qoyska oo ay tahay in la soo bandhigo ka hor intaan gargaar sharci loo dammaanad qaadin khilaafaadka qoyska, oo ay ku jiraan kiisaska lagu doonayo amarro ilaalineed oo ka dhan ah lammaanayaasha xadgudubka badan. Xeerarka cusub waxa hoos imanaysay, in shakhsigu uu muujiyo in uu la kulmay xadgudub qoys labbadii sanno ee u danbeeyay si uu u helo gargaar sharci.

Kiis ayaa waxaa gudbisay Rights for Women, oo ah hay'ad samafal oo u ololaysa haweenka xuquuqdooda, gaar ahaan wixii la xiriira xadgudub jinsi-ku-salaysan. Kiisku wuxuu ku dooday in xeerarkaa cusubi si aan sharci ahayn haweenka uga xannibeen gargaarka sharciga, kuna qasbeen kuwa jir ahaan iyo galmo ahaanba ay ugu xadgudbeen lammaanahoodu inay ku wajahaan maxkamada metelaad sharci la'aanteed.

Rights for Women waxay u kuurgashay daraasad muujisay in 53% kuwa uu saameeyay xadgudubka qoyska inay doorteen inaanay ku dhaqaaqin kiisas la geeyo maxkamadaha qoyska, sababtoo ah ma ay heli karayn gargaar sharci. Maxkamadu waxay ogaatay in xeerka caddaynta ee cusub aanu sal iyo raad lahayn, iyo inuu majara-habaabinayey ujeeddada gargaarka sharciga ah maadaama oo uu gaar u soocayay shaqsiyaad badan oo uu saameeyay xadgudubka qoyska. Xeerkani waxa uu noqday, sidaa daraareed, mid la laalay ah. Inyar kaddib kiiska, dawladdu waxa ay ku dhawaaqday xeerar cusub oo kordhinaya xaddiga wakhtiga ee ku eg labadda sanno waxana laga dhigey shan sanno. Wixii loo gaadhay Janaayo 2018-kii, xaddidaadihii wakhtiga ee caddeynta xadgudubka qoyska ee gargaarka sharci waxa laashay Wasaaradda Caddaalada.

# TALLAABOOYINKA DACWADA

Waxaa jira tiro tallaabooyin iyo heerar ah kuwaas oo la xiriira maxkamad gaynta kiisaska. Mid kasta oo marxaladahan ka mid ah waxa ay lahaan kartaa natiijo goonniya waxayna si kala duwan wax ugu biirin karaan u ololaynta isbeddelka.

Tallaabooyinka saldhigga u ah dacwada waxaa lagu soo koobi karaa:

**1. Hanjabaad dacwad-furis**

**2. Kiis u gudbinta maxkamada iyo dhagaysiga**

**3. Kiis xallin**

**4. Kiis ku guulaysi**

**5. Kiis ku guuldarraysi iyo racfaan**

**6. Dib u dacwoodis**

Tallaabooyinka soo socda looguma talagelin inay noqdaan sharraxaad faahfaahsan ee dhammaan marxaladaha ku lugleh kiis geynta maxkamad. Beddelkeeda, dulmarkan fududi wuxuu muujinayaa sida tallaabooyin kala duwan oo ku jira geedi-socodka ay fursado kala duwan ugu soo bandhigi karaan riixista ama dhalinta isbeddel.

Dacwad bilaabista waa inaan loo samayn si fudud ama kelinnimo ah. Ka hor intaan dacwad la bilaabin, waxaa lagu taliyaa in la helo taageerada qareen kugu hagi kara tallaabooyinka cayiman ee kiiskaaga gaarka ah.



# HANJABAAD DACWAD-FURIS

Dacwadu waxay badanaa ku bilaabanaysaa qofka u dan leh inuu keeno kiis inuu ulajeedka u gudbiyo qofka uu doonayo inuu dacweeyo. Tani waa ogaysiis qofka la sii siinayo, laakiin sidoo kale waxay cida dacwada lala rabo siinaysaa fursadda ah inay arrinta xalliyaan ka hor intaan maxkamaduhu ku lugyeelan.

Keliya tallaabada gudbinta ulajeedkan ayaa ku filnaan kara keenista nooc uun oo ficil ama isbeddel ah. Waxa laga yaaba in qofka kale aanu ka warhayn sharcidarrada waxa uu samaynayay. Sidoo kale digniin ayay ka siin kartaa xaqiiqada ah in dadka kale ka warqabaan xuquuqdooda, diyaarna u yihiin inay ku hawlgalaan, ayna dhisayaan kiis iyaga ka dhan ah. Tani waxay cadaadis ku saari kartaa inay wax uun ka qabtaan arrinta si ay uga hortagaan aadista maxkamad.

DARAASAD KIIS:

## HANJABAAD DACWAD KU FURIS DUKAAN-WEYN: ISBEDDEL KU SAMAYNTA SOO DAYNTA CO2 KA DIB HANJABAAD SHARCI

Bishii Luulyo 2022-kii, Milieudefensie, oo ah Urur aan Dawli Ahayn (NGO) ayaa daraasad ka daabacay qorshayaasha cimilada ee 29 shirkado waawayn oo Holan ku sugan. Mid ka mid ah shirkadahaas waxay ahayd silsiladda dukaan-weynaha ee Alberti Heyn. Daraasaddani waxay muujisay in, celcelis ahaan, aanay shirkaduhu gaadhi karin wax aan ka badnayn 19% marka la eego dhimista soo daynta $CO_2$ sannadka 2030-ka. Tani waa ka sokow jiritaanka in sharkaduhu ku qasbanaayeen dhimista soodaynta $CO_2$ ugu yaraan 45% si loogu xaddido 1.5°C diiritaanka adduunka.

Markay natiijooyinkan daabacayeen, NGO-gu wuxuu tilmaamay inay bilaabayeen “baadhitaan sharci oo hordhac ah” iyo in hadafkooduna ahaa “mid aan dacwad ahayn, laakiin ah in la joojiyo isbeddel cimilo oo khatar ah. Si kastaba ha ahaatee, hadday lagama maarmaan noqon lahayd, [iyagu inay] filayeen oo awoodeen bilaabista dacwado cusub”. Saddex bilood keliya ka dib daabacaaddan, shirkadda Alberti Heyn waxay shaacisay isbeddel lagu samaynayo hadafyadoodii dhimista soodaynta $CO_2$ ee qiyamka silsiladdooda oo ah in laga beddelayo 15% lagana dhigayo 45% ee sannadka 2030-ka.

# KIIS U GUDBINTA MAXKAMADA IYO DHAGAYSIGA

Kiis xerayntu waxay ku lugleedahay maxkamad u gudbinta rasmiga ah ee cabasho sharci, taasoo markaana lala wadaago shaqsiga ama cidda la dacweeyay.

Cabashadani waxay si rasmiya u soo bandhigtaa dhawr xaqiiqooyin iyo doodo ah oo muujinaya in sharciga la jebiyay. Cabashadan waxaa markaa lagu sii lafagurikaraa dhegaysiyo, kuwaasoo ah dacwado daahfuran oo xaqiiqooyinka iyo doodaha si qota dheer loogu lafaguro. Geedi-socodkan laftiisa ayaa kuwa la soo dacweeyay cadaadis ku saari kara inay tallaabo qaadaan si arrinta loo xalliyo inta aan maxkamadu go'aan ka gaadhin.

Tan waxaa sababi kara, ka dib akhrinta iyo dhegaysiga cabashada iyo caddaynta lidka ku ah, in dhinaca kale ogaado in fursaddooda guulaysigu ay hoosayso. Waxay kale oo xataa noqon kartaa inaanay ka warqabin booskooda sharciyeed ka hor intaan kiiska la keenin.

DARAASAD KIIS:

## KOOX DEEGAAN OO MUUJISAY IN MAAMULADDA QORSHAYNTU SHARCIGA JEBINAYAAN

2021-kii, waaxda qorshaynta ee Ayrlaan ayaa bixisay oggolaansho dhismaha jid 18km ah oo ku soo wareegaya magaalada Gaalway. Go'aankan waxaa xujo geliyay koox loogu yeedho Friends of the Irish Environment, kuwaasoo ku dooday in go'aanka la qaatay iyadoo aan xisaabta lagu darsan Qorshe Hawleedka Cimilada Ayrlaan. Qorshahan waxaa afar cisho ka hor iclaamisay dawladda, waxaana loo socodsiinayay inuu yaraynayo saxmadda baabuurta oo ay dani ugu jirto isu-socodka dadka, baaskiillada, iyo socodka si loo dhimo soo daynta kaarboonka.

Waaxda qorshaynta ee Ayrlaan waxay mar danbe tilmaameen inaanay la dagaallamayn xujo-gelintaas sharci sababtoo ah “kama ay warqabin […] in la hirgeliyay Qorshe Hawleedka Cimilada 2021-ka” qorshahana aan lala wadaagin. Waxay aqbaleen in oggolaanshahoodii hore uu sharci-darro ahaa oo aanu ansax sii ahayn.

# KIIS XALLINTA

Inta lagu gudajiro geedi-socodka dacwada, qofka kiiska lagu oogay laga yaabee inuu go'aansado inaanay u qalmin inuu isku difaaco maxkamad. Waxa kale oo dhan marka laga yimaaddo, waa geedi-socod kharash badan oo waqti qaadanaya. Maxkamaduhu sidoo kale waxay doorbidaan khilaafaadka sida saaxiibtinnimada ah lagu dhammeeyo maxkamada ka hor, waxayna badanaa codsadaan in isku day xal la sameeyo.

Waxa laga yaaba keliya inay noqoto heshiis xallineed ka dhaca maxkamada bannaankeeda ka awooda in uu keeno isbeddelka loo baahanyahay (ama isbeddelka haboon, hadda) marka loo eego cidda kiiska gudbisay.

DARAASAD KIIS:

## U-DAGAALANKA URURKA SOUTHALL BLACK SISTERS EE ILAALINTA SAMAFALKA: MAXKAMAD GEYNTA GOLAHA DEEGAANKA

Ilaa 1979-kii, Southall Black Sisters ayaa adeegyo gaar ah siinaysay haweenka Aasiyaanka iyo Afrikaan-Karibbiyaanka ah, gaar ahaan wixii khuseeya arrimaha xadgudubka qoyska. 2007-dii, waxay maalgelin ka helayeen Degmada Iilin ee Landhan markii loo sheegay in Degmadu beddelayso shuruuddeeda maalgelinta.

Degmadu waxay sheegtay inay filayeen in adeegyada maalgelinta la siiyo "dhammaan shaqsiyaadka iyadoo aan loo eegayn jinsiga, dhinaca ay u janjeedhaan galmo ahaan, isirka, caqiidada, da'da, naafannimada, ee deggan Degmada Iilin gudaheeda ee wajahaya xadgudub qoys".

Southall Black Sisters waxay arrinka geeyeen maxkamad, iyagoo iftiiminaya in hannaanka noocan ahi uu saamayn taban oo aan dheellitirnayn ku yeelanayo haweenka Madowga iyo Dadka Midabka leh (BPOC), maadaama oo ay ku tiirsanaayeen adeegyada gaarka ah sida kuwa ay bixinayeen Southall Black Sisters kaasoo maalgelintiisa lagu jari doono shuruuddan. Degmadu way ka baxday kiiska maalintii labaad ee dhegaysiga, waxayna yeeshay inay beddesho hannaankeeda maalgelinta samafallada xadgudubka qoyska.

Xilligaa, Southall Black Sisters waxay dhaheen "bilawgiiba, way u caddaatay garsoorihii guddoominayey [...] iyo dhammaan kuwii kale ee joogay maxkamada oo ay ku jiraan fadhiga dadweynaha ee maxkamada, in Golaha Deegaanka ee Iilin ay ku socdeen waddo halis ah markay isku dayeen inay qiil u yeelaan go'aankoodii maalgelin ka jarista [Southall Black Sisters] iyo inuu beddelkeeda u xilsaaray hal adeeg guud oo degmadoo dhan ah xadgudubka qoyska oo ku qotoma 'sinnaanta' iyo 'isku-duubnida'". Garsoorihii gacanta ku hayay kiisku wuxuu yiri "Sida aan isku dayay inaan u sharxo, adeegyada gaarka ah ee loogu talagalay dadka laga tirada badanyahay ee ka imanayay il gaar ah waa faquuq-la-dagaallan wuxuna horumarinayaa ujeeddooyinka sinnaanta iyo isku-duubnida".



## KIIS KU GUULAYSI

Qaar badan marka loo eego, inay kiis guulaystaan waxay la xidhiidhaa ka helitaanka maxkamada go'aan iyaga dani ugu jirto. Taas macnaheedu waa in maxkamadu ku raacday doodahoodii go'aankana ay sidaa ku gaadhay. Waxa laga yaabaa in go'aankan la doorbidayo laftiisu dhaliyo isbeddelkii laga rabay maxkamadaha. Tusaale ahaan, laalidda xeer gaara si aanu u sii ahaan mid la sii adeegsan karo ama la dhaqangelin karo.

DARAASAD KIIS:

### ISKA CAABBINTA ISLAAM FOOBIYADDA: LAALIDDA MAMNUUCIDA XIJAABKA EE DUGSIYADA EE USTERI

2019-kii, Dawladda Usteri waxay meel marisay xeer ka mamcuucaya ardayda dugsiyada hoose ee ka yar 10 jirka inay gashtaan "dhar kasta oo mabaadii'da ama diintu saameeyeen oo la xidhiidha hagoogta". Inkastoo hadalkani aanu si gaara u cayimin dadka caqiidada Muslimka haysta, ulajeedkiisa iyo saamayntiisu waxay ahayd in xijaabka laga mamnuuco dugsiyada hoose. Tusaale ahaan, koofiyadda yuhuudda iyo koofiyadda siiqiyiinta waa la oggoolaa in la xidhto iyadoo la raacayo sharciga.

Labo qoys ayaa maxkamadaha Usteri xujo ku geliyay mamnuucistaas iyagoo helaya taageerada Bulshada Diimeed ee Muslimka ee Usteri (IGGÖ). Qoysaskani waxay metelayeen labo gabdhood kuwaasoo damcay inay xijaab gashadaan inta fasaxa iyo dugsiga dhexdiisaba si ay u muujiyaan xorriyaddooda diimeed. Maxkamada Dastuuriga ee Usteri way laashay xeerkan waxayna amartay in aan la sii dabiqin. Go'aankeeda, maxkamadu waxay tibaaxday in "mamnuuciddan beegsiga ah [...] si gaar ah u saamaynayso ardayda dheddiga ah ee Muslimka, sidaa darteedna ay iyaga ardayda kale ee labka iyo dheddigaba ah uga soocayso qaab faquuq ah". Waxay kale oo aqbashay in mamnuucidda noocaasi "ku luglahayd khatarta ah inay ka dhigto helista waxbarashada mid kusii adag hablaha Muslimka ama inay iyaga ka dhex takoorto bulshada".

Taa beddelkeeda, isbeddelku wuxuu ku iman karaa cawaaqibka go'aanka. Tusaale ahaan, qofka ama cidda la dacweeyey waxaa lagu amri karaa inay keenaan jidwal ay ugu talagaleen inay go'aanka ku hirgeliyaan. Qaabkan, maxkamadu ma cayinto isbeddelka la rabo inuu dhaco si sharciga loogu hoggaansamo. Tani waxay weli cadaadis ku saaraysaa qofka ama cidda la dacweeyay si ay tallaabo u qaadaan. Kiisaska badankooda, inkasta oo kiis lagu guulaystay, hawl dheeriya ayaa loo baahdaa in la qabto si loo hubiyo in go'aanka loogu dhaqmo si ficil ah.

## KIIS KU GUULDARRAYSI IYO RACFAAN

Xataa marka kiiska aan lagaga guulaysan hoolka maxkamada, dacwadu waxay natiijo fiican ka dhalin kartaa ulajeedka. Go'aan tabani wuxuu sii iftiimin karaa caddaalad darro ku gedaaman arrin gaar ah wuxuuna shidaalin karaa ololaha. Dacwad ayaaba waxaa loo oogi karaa si loogu guuldarraysto sababtan lafteeda awgeed.

Kiis ku guuldarraysigu wuxuu fal dedejiye u noqonkaraa inuu hawlgeliyo jilayaal iyo go'aan gaadhayaal kale oo haya awoodda siyaasi si isbeddel loo dhaliyo.

DARAASAD KIIS:

### GUULDARRO AYAA WAXAYBA HORSEEDDAY ISBEDDEL SHARCI-DEJINEED OO KU SAABSAN FAQUUQA MUSHAHAR-BIXINTA

Lilly Ledbetter waxay shaqaale ka ahayd shirkadda Goodyear Tire and Rubber muddo 19 sano ah. Markay ku dhowaatay hawlgabka, waxay ogaatay in la siinjiray mushahar aad uga yar kii saaxiibbadeedii shaqadda ee labka ahaa ee ay isku heerka iyo khibradda ahaayeen. Waxay kiiskeeda la aadday maxkamadaha Maraykanka. Si kastaba ha ahaatee, way ku guuldarraysatay kiiskeedii qodob farsamo awgii.

Waqti badan ayaa ka soo wareegay markii go'aannada faquuqa mushaharka si lid ku ah looga gaadhay iyada, sidaa darteed marka loo eego xeerarka habraaca maxkamaduhu ma ay qiyaasi karin inuu faquuq ka jiray kiiska dhexdiisa.

2009-kii, isla sannadkii kiiska lagu guuldarraystay, Aqalka Wakiillada Maraykanka waxay soo kordhiyeen Xeerka Mushahar-bixinta Caddaalada ah ee Lilly Ledbetter. Xeerkani wuxuu tibaaxayey waqtiga go'an ee dacwad mushahar-sinnaan ah lagu qaadi karo inuu dib ula bilaabmayo jeeg kastoo cusub oo uu saameeyay faquuqii mushaharka ee hore. Tani waxay ka dhigantahay inaan maxkamaduhu ku tiirsanaan karin qodobka habraaca si ay u xannibaan kiisaska mushahar-u-sinnaanta.

Marka kiis lagu guuldarraysto, waxaa suuraggal ah in racfaan loogu qaato maxkamad sare ama xataa maxkamado gobol ama kuwa caalamiya. Tani waa fursad kiiska dib loogu tixgeliyo iyadoo lagu salaynayo in si qaldan loo go'aamiyay. Maxkamadahani waxay gaadhi karaan gunaanad ka duwan kii maxkamada hore wuxuuna dhalin karaa guul. Mawduucyada racfaan qaadashada iyo maxkamadaha gobol iyo kuwa caalamiga ah waxaa lagu lafaguray qaybaha kale ee haggahan.

## DIB U DACWOODIS

Mararka qaar isbeddelka waxaa keliya oo dhab ahaan loogu dhalin karaa in si soo noqnoqod leh dib looga dacwoodo arrinta. Tani waxay xaajada kusoo celcelisaa maxkamadaha ilaa tallaabooyin qumman laga samaynayo si loo saxo dhibta.

Sida sharciyadda badanaa ay u diidaan dadka awoodda hayaa, go'aannada maxkamadana sidoo kale waa la diidi karaa haddii aanu jirin dabaggal ama cadaadis joogto ah oo la saarayo kuwa ay waajibka ku tahay in ay u hoggaansamaan.

Dib ugu soo celinta xaajada maxkamada waxay fursad siin kartaa in la soo rogo tallaabooyin dheeriya oo maxkamadeed, taasoo cadaadis siyaada ah saari karta kuwa ku qasban inay hawlgalaan.

### DARAASAD KIIS:

### MAXKAMAD KULA NOQOSHADA KIISKA MAARAYNTA QASHIN-QUBKA EE ISLOOFAAKIYA

Goob qashin-qub ah oo ku taal Bofashki Khuumek, Gobolka Shiliina ee Isloofaakiya ayaa markii ugu horreysay la furay 1950-meeyadii waxaana 2010-neeyadii lagu dhaleeceeyay inaanay u hoggaansamin sharciyadda MY ee tallaabooyinka badbaadada iyo xakamaynta qashinka. Xeerkani wuxuu dejiyaa halbeegyada caafimaadka aadanaha iyo deegaanka lagaga dhawrayo saamaynta xun ee ay keento ururinta, qaadista, kaydinta, maaraynta, iyo tuurista qashinku. Xeerkani wuxuu waajibinayay in dhammaan goobaha aan u hoggaansanayn la xidho 2009-ka, haddii kale ay keenaan "qorshe habaynta goobta ah" oo habboon oo qeexaya sida ay ugu hoggaansami doonaan xeerka qashin-qubka ee MY.

Sannadkii 2013-kii, Maxkamada Cadaaladda ee Midowga Yurub waxay ogaatay inay sharci-darro ahayd in Isloofaakiya ay oggolaato hawlgalka goobta Bofashki Khuumek iyada oo aan la hayn qorshaha habaynta goobta. Iyadoo ay taasi jirto, goobta qashin-qubku waxay sii waday shaqadeeda iyada oo aan lahayn qorshe noocaas ah sannado badan ka dib go'aanka maxkamada, waxaana dhaqdhaqaaqayaasha maxalliga ahi ay muujiyeen in wax goobta ka soo dareeray ay wasakheeyeen biyaha dhulka hoostiisa. Sannadkii 2016-ka, Hay'ada Kormeerka Deegaanka ee Isloofaakiya waxay amartay in goobta qashin-qubka la xidho, goobtana dib loo hagaajiyo. Tanna sidoo kale waa la iska dhegatiray.

Dacwada ayaa markaa dib loogu celiyay Maxkamada Cadaaladda ee Midowga Yurub markii labaad. Bishii Jannaayo 2018-kii, Maxkamadu waxay ogaatay in Isloofaakiya ay ku fashilantay inay u hoggaansanto go'aankeedii hore. Waxay ku amartay Isloofaakiya inay bixiso lacag dhan 1 malyan oo Yuuro fashilkan awgii. Waxay sidoo kale amartay inay bixiso ganaax dhan 5,000 oo Yuuro maalin kasta oo dib looga dhaco u hogaansamidda go'aankaa hore. Bishii Diisambar ee sannadkaas, goobta qashin-qubka si buuxda ayaa loo xidhay.

## SOO KOOBIDDA SIDA LOO ADEEGSAN KARO DACWAD ISTARAATIIJIYADEED

Waxaa jira siyaabo kala duwan oo dacwadaha loo adeegsan karo si isbeddel loo dhaliyo looguna taageero bulshooyinka iyo dhaqdhaqaaqyada shaqadooda. Taa waxa lagu gaadhi karaa iyadoo laga qaybqaato noocyada kala duwan ee sheegashooyinka xeer iyo sharci ee istaraatiijiyadaha sharciga ee muddada dheer.

Isbeddelladu waxaa laga yaabaa oo kale inay ka dhashaan heerarka kala duwan ama lama filaanka ah ee geedi-socodka dacwadaha, oo ay ku jirto natiijada go'aan maxkamadeed oo taban. Horumarinta istaraatiijiyad sharci waxay la xidhiidhaa aqoonsiga fursadahan kala duwan ee ka faa'iideysiga dacwadaha, laakiin waxay sidoo kale la xidhiidhaa aqoonsiga marka ugu habboon ee la geli karo dacwad.

Tani waxay ina dul geynaysaa su'aasha ah: goorma ayaad isticmaali kartaa dacwad istaraatiiji?

CUTUBKA AFRAAD:

# GOORMA AYAAD ISTICMAALI KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

# GOORMA AYAAD ISTICMAALI KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Dacwad istiraatiiji waxaa sida ugu wacan loo adeegsadaa marka wakhtiga iyo xaaladdu ay ku habboonyihiin. Waxay wadataa halis gaar ah oo ku aaddan dhammaan kuwa ku lugleh, ma aha wax si fudud loo qabto.

Dad badan ayaa u arka inay tahay farsamada ugu dambaysa ee la adeegsado. Laakiin dacwada istiraatiijiga ah waxay noqon kartaa aggab muhiim ah oo gacanta ugu jirta bulshooyinka doonaya caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha. Waxay ugu faa'iido badan tahay marka loo baahdo in loogu hanjabo cawaaqib xumo qofka awoodda haya, laakiin aan hayn rabitaanka, inuu sameeyo isbeddelka loo baahan yahay.

Dacwada istiraatiiji way ka cawaandisan tahay farsamooyinka isku daya inay isbeddel ku dhaliyaan qancin ama dhiirigelin. Waxa kale oo dhan marka laga yimaaddo, waa geedi-socod rasmi ah oo sharci ah oo khilaafka cidkale loo gaadhsiiyo. Caadi ahaan waxaa mudan in la tixgeliyo dacwada marka farsamooyinka kale ee aan ka cawaandisanayn la adeegsado ayna ku kor fashilmaan kuwa leh awoodda siyaasada ama saamaynta. Marka dadku go'aansadaan in ololahoodu u baahan yahay "budh", ee aanu u baahnayn "kaarooto", si wax looga qabto, waa marka dacwadu meesha soo gasho.

Iyadoo tan maskaxda lagu hayo, dacwada istiraatiijiga ah waxaa si wax ku ool ah loogu adeegsan karaa xaalado istiraatiiji ah oo kala duwan, isgoysyo, ama fursado, sida:

- **marka isbeddelka siyaasad uu qaadanayo waqti dheer;**
- **marka ay dhaqangelin la'aan joogto ah ka jirto xeer ama siyaasad jirta;**
- **marka loo baahdo in la kordhiyo cadaadiska oo si degdeg ah loo kobciyo wacyiga;**
- **marka aad ogaato in aanu ahayn arrin iskii u jira;**
- **marka arrinta aan waligeed la horgeyn maxkamadaha / kiisaska hore loo horgeeyay maxkamadaha aanay u adeegayn caddaalada;**
- **marka aad rabto inaad awood ku siiso bulshadaada ama dhaqdhaqaaqaaga helitaanka caddaalada;**
- **marka aad u baahan tahay inaad la wareegto arrimaha sharciga ee khuseeya adiga iyo bulshadaada.**

Marka la go'aaminayo in dacwadu tahay farsamada "saxda ah" ee la doorto, halisaha iyo caqabadaha sidoo kale waa in la tixgeliyaa. Dacwada waa in laga fogaadaa marka halisaha iyo caqabadaha ku gedaaman qaadista kiiska ay ka miisaan wayn yihiin saamaynta suurtagalka ah ee kiiska. Waa kuwan qaar ka mid ah halisaha iyo caqabadaha loo baahan yahay in la tixgeliyo marka dacwada loo isticmaalo farsamo ahaan:

- **buuxinta shuruudaha habraaca;**
- **waqti gelinta ka raadinta isbeddel maxkamadaha hortooda;**
- **ku xisaabtamida kharashaadka (mid maaliyadeed iyo mid aan ahaynba) ee dacwadaha.**

# MARKA ISBEDDELKA SIYAASAD UU WAQTI DHEER QAADANAYO

Waxaa laga yaabaa in dadaallada lagu doonayo in isbeddel lagu keeno sharci ah ama siyaasad iyada oo loo marayo u doodis, ololayn, iyo dadaallo loobiyayn ay qaadanayaan waqti dheer. In kasta oo dacwada lafteedu ay qaadan karto sanado badan, waxay mararka qaarkood bixisaa waddo isbeddel oo ka degdeg badan khiyaarrada kale.

Tusaale ahaan, isbeddellada sharciga ama siyaasada waxaa laga yaabaa inay qaadanayaan waqti ka dheer celceliska waqtiga ay qaadanayso in sharciyadda lagu meel mariyo hay'adaha sharci-dejinta. Geedi-socodyadaa sharci-dejintu waxaa laga yaabaa in ay gaabis noqdaan ama la joojiyo sababtoo ah qaab-dhismeedka siyaasadeed ee sharci-dejinta ee xilli gaar ah. Sugitaanka wareeg doorasho oo kale ama sugitaanka dib-u-habaynta danaha siyaasadeed waxaa laga yaabaa inay iska dheeraato. Waxaa xitaa laga yaabaa in sharci-dejinta ay si xad dhaaf ah u saameeyaan loobiyaynta iyo dhiirrigelinta maaliyadeed ee kuwa dheefsanaya dhibaatada laga doodayo.

Maxkamaduhu waa inay noqdaan kuwo madax-bannaan, taas oo macnaheedu yahay inaan qaybaha kale ee dawladdu si aan habboonayn u saamayn karin, sida xukuumadda ama sharci-dejinta. Sidoo kale si aan hagaagsanayn uma saamayn karaan danaha gaarka ah ama kuwa xisbiyeed. Doorkoodu waa inay go'aamiyaan kiisaska oo keliya iyadoo lagu salaynayo caddaymaha hortooda yaal iyo si waafaqsan sharciga. Sidoo kale waa inay noqdaan kuwo aan eex lahayn, ma aha inay go'aankooda ku saleeyaan eex shaqsi ah ama nacayb. Maadaama aysan u nuglayn saamayn siyaasadeed oo la mid ah tan sharci-dejinta, waxay mararka qaarkood isbeddelka u riixi karaan si ka dhaqso badan sida sharci-dejiyayaashu u riixi lahaayeen.

## DARAASAD KIIS:

## QABASHADA SHIRKADAHA UGU WAAWAYN EE TUBAAKADA

Suuqa tubaakadu waa mid aad u xoog badan aadna u waxyeello badan, waa labo khatar ah oo israacay. Waxay caan ku yihiin sameynta buug-ciyaareed ay ka buuxaan xeelado iyo qoraallo ay u isticmaalaan inay kaga hortagaan sharciga iyo inay ku ilaashadaan danahooda ganacsi tobannaan sano. Sannado badan, waxay xoogga saareen mas'uuliyadda shaqsi ahaaneed ee macaamiisha, iyagoo difaacaya habdhaqankooda ganacsi iyagoo tixraacaya xorriyadda ikhtiyaarka shaqsi ahaaneed.

Waxay lacag siiyeen saynisyahano si ay u soo saaraan waraaqo daraasad ah oo shaki gelinaya saamaynta caafimaad ee sigaarka, waxayna si adag u wiiqeen daraasada sayniska ee helaysay waxyeellooyinka lala xidhiidhiyo sigaarka. Waxay ballan qaadeen inay is-korjoogteeyaan, si aan sharcigu u korjoogtayn. Sidoo kale waxay si macangagnimo leh u diideen sifada qabatinka ah ee badeecadahooda, iyo saamaynta waxyeellada leh ee suuqgeyntooda ee ka dhanka ah carruurta.

Laga soo bilaabo 1950-meeyadii, shirkadaha tubaakadu waxay maalgeliyeen shirkadaha Xidhiidhka Dadweynaha iyo loobiyaynta kuwaas oo ilaaliyay xoogga ay ku leeyihiin Aqalka Wakiillada Maraykanka, iyagoo hubinaya in loo xagliyo fadhiyada siyaasad-dejinta. Kani waxa uu ahaa dabar aad u adag in la jebiyo, guulihii lagu debciyay dabarkaana waxa ay ka bilawdeen dadaallo dacwadeed. Kiisaskii ugu horreeyay ee la keenay maxkamadaha 1950-meeyadii ilaa 1980-meeyadii inta badan way fashilmeen, kuwan waxaa keenay dad la ildarnaa kansarka sambabada iyo qoysaskooda oo sheeganaya magdhow si ay u daboolaan kharashaadka caafimaadka, mushaharka lumay, iyo xanuunka iyo silica. Mowjaddii labaad ee kiisaska, intii u dhaxaysay 1980-meeyadii iyo horraantii 1990-meeyadii, waxay ku salaysnaayeen istaraatiijiyad kale. Waxay diiradda saareen fashilka shirkadaha tubaakada ee ah inay ka digaan khataraha sigaar cabbista.


Kiisaskan waxaa inta badan gaabis ka dhigayey qareennada tubaakada, taas oo ka dhigtay kuwo dad badan aad qaali ugu ah inay sii wadaan. Mowjaddii saddexaad ee kiisaska, 1990-meeyadii, ayaa ahaa kuwo guul badan gaadhay. Kiisaskan waxa qaaday gobollo goonni ah, iyagoo ku doodaya in dhibaatooyinka caafimaad ee ay sababtay tubaakadu ay kharash badan ku keentay nidaamyada caafimaadka dadweynaha ee gobollada. Kiisaskan waxay ku qasbeen suuqa tubaakadu inuu daaha ka qaado 35 milyan oo bog oo dukumentiyo ah oo muujinaya sida warshaduhu u isticmaaleen kiimikooyin si ay badeecadahooda uga dhigaan kuwo qabatin badan leh, u suuqgeeyeen si khiyaano leh, ayna u qariyeen saamaynta ay ku leeyihiin caafimaadka. Kiisaskan waxaa lagu xalliyay 246 bilyan oo Doollar, taas oo ahayd xallintii ugu weyn taariikhda sharciga Maraykanka.

Waxay sidoo kale bar isbeddel u ahayd suuqa tubaakada. In kasta oo suuqu uu weli awood leeyahay, dacwado ayaa waxaa mar kale keenay shaqsiyaad iyo qoysas magdhow ka doonaya waxyeello, fahanka dadweynaha ee isticmaalka tubaakaduna waa isbeddelay. Maraykanka dhexdiisa, siyaasadaha gobolka ee ku aaddan xakamaynta suuqa tubaakada ayaa ugu dambeyntii noqday kuwo aad u adag oo xannibaad badan leh. Sannadkii 2009-ka, Aqalka Wakiillada Maraykanka waxay meel mariyeen Xeerka Kahortagga Sigaar-Cabbista Qoyska iyo Xakamaynta Tubaakada kaas oo kordhiyay xakamaynta soo saarista, qaybinta, iyo suuqgeynta badeecadaha tubaakada.

## MARKA AY DHAQANGELIN LA'AAN JOOGTO AH KA JIRTO XEER AMA SIYAASAD JIRTA

IWaxaaba laga yaabaa in xeerarku aysan ahayn kuwo aan ku filnayn. Waxaa xitaa laga yaabaa in lagu qaabeeyay oo lagu hormariyay ka dib sannado badan oo u doodis, ololeyn, iyo dadaallo loobiyayn ay sameeyeen bulshooyinku. Taa beddelkeeda, dhibaatadu waxay noqon kartaa in xeerarkan aan la raacin oo kuwii lagula xisaabtami lahaa xeerarka ee hoos imanayay ay ka faa'iidaysanayaan u hoggaansanaan la'aantan.

Xaaladdan waxay noqon kartaa mid ay lagama maarmaan tahay in maxkamad la aado, gaar ahaan marka dhammaan dadaalladii kale ee lagu hubinayay u hoggaansanaanta xeerarku ay dhammaadeen. Waxaa laga yaabaa inay jirto guuldarro dheeraad ah oo ka timaadda dhinaca mas'uulka ka ah kormeerka dhaqangelinta sharciga, hay'adahan kormeerkana sidoo kale waa in lagula xisaabtamaa fashilkan.



DARAASAD KIIS:

### BULSHOOYINKA TUNUVIVI OO JOOJIYAY MASHRUUC GAAS OO SHARCI-DARRO AH: ILAALINTA DHULKA ASALKA

I2021-kii, shirkadda weyn ee saliidda iyo gaaska ee Santos waxay soo bandhigtay mashruuc dhan 4.7 bilyan oo Doollar si gaas looga soo saaro Badda Timor ee Badweynta Hindiya. Mashruuca waxaa ansixiyay maamulka saliidda iyo gaaska ee Ustareeliya iyadoo shirkadda Santos aanay wax wada tashi ah la yeelan bulshooyinka Asalka ah ee noloshoodu khatar ugu jirtay horumarka, sida sharcigu waajibinayay.

Mashruucu wuxuu ahaa in laga fuliyo xeebta jasiiradaha Tiwi, oo ah hoyga nooleyaal kala duwan taasoo ay ilaalinayeen dadka Tunuvivi-gu kumannaan sano.

Bulshooyinka jasiiradahaas waxay ka walaacsanaayeen khatarta mashruucu u keenayo nolosha badda, dhaqammada kalluumeysiga iyo ugaarsiga ee soo jireenka ah, iyo noocyada muhiimka u ah xafladaha Tiwi, ee dariiqyadii hore, iyo caadooyinka dhaqanka ah. Xeer-yaqaan sare oo ka tirsan bulshada, Dennis Tipakalippa, ayaa bulshadu u dooratay inuu ku matalo maxkamada. Dacwad ayaa la keenay iyadoo laga codsanayo Maxkamada Federaalka inay meesha ka saarto ansixinta mashruuca sababtoo ah bulshada lama tashan shirkadda Santos sida sharcigu dhigayo.

Bishii Ogosto 2022-kii, xubno ka tirsan bulshooyinka Tiwi ayaa caddayn horkeenay dhagaysi maxkamadeed oo ka dhacay xeelliga badda oo lagu qabtay jasiiradaha Tiwi. Dabayaaqadii sanadkaas, Maxkamada Federaalku waxay go'aamisay in ansixinta mashruuca meesha laga saaro. Maxkamadu waxay sidoo kale siisay Santos laba toddobaad si ay u joojiyaan oo ay riigga uga saaraan badda Timor. Waxay hoosta ka xariiqday xaqiiqada ah in maamulku uu ku fashilmay inuu qiimeeyo in shirkadda Santos ay la tashatay qof kasta oo uu saameynayay mashruuca la soo bandhigay, sida sharcigu waajibinayay. Santos waxay isku dayday inay racfaan ka qaadato go'aanka, laakiin way ku fashilantay.

Sanadkii danbe, Santos waxay wada tashi la bilowday bulshooyinka. Dabayaaqadii 2023-kii, tiro ka mid ah dadka jasiiradaha ayaa dacwado xuquuqda aadanaha ah ka gudbiyay bangiyadii daymaha siiyay shirkadda Santos intii ay socotay dacwada Maxkamada Federaalku.



# MARKA BAAHI LOO QABO IN LA KORDHIYO CADAADISKA DEGDEGNA LOO KOBCIYO WACYIGA

Dacwaduhu waxay noqon karaan farsamo faa'iido leh oo dadka lagu tusayo arrin degdeg ah oo sii xoogaysanaysa, gaar ahaan marka xaaladda aan lagula tacaalin degdegga ay mudan tahay. Maxkamad gaynta kiisku waa hab lagu kululaynayo xaajada, waxay kordhisaa cadaadiska. Waxay iftiimisaa xaqiiqada ah in kuwa ay arrintu saamaysay ay diideen inay dib u fadhiistaan oo ay u oggolaadaan xaaladdu inay iska sii socoto iyada oo aan la hor istaagin. Xaaladdan, dadku waxay diyaar u yihiin inay ka qaybqaataan geeddi-socod marna qaali ah marna halis ku ah kuwa kiiska qaadaya iyo kuwa kiiska laga gudbinayoba.

Ololaha iyo bayaannada warbaahinta waa la iska indho tiri karaa, laakiin kiis maxkamadeed maya. Nidaamyada maxkamaduhu waxay leeyihiin geedi-socodyo loo dejiyay in lagu qasbo dhinaca la dacwaynayo inay ka jawaabaan doodaha laga keenay. Tusaale ahaan, dalal badan, ku fashilmidda in maxkamada horteeda layskaga difaaco sheegasho sharci ah waxay keenaysaa "xukun haldhinac ah" oo loo heli doono qofka kiiska keenay. Si kale haddii loo dhigo, waxay ku guulaysan doonaan si hal dhinac ah.

Tan waxaa dheer, ku fashilanka in la raaco "u yeedhista maxkamada", amar ah in maxkamada horteeda laga soo muuqdo, waxay keeni kartaa ciqaabo waaweyn. Kiisaska qaarkoodna, xitaa ciqaabo danbiyeedyo culus. Sidaa awgeed, qaadidda dacwadu waxay ku qasabtaa dhinaca kale inay ka xisaabtamaan doorkooda iska dhegatirka ama jebinta sharciga.

## DARAASAD KIIS:

## MAXKAMADAYNTA HAWLGALKII TAKOORKA LAHAA EE JOOJI OO BAADH EE NIYUU YOOG

2008-dii, afar nin – David Floyd, David Ourlicht, Lalit Clarkson, iyo Deon Dennis – ayaa kiis u qaaday ay ku matalayaan kumannaan Madow iyo Laatiini u badan oo reer Niyuu Yoog ah kuwaas oo ay booliisku u joojiyeen sabab la'aan. Waqtigaas, dhacdooyinka jooji oo baadh ee booliiska Magaalada Niyuu Yoog ayaa si aad ah u kordhayey, iyagoo 2011-kii gaadhay heerkii ugu sarreeyay oo si aan dheellitirnayn u saameeyay dadka Madowga iyo Laatiiniga ah ee reer Niyuu Yoog.

Kiisku waxa uu ka dhan ahaa Magaalada Niyuu Yoog, Guddoomiyaha Booliiska, Duqa Magaalada, iyo saraakiil booliis ah oo la magacaabay iyo kuwa aan la magacaabin. Wuxuu ku eedeeyay inay hirgeliyeen oo ay ansixiyeen siyaasad, dhaqan, ama caado joojin iyo baadhis aan dastuur ahayn.

Ficilka joojinta iyo baadhista shaqsiga sabab la'aan waxaa xujo lagu gelin karaa keliya xaqiiqada ah "jiritaan-la'aanta tuhun macquul ah" si loogu qiil dayo joojin-iyo-baadhis, taasoo ah shuruud ay tahay in la buuxiyo si baadhistu u noqoto mid dastuuri ah. Si kastaba ha ahaatee, isbahaysiga iyo bulshooyinka kiiska oogayay waxay rabeen inay sameeyaan dood sharci oo dheeraad ah, oo adag in la sameeyo, oo ah in taasi sidoo kale ahayd isir-beegsi jebinaya Dastuurka Maraykanka.

Muhiim ayay u ahayd iyaga in tani qayb ka noqoto qaabaynta doodaha sharciga ee kiiska "si farqiga isirku uu u soo sare maro". Waqtiga kiiska, qiyaastii 85% kuwii la joojiyay ee la baadhay waxay ahaayeen Madow iyo Laatiini, in kasta oo kooxahaasi ay ka noqonayeen 52% dadweynaha magaalada.

Dadaal abaabul bulsho ayaa lagu dhisay kiiska, waxaana la qorsheeyay muddaaharaadyo. Mudaaharaadyadan way sii kordheen markii ay soo dhowaadeen dhegaysiyada kiiska. Waqtiga la dejiyay taariikhda maxkamadaynta kiiska, abaabulayaasha bulshadu waxay abaabuleen kumannaan reer Niyuu Yoog ah oo socod gadood ah oo aamus ah ku marayay jidka Fifth Avenue iyagoo ka muddaaharaadaya barnaamijka jooji oo baadh. Tan waxaa la qabtay iyadoo lala kaashanayo ololeyaal warbaahineed iyo loobiyayn heer-sare ah oo lagu riixayo dib-u-habayn. Markii dhegaysiyada kiiska la qabtay, taageerayaashu waxay buux dhaafiyeen hoolka maxkamada. 12-kii Ogos 2013-kii, Maxkamadu waxay ogaatay in Waaxda Booliiska Niyuu Yoog ay mas'uul ka ahayd naqshad iyo dhaqan isir-beegsi ah iyo joojin bilaa sabab ah.

Maxkamadu waxay magacawday kormeere madax-bannaan si uu u kormeero taxane dib-u-habayn degdeg ah oo ku saabsan dhaqammada Waaxda Booliiska Niyuu Yoog, waxayna maxkamadu amartay in la sameeyo geedi-socod dib-u-habayn wadajir ah. Tan oo noqonaysay geedi-socod dib-u-habayn loogu keeno qaab-dhismeedka muddada dheer ee booliiska iyadoo lagu salaynayo fikradaha bulshooyinka sida tooska ah ay hawlaha boolisku u saameeysay.

Tan iyo markii la gudbiyay kiiska, joojinada la soo weriyay ayaa si weyn hoos uga soo dhacay meel sare oo ahayd in ka badan 600,000 sannadkii ilaa in ka yar 15,000 sannadkii. Nasiib darro, farqiga isireed ee joojinadu weli waa jiraan, kormeerka maxkamada ee kiiska iyo geedi-socodka dib-u-habaynta wadajirka ahna way socdaan waqtiga qorista haggahan.

Dacwaddu waxay noqon kartaa geedi-socod jiitama (waxaa lagaga hadlay boggaga soo socda) laakiin maxkamaduhu waxay sidoo kale leeyihiin geedi-socodyo u oggolaanaya inay si degdeg ah u tixgeliyaan arrimaha. Inta badan waxay leeyihiin awood ay ku soo rogaan “tallaabooyin ku meel gaadh ah”; kuwaas oo ah amarro degdeg ah oo maxkamadu soo rogto si waxyaabo gaar ah loo sameeyo ama looga baaqsado si looga fogaado xaalado ka hor istaagi kara kiiska helista caddaalad. Tusaale ahaan, haddii kiis uu ka hor imanayo go’aan shaqsi lagu masaafurinayo, maxkamadu waxay soo rogi kartaa tallaabo ku meel gaadh ah oo degdeg ah oo ka hortagaysa masaafurinta ilaa ay arrinta ka tixgeliso. Tani waxay keenaysaa in dacwaddu ay noqoto fursad si degdeg ah loogaga jawaabo arrimaha taagan.

DARAASAD KIIS:

## XUJO-GELINTA HALISTA SOO WAJAHAN EE RARISTA SHARCIDARRADA AH EE DEGAANKA QAWMIYADDA ROOMA

I2012-kii, Madaxweynaha Faransiiska François Hollande ayaa ballan-qaad ku sameeyay, qorshihiisa doorashada, in aan degsiimooyinka qawmiyadda Rooma ee Faransiiska la burburin iyadoo aan qoysaska la siin xal kale. Dad badan ayaa rumaysnaa in isbeddelka dawladda ee 2012-ka sidoo kale lagu arki doono isbeddel ku yimaadda sida Faransiisku ula dhaqmo dadka qawmiyadda Rooma. Waxa ku xigay wuxuu ahaa siddeed sano oo raris ballaadhan oo dadka qawmiyadda Rooma lagaga sameeyay magaalooyinka dalka Faransiiska oo dhan, iyo xad-gudubyo halis ah oo nidaamsan oo ka dhan ah xuquuqda qawmiyadda Rooma.

2012-kii, magaalada Bobigniy, 200 oo qof oo qawmiyadda Rooma kasoo jeeda ayaa laga raray degsiimadoodii waxaana la siiyay karafaanno ku yaal dhul kale oo beddela oo magaalada ah. 2015-kii, magaaladu waxay ka iibisay dhulkan shirkad madani ah oo markaa qaadday tallaabooyin ay ku doonayso inay kaga rarto dadka qawmiyadda Rooma ee deggan. Maxkamaduhu waxay ka hor istaageen shirkadda inay tan sameyso sababtoo ah dadka deggan waxay halkaas ku degeen hindisaha magaalada.

2017-kii, Duqa magaaladu wuxuu amar kusoo saaray in qawmiyadda Rooma ee deggan dhulka lagaga raro muddo 48 saacadood gudahood ah. Amarkan waxaa qaaddacay maxkamadaha sababtoo ah ma jirin wax tallaabooyin dib-u-dejin ah oo la qaaday. Shirkaddu waxay markaa mar kale isku dayday inay rarto dadka deggan, Oktoobar 2018-kii, Duqa magaalada wuxuu soo saaray amar degdeg ah oo cusub oo lagu rarayo dadka qawmiyadda Rooma ee deggan toddoba cisho gudahood.

Marka la eego dadaalladan joogtada ah ee sii kordhaya ee lagu doonayo in lagaga raro guryahooda, dadka qawmiyadda Rooma ee deggan waxay go’aansadeen inay kiis dhaqso ah oo degdeg ah u gudbiyaan maxkamada si ay uga hortagaan amarka rarista ee Duqa. Kiisku wuxuu tagay maxkamada maamulka ee ugu sarreysa ee Faransiiska, taasoo Febraayo 2019-kii amarkii rarista degdegga ah u joojisay si aan xad lahayn.

Go’aankeeda, Maxkamadu waxay sheegtay in goobtu hoy u ahayd dadka deggan ee qawmiyadda Rooma tan iyo markii ay halkaas degeen, iyagoo raacaya hindisaha magaalada, laga soo bilaabo 2012-kii. Waxay sidoo kale hoosta ka xariiqday in Duqa magaalada uu amar raris ka soo saari karo dadka hoygooda kaliya haddii ay jirto “khatar soo wajahan”, mana jirin “khatar soo wajahan” markan. Sidaa awgeed, amarku wuxuu xad-gudub halis ah ku ahaa xuquuqda dadka deggan ee qawmiyadda Rooma wuxuuna ahaa sharci-darro.

# MARKA AAD OGAATO INUUSAN AHEYN ARRIN ISKII U JIRA

Dacwada istiraatiijiga ah waxay khuseysaa kiisaska maxkamadeed ee la keeno iyadoo ujeeddadu tahay inay dhaliyaan saameyn dhaafsiisan kuwa dhab ahaan kiiska oogaya. Sidaa awgeed, waxay ku dhex jirtaa dhammaan kiisaska istiraatiijiga ah in arrimaha la tixgelinayo ay yihiin kuwa ay la kulmeen oo saameeyay dad badan oo shaqsiyaad ah. Sidaa awgeed, marka arrintu khuseyso wax ka badan hal qof, waxaa mudan in la tixgeliyo sidii loo qaadi lahaa cabasho sharci ah taas oo sidoo kale faa'iido u yeelan karta kuwaa kale ee ay saamaysay.

Iyadoo ku xidhan nooca tallaabada sharciga ah ee la qaadayo, dacwadu waxay soo bandhigtaa fursad caddayn lagu horkeeno maxkamada taasoo muujinaysa qaabka baahsan ee waxyeellada iyo sharci-darrada. Tusaale ahaan, xogta tirakoobka iyo taxliilinta qaababka faquuqa ayaa loo adeegsan karaa in lagu taageero sheegasho shaqsiyeed oo ah inuu jiray faquuq ku salaysan sifooyinka shaqsi ahaaneed. Waxa kale oo loo adeegsan karaa in lagu muujiyo sifada isku-xidhnaanta ee faquuqan.

Intaa waxaa dheer, waxa kale oo loo adeegsan karaa in lagu dhiso doodda ah in dhab ahaantii nidaamka, siyaasadda, ama dhaqanku uu yahay midka wax faquuqaya, ee aanay ahayn go'aanka shaqsiyeed, sidaa awgeedna ay tahay nidaamka, siyaasadda, ama dhaqanka waxa u baahan isbeddelka.

DARAASAD KIIS:

## U GUURIDDA CADDAALADA: XAKAMAYNTA U-DAWLADAYNTA BULSHOOYINKA QAWMIYADDA ROOMA

2012-kii, kiis ayaa la keenay kaas oo xujaynaya booliska dembiyada yaryar ee la xidhiidha baaskiillada ee Hangari. Sharcigu wuxuu waajibinayay in qalab gaar ah lagu xidho baaskiillada, sida nalalka hore iyo muraayadaha wax cawara. Kiis ayaa la horgeeyay Hay'ada Tixgelinta Sinnaanta kaas oo ku doodaya in sharciga loo adeegsaday si faquuq leh oo ka dhan ah qawmiyadda Rooma. Intii kiiskani hor yaallay Hay'ada, Urur aan Dawli Ahayn (NGO) oo Hangariyaan ah (Guddiga Helsinki ee Hangari) ayaa Hay'ada u soo bandhigay taxliilin tirakoob oo muujinaysa in qawmiyadda Rooma si aan dheellitirnayn loogu ganaaxay jebinta sharciga (97% ganaaxyada waxay ahaayeen kuwo ka dhan ah dadka qawmiyadda Rooma).

Caddayntan waxaa lagu kabay caddayn sawireed oo laga qaaday aagga, iyo sidoo kale xayeysiisyada internet-ka ee baaskiillada celiska ah ee agagaarka, oo muujinaya u hoggaansanaan la'aanta baahsan ee sharciga. Kahor inta aysan Hay'adu go'aan gaadhin, taliyaha booliska degmada ayaa qiray in dhaqanku laga yaabo inuu si aan dheellitirnayn u saameeyay bulshada qawmiyadda Rooma.

Boolisku waxay u xilsaareen 20 sarkaal tababar ka hortagga faquuqa ah oo saddex cisho ah. Waxay sidoo kale soo jeediyeen inay bulshada maxalliga ah ee qawmiyadda Rooma si bilaash ah u siinayaan qalabka baaskiillada. Ugu dambeyntii, waxay ballan qaadeen inay xog siinayaan Guddiga Helsinki ee Hangari si ay ula socdaan ganaaxyada baaskiillada labada sano ee soo socota.

# MARKA ARRINTA AAN WELIGEED MAXKAMADAHA LA HORGEYN AMA KIISASKA MAXKAMADA LA HORGEEYAY AANAY CADDAALADA U ADEEGAYN

Dacwadu waxay la xisaabtami kartaa shaqsiyaad ama cid aan weligeed maxkamadaha la hor keenin. Shaqsiyaadkan ama ciddan ayaa laga yaabaa inay ka faa'iidaystaan inay ka baxsan yihiin meel sharcigu gaadhi karo. Waxaa laga yaabaa inaysan ahayn kuwo diiradda lagu saaray dacwado hore. Dacwadu waxay ku qasbi kartaa qolooyinkaas inay sharraxaan doorka ay ku leeyihiin caddaalad-darrada nidaamsan iyo sharci-darrada.

Dacwadu waxay sidoo kale saacidi kartaa in debedda loo soo saaro dhaqdhaqaaqyo ama dhaqammo hore u qarsoonaa ama la iska indhatiray kuwaasoo quudiya waxyeellooyin nidaamsan oo ballaadhan. Waxaa laga yaabaa in maxkamaduhu ay ku fashilmeen inay wax uun xisaabta ku darsadaan xilligii go'aankoodii hore, ama ay kari waayeen inay ogaadaan waxyaalaha qaar iyagoo u sababaynaya noocyada kiisaska hore loo horkeenay.

Keenista dacwad iyadoo lagu jiro xaaladahan waxay door ka ciyaari kartaa soo bandhigista iyo kashifidda goldaloollada noocaas ah iyo baahida loo qabo isla xisaabtan guud si loo dhaliyo isbeddel. Dacwada istiraatiiji waxay ku lug lahaan kartaa helitaanka dhinacyo sharci oo kale oo cadaadis weyn saari kara kuwa awoodda u leh inay dhaliyaan isbeddel.

DARAASAD KIIS:

## WAJIHIDDA BANGIGA ADDUUNKA: BULSHADA KALLUUMAYSATADA IYO BEERALAYDA HINDIYA OO MAXKAMADA TEGEY

Bishii Abriil 2008-dii, waax ka mid ah Bangiga Adduunka, Hay'ada Maaliyadda Caalamiga ah ee (IFC), ayaa bixisay dayn dhan 450 milyan oo Doollar oo loogu talagalay mashruuca Tata Mundra. Mashruucan wuxuu ku saabsanaa dhismaha warshad koronto-dhalin oo dhuxul ku shaqaysa oo ku taal Gujaraad, Hindiya. Deynta waa la ansixiyay in kasta oo loo aqoonsaday mid leh "halis sare" iyadoo loo sababaynayo "waxyeellooyinka weyn ee daran ee bulsheed iyo/ama deegaan oo ah kuwa kala duwan, aan dib loo sixi karin, ama aan hore loo arag" oo laga filayay.

Dhismihii iyo socodsiintii warshadda korontada ee arrintaa ku xigtay waxay burburisay dhul iyo kheyraad kale oo ay bulshooyinku u adeegsan jireen kalluumaysiga, beerashada, milix-soo-saarka, iyo dhaqashada xoolaha. Sannadkii 2015-kii, xubno ka tirsan bulshada kalluumaysiga iyo beeralayda ee xeebta Gujaraad, oo ay taageeraysay EarthRights International, ayaa kiis u gudbiyay maxkamadaha Caasimadda Waashintoon, Maraykanka, halkaas oo Hay'ada Maaliyadda Caalamiga ah ee (IFC) xarunteedu tahay. IFC waxay ku dooday inay ka faa'iidaysanayso xasaanad buuxda oo hoos timaadda sharciga Maraykanka ka hay'ad caalami ahaan, sidaa darteed maxkamaduhu ma ogaan karayn inay jebiyeen sharciga.

Kiisku wuxuu gaadhay Maxkamada Sare, taasoo gaadhay go'aankii taariikhiga ahaa ee in hay'adaha caalamiga ah, sida Bangiga Adduunka, lagu dacwayn karo maxkamadaha Maraykanka haddii xaaladuhu hoos yimaadaan tiro xaalado ah oo ka baxsan xasaanadda. Mid ka mid ah waxyaabahaas ka baxsan xasaanadda ayaa dabooshay cabashooyinka sharci ee ku salaysan "hawl ganacsi oo ka socota Maraykanka". Tani waxay ahayd go'aan muhiim ah, maadaama IFC ay sanado badan u shaqaynaysay sidii inay "ka sarreyso sharciga" iyo inay ahayd mid "aan la taaban karin" iyadoo daymo siinaysay mashaariic leh halis sare oo ku aadan xadgudubyo daran oo xuquuqda aadanaha ah iyo waxyeellaynta bulshooyinka deegaanka. Go'aankani wuxuu diray farriin ah in iyaga lagula xisaabtami karo maxkamadaha Maraykanka hortooda.

Nasiib darro, maxkamadaha Maraykanku waxay sii wadeen inay ogaadaan, ammintan gaarka ah, in IFC ay ka faa'iidi karto xasaanadda. EarthRights International ayaa tan iyo markaas samaynaysay u gudbino ay u gudbinayso QM arrinta hay'adaha maaliyadda horumarinta ee u dhaqmaya sidii inay ka sarreeyaan sharciga iyo adeegsiga xasaanadda ee kiiskan.

# MARKA AAD RABTO INAAD AWOOD U SIISO BULSHADAADA AMA DHAQDHAQAAQYADA HELITAANKA CADDAALADA

Dacwada istiraatiiji waxay sidoo kale ku lughaan kartaa ka faa'iidaysiga awoodda wadajirka ah si arrimaha loo hor keeno maxkamadaha, iyadoo sidaas lagu fududaynayo helitaanka caddaalada ee bulshooyinka. Waxaa jira caqabado badan oo adduunka oo dhan ka dhex jira marka la eego helitaanka caddaalada, nidaamyada maxkamadaha laftoodana waxaa ku badan dhaqdhaqaaqyo kala saarid iyo kala sooc iyo kala mudnaynsiinba leh. Isla mar ahaantaana, waxay sidoo kale u dhaqmi karaan sidii kuwo wax sima.

Nidaamyada sharcigu waxay raadiyaan inay dejiyaan miisaan iyo dheellitir hubinaya in kuwa dacwoonaya iyo kuwa la dacwaynayo ay joogaan boos ay siman yihiin ilaa intii suuraggal ah. Hal-haysyo ayaa la sameeyay si loo sawiro mabda'an, sida "u sinnaanta sharciga" ama "gacmo siman". Kiisaska sharciga ah laftooda waxaa badanaa loogu yeedhaa amminaddii"David iyo Goliath", maadaama loogu talagalay inay noqdaan kuwo aanay sadhayn oo aan u eexanayn awoodda ama mudnaanta.

Weli waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya aragtidan iyo ku dhaqankeeda, shaqsiyaadka iyo bulshooyinkuna waxay inta badan sharciga la leeyihiin xidhiidh ama u leeyihiin khibrado aad u kala duwan. Kiisaska maxkamadu waxay u ekaan karaan farsamo fog ama aan la heli karin. Si kastaba ha ahaatee, qaadista dacwadu waxay dhisi kartaa khibradda, aqoonta, iyo kalsoonida bulshooyinka ee u adeegsiga maxkamadaha isbeddel.

Maxkamad geynta kiisasku waxay saacidi kartaa in la caddeeyo habka ka helitaanka caddaalada maxkamadaha hortooda. Maadaama qaadista kiisku u baahan tahay dadaal wadajir ah, waxay noqon kartaa fursad bulsho ama dhaqdhaqaaq ay si wadajir ah u qorsheeyaan mudnaanta, ujeeddooyinka, iyo qodobbada ficilka ee isbeddelka ay rabaan inay gaadhaan.

Waxay noqon kartaa hab bulshada laysugu soo jiido si dhow oo ku saabsan ujeeddooyinkan iyo in la kasbado taageerada dhaqdhaqaaqa. Waxaa jira fursado xubnaha bulshadu ay kaga caawin karaan cilmi-baadhista iyo doodaha ku xeeran kiis, si ay ugu dhisaan fahamkooda sharciga iyo xuquuqdooda sharci, oo ay u bartaan wax badan oo ku saabsan geedi-socodyada iyo habraacyada maxkamada.

Tani waxay yeelan kartaa saameyn ballaadhan oo dhaafsiisan kiiska gaarka ah ee la wado, maadaama bulshada laga yaabo in lagu dhiirrigeliyo inay aqoontooda iyo xirfadohooda ay kobciyeen una adeegsadaan si ay tallaabo dheeriya oo sharci oo istiraatiiji ah maxkamadaha hortooda uga qaadaan. Waxa kale oo laga yaabaa inay dhiirrigeliso bulshooyinka kale ee la kulma dhibaatooyinka la midka ah inay isla sidaa yeelaan.

DARAASAD KIIS:

## SHAQAALE AYAA KIIS KA DIYAARIYAY ISIR-SOOC NIDAAMSAN OO KA JIRA DHISMAHA FARANSIISKA

2016-kii, 25 xoogsato dhisme reer Maali ah oo aan haysan sharci ayaa shirkadi u shaqaalaysiisay si ay u fuliyaan duminta iyo nadiifinta dhisme taariikhi ah oo ku yaal Baariis oo noqon lahaa meel xafiisyo cusub ah. Ka dib laba shil oo shaqo oo halis ah, iyo welwelka sii kordhaya ee ku saabsan xaaladaha shaqadooda, xoogsatani waxay sameeyeen shaqo-joojin iyaga oo taageero ka helaya urur shaqaale. Shaqo-joojintan ka dib, shirkadda dhismuhu waxay joojisay qandaraaskeedii kala dhexeeyay qandaraasle-hoosaadkii shaqaalaysiiyay xoogsatadan, taasoo keentay in xoogsatadu shaqo la'aan noqdaan.

Xoogsatadu waxay go'aansadeen inay kiiskooda u gudbiyaan Maxkamada Warshadaha, iyaga oo ka doonaya Maxkamada inay caddeyso inaysan iyagu masuul ka ahayn joojinta qandaraaska iyo inay mudan yihiin magdhow sababtoo ah faquuqa ay kala kulmeen shaqadooda.

Caddayn ayaa la soo bandhigay iyada oo lala kaashanayo Defender of Rights, hay'adda sinnaanta Faransiiska, taas oo muujisay in hawlaha loo xilsaaray xoogsatadan aanay ku salaysnayn xirfadaha xoogsatada balse ku salaysnaayeen jinsiyaddooda iyo asalka loo aamminsan yahay. Way iska caddayd in xoogsatadan reer Maali loo xilsaaray hawlaha ugu adag iyo kuwa ugu khatarta badan. Daraasado cilmi-baadhis ah ayaa sidoo kale la soo bandhigay oo muujinaya faquuq nidaamsan oo ka dhexjira shaqaalaynta iyo maamulka suuqa dhismaha Faransiiska guud ahaan.

Maxkamadu waxay ku soo gunaanadday in shaqo u qaybin isir-sooc ah iyo maamul isir-sooc ah uu ka dhex jiray qaybta dhismaha, taas oo ka dhigan "nidaam abaabulan oo maamulis isir-sooc ah". Maxkamadu waxay ku soo gunaanadday in qandaraasyada xoogsatada loo joojiyay gef ka yimi loo-shaqeeyaha awgeed waxayna ku abaalmarisay 37,000 oo Yuuro xoogsade kasta. Tani waa mid ka mid ah mararka kooban ee Yurub gudaheeda maxkamadi go'aan-gaadhisteeda ku taabatay isir-sooca nidaamka ku dhisan. Tan iyo go'aankan, xoogsato kale oo dhisme ayaa shirkado waaweyn oo dhismaha ah maxkamad la tegey sababo la xidhiidha takoorid iyo dhiig-miirasho.

# MARKA AAD U BAHAN TAHAY INAAD LA WAREEGTO ARRIMAHA SHARCIGA AH EE KHUSEEYA ADIGA IYO BULSHADAADA

Waxaa laga yaabaa in qaabaynta arrin gaar ah ay ka taliyaan hal cod ama koox, qaabayntanina ay ku fashilanto inay tixgeliso walaacyada khaaska ah ee bulshooyinka ay sida gaarka ah u saameeyeen arrimaha noocaas ahi.

Dhab ahaantii, habka arrin loogu qaabeeyo si shaacsan waxay noqon kartaa mid si toos ah uga soo horjeedda ama xitaa waxyeello u leh bulshooyin gaar ah oo aan si macno leh loola tashan markii tallaabooyinka la qaadayay.

Dacwadu waxay noqon kartaa fursad lagu la wareego xakamaynta sheekada arrinta. Maxkamaduhu waa madalo rasmi ah oo bulshooyinku ay ku soo bandhigi karaan kiiskooda, iyadoo ay qayb ka tahay sheekadooda iyo qaabaynta ku xeeran arrin gaar ah.

DARAASAD KIIS:

## BULSHOOYINKA ASALKA AH OO ILAASHANAYA DHULKOODA: U DHAQAAQISTA FURFURISTA WARSHADAHA MATOORRADA DAB-DHALINTA DABAYSHA EE KU YAALLA DHUL DAAQSIMEEDYADA DEERADA

Magaalada Fowsan, Noorway, waxaa la bixiyay shatiyo 151 matoorrada dab-dhalinta dabaysha lagaga dhisayo aagagga ay dhaqan ahaan adeegsan jireen bulshooyinka asalka ah ee Saami. Mashruucan waxaa loo qaabeeyay sidii hindise muhiim ah oo kor u qaadaya tamarta la cusboonaysiin karo, isagoo ka mid ah mashaariicda tamarta dabaysha ee ugu waaweyn Yurub. 2016-kii, markii dhismaha laga bilaabay goobta, 200 oo qof ayaa isu yimid oo ku muddaaharaaday sababtoo ah saamaynta ba'an ee ay ku yeelanayso bulshooyinka asalka ah ee Saami.

IBishii Diiseembar 2018-kii, ka dib markii ay heleen cabasho ka timid bulshada, Guddiga Qarammada Midoobay ee Cidhibtirka Isir Faquuqa waxay codsadeen in dhismaha warshadda matoorrada dab-dhalinta dabaysha la joojiyo inta ay ka baarandegayaan cabashada. Codsigan waxaa iska dhegatiray dawladda Norway, markii la dhisayna, sawaxanka iyo qaabka matoorrada dabaysha ayaa xoolaha didiyay waxayna ka hor istaageen qaybo badan oo ka mid ah dhul daaqsimeedyada jiilaalka.

Kiiska waxaa la horkeenay maxkamadaha Noorway, 2021-kiina, maxkamada ugu sarreysa ee Noorway waxay ogaatay in warshadaha dabayshu ay ku xadgudbeen xuquuqda qoysaska Saami ee ku dhaqanka hiddahooda dhaqashada deerada. Maalintii 500-aad ee go'aanka maxkamada oo aan la fulin, dadku waxay isugu yimaaddeen bannaanka albaabka Wasaaradda Batroolka iyo Tamarta ee Oslo si ay uga muddaaharaadaan ficil la'aanta dawladda. Tan waxaa dabasocday bayaan ka soo baxay Wasiirka Batroolka iyo Tamarta oo raalligelin ka bixiyay warshadaha matoorrada dab-dhalinta dabaysha isagoo qiraya inay ku xadgudbeen xuquuqda aadanaha ee bulshada Saami. Si kastaba ha ahaatee, 2023-ka, wax tallaabo ah weli looma qaadin sidii si hagaagsan dib loogu habayn lahaa dhul daaqsimeedka Saami.

# U HOGGAANSANAANTA XEERARKA GEEDI-SOCODKA SHARCIGA

Qof kastaa maxkamad kiis kama geyn karo arrinkii kasta ee uu doono. Si shaqsi uu maxkamad kiis u geeyo, waa inuu marka hore buuxiyo shuruudo habraaca oo cayiman. Waxaa jira xeerar ay tahay in la raaco si maxkamadu u tixgeliso kiiska, waxay kala yihiin:

### Ku gudbinta kiiska waqtiga u go'an

Caadi ahaan, kiisaska waa in lagu qaadaa "muddo xaddidan" gudeheed. Muddooyinkaasi way kala duwanaan karaan iyadoo ku xidhan nooca waxyeellada iyo sharciga la adeegsanayo. Waxaa jira dadaallo lagu bixiyo kordhinta muddooyinka xaddidan marka ay caqabad ku yihiin caddaalada, tusaale ahaan kiisaska khuseeya xadgudubyada taariikhiga ah.

### Kiiska waa inuu gudbiyo qofka ku "habboon" ee sidaa yeeli kara

Tan waxaa loo yaqaan "xuquuq-dacwad-oogis", iyadoo loola jeedo shuruudaha ay tahay in shaqsi ama cid buuxiso ka hor inta aanay kiis ka oogin xaajada taagan. Tusaale ahaan, shaqsigu waa inuu muujiyaa inuu lug ku leeyahay sharciga, siyaasadda, ama ficilka laga doodayo.

### U gudbinta kiiska maxkamada ama hay'ada ku "habboon"

Maxkamaduhu waxay go'aan ka gaadhi karaan kaliya kiisaska hoos yimaadda "awooddooda garsoor". Si kale haddii loo dhigo, waa inay awood u yeeshaan inay dhegaystaan nooca gaarka ah ee sheegashada ayna adeegsadaan qaybaha sharciga ee gaarka ah ee lagu tiirsan yahay ee la xidhiidha mawduucaa gaarka ah. Tusaale ahaan, Maxkamada Yurub ee Xuquuqda Aadanaha ma dhegaysan karto kiisaska khuseeya jebin qandaraas, waxay kaliya tixgelin kartaa kiisaska ku lugleh xadgudubyada xuquuqda aadanaha. Maxkamaduhu sidoo kale waxay ku kooban yihiin xuduudo juqraafi ah, taasoo macnaheedu yahay inaysan awooddooda ka fulin karin meelo ka baxsan xuduudahaas dhuleed. Waxaa sidoo kale xaddidan nooca go'aanka ama amarka ay awoodda u leeyihiin inay gaadhaan.

### Kiisku waa inuu u hoggaansamaa xeerarka habraacyada kale

Maxkamaduhu waxay samaystaan xeerar badan oo ay tahay in la raaco marka kiis loo gudbinayo ama loo bandhigayo. Kuwaasoo ahaan kara sida waqtiga oo la xaddido marka soo gudbinta qaarkeed la samaynayo ama marka tallaabooyinka qaarkood la qaadayo. Waxa kale oo jiri kara xeerar adag oo caddaynta la saaro taasoo ay qasab tahay in la soo bandhigo ka hor intaan maxkamadu dabaqin natiijooyinka qaar.

Gebagebadii, Cidda doonaysa inay kiis ka furtaan maxkamada waa inay marka hore is waydiiyaan in kiisku yahay mid laga "garniqi" karayo. Tani waxay la xiriirtaa dhawrista habraacyada loo baahanyahay ee sare iyadoo la tixgelinayo in kiisku yahay mid maxkamadu awoodeeda sharci u adeegsankarto iyo in kale. Haddaanu ahayn, kiiska waa lagu guuldarraysan ama waa la tuuri inta aan maxkamaduba eegin waxa uu ka koobanyahay.

Kiisas ayaa la keeni karaa si dib loogu qaabeeyo dhinacyada habraacyada geedi-socodka sharciga. Tusaale ahaan, dacwad ayaa riixi karta in arrimaha qaar laga garniqi karayo, haddii sidaasi dhacdona, waxa furmaya galaangal loo yeelanayo caddaalada oo ku saabsan arrimo badan oo markii hore la diiday in maxkamada la horkeeno.

DARAASAD KIIS:

## KA SUURTA GELINTA KIISASKA CIMILADA KANADA

Toddobo dhallinyaro ah oo u dhaqdhaqaaqa arrimaha cimilada, oo ay ku jiraan dhaqdhaqaaqayaal asali ah, ayaa kiis horkeenay maxkamadaha Ontaariyo, Kanada, iyagoo ku andacoonaya in hadafka Ontario ee ahaa in sii daynta gaaska hawada kulayliya hoos looga dhimo 30%  heerarkii 2005 sannadka 2030 uu yahay dastuur jebin. Waxay ku doodeen in ay dastuur jebin ahayd maxaa yeelay waxay baalmarsantahay xuquuqaha nolosha, xorriyadda iyo amniga, iyo sidoo kale xuquuqda u sinnaanta sharciga ee dhallinyarada Ontaariyo iyo jiilasha danbe. Waxay ku doodeen in hadafyadaasi daciif yihiin, iyo inay kordhiyeen halista geerida dhallinyarada. Ontaariyo, oo lagu dacweeyey kiiska, ayaa ku dooday in sheegashadan xuquuqaha ku salaysan aanay ahayn wax lagaga garniqi karayo maxkamadaha hortooda.

Go'aankan racfaan ayaa laga qaatay, 2023-ka dhexdeedana, Maxkamada Sare ee Ontario ayaa wayday baalmar lagu sameeyay xuquuqaha dhallinyarada. Si kastaba ha ahaatee, go'aankan dhexdiisa, garsooruhu waxa uu xaqiijiyey in kiisku ahaa mid laga garniqi karo. Tan macnaheedu waa in ay ahayd su'aal sharciyaysan oo qumman oo maxkamaduhu wax ka dhihi karaan. Go'aankan hortii, kiisaska cimilada ee Kanada dhexdeeda ee sheega in la baalmaray xuquuqda aadanaha waa la diidi jiray sababtoo ah ma ahayn kuwa laga garniqi karayey.

Go'aankani waxa uu caddeeyey inay suuraggal tahay in kiisaska noocaasa la horgeyn karo maxkamadaha Kanada, maxkamadaha Kanadana ay awood u leeyihiin in ay go'aan ka gaari karaan. Xilliga qoraalkan, dhallinyaradii ku luglahayd waxay ku talo jireen inay kiiska racfaan ka qaataan.

# WAQTI GELINTA RIIXIDDA ISBEDDELKA EE MAXKAMADAHA HORTOODA

In caddaalad darrada lagula loolamo maxkamadaha waqti ayay qaadan kartaa. Geedi-socodyada maxkamaduhu mararka qaar waxay ahaan karaan kuwa gaabis ah oo dheer, gaar ahaan haddii maxkamadu qaadato go'aan qaldan oo markaa racfaan loo qaato maxkamadaha sare.

Hal kiis, oo mara hal heer maxkamadeed , ayaa qaadan kara inta u dhexaysa dhawr bilood ilaa dhawr sano. Tusaale ahaan, Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub ayaa iskudayda in ay go'aan kaga gaadho kiisaska saddex sano gudahood oo kasoo bilaabata markii lasoo gudbiyey kiiska. Kiisaska qaar waxay qaataan in aad uga dheer intan. Maxkamada Caddaalada ee Midawga Yurub, celcelis ahaan, waxay go'aan ku gaadhaa 17 bilood ka dib marka kiiska loo soo gudbiyo. Kiisasku waxay maxkamadaha hor ooli karaan waqti intaa ka dheer haddii ay adagyihiin, khuseeyaan xaddi badan oo sheegashooyin ah ama doodo sharci, ama la geeyay maxkamad ku hawllan hawlo-aan-dhammaan oo fara badan.

Sidaa awgeed, marka dacwad la qaadayo, qof kasta oo ku lug leh waa inuu diyaar u ahaadaa inuu galo geedi-socod xilli dheer- waxay qaadan kartaa sannado ama xataa tobannaan ka hor inta aan maxkamadu yeedhin go'aanka ay sugayaan kuwa kiiska wata.

Intaa waxa dheer, laga yaabee in aan markaba isbeddel ka dhalan go'aanka kiiska. Maalinta go'aanka lagu dhawaaqo badanaa waa bilawga dadaal sii wadis kale, si kuwa go'aankaasi qabanayo loogu qasbo in ay ku dhaqmaan. Sida sharcigaba loo diidi karo, ayaa go'aanka maxkamadana loo diidi karaa. Aad bay muhiim u tahay in dadaal la sii wado go'aanka ka dib si dabada looga riixo isbeddelka loo baahanyahay. Laakiin taasi waxay qaadan kartaa waqti.

### DARAASAD KIIS:

## MUUJINTA FAQUUQA TIMAHA EE SHAQADDA DHEXDEEDA: AIR FRANCE AYAA WAJAHDAY CAWAAQIBKA FAL KA DHAN AH TIMAHA AFRIKAANKA

Aboubakar Traoré waa nin madow ah kaas oo ahaa shaqaale diyaaradeed ka shaqeeya Air France. Shirkadda diyaaraddu waxay lahayd sharci lebbis oo u oggolaanaya dumarka, maaha ragga e, in ay timaha dabtaan. Aboubakar Traoré waxaa laga joojiyey shaqadda ka dib markii uu qaabka timihiisa ka dhigay kuwa marmaroorsan oo guudka loo dabay, wuxuuna markii danbe ku dacweeyey Air France inay ka joojiyeen shaqadda.

Maxkamad shaqo iyo maxkamad ka hoosaysa ayaa labaduba xukun ku liddi ah ka gaadhay, isaguna wuxu markaa kiiska ula wareegay maxkamada ugu sarraysa ee racfaanka ee Faransiiska, ee Cour de Cassation. Maxkamadan, toban sano ka dib markii Aboubakar kiiska ula tegey, ayay ugu danbayn ogaatay in siyaasadaasi ka dhigantahay faquuq jinsiyadeed. Kiiskani wuxu dhiirri geliyey keenida mooshin dhawr-xisbi u diyaariyeen Barlamaanka Faransiiska si loo xayiro cunsuriyada timaha ee lidka ku ah timaha dabiiciga ah ee afrikaanka iyo dabista timaha.

### DARAASAD KIIS:

## LA DAGAALANKA KA DHANKA AH ISIR-SOOCA REER ROOMA EE DUGSIYADA JAMHUURIYADDA JEEG

Sannadkii 2000, mid ka mid ah kiisaska ugu caansan ee Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub ayaa waxaa keenay 18 arday oo reer Rooma ah kuwaas oo ku sugan Jamhuuriyadda Jeeg. Ardaydan ayaa la geeyay "iskuullo khaas ah", halkaas oo lagu siin jiray manhaj fudud. Kiiskoodu wuxu ahaa kiiskii ugu horreeyey ee Maxkamad Yurubbiyaan ah qaaddo oo la xiriira isir-sooca waxbarashada.

Maxkamadu bilawgii waxay heshay inaan xuquuqda ardayda lagu tuman. Si kastaba ha ahaatee, waxa kiiska racfaan loogu qaatay rugta "sare" ee Maxkamada Yurub, ee Rugta Sare, the Grand Champer. 2007-dii, Rugta Sare waxay heshay in carruurta la faquuqay maadaamoo ay heleen waxbarasho hoose "asalkooda isir" awgii.

Go'aankan togan marka laga tago, waxa sii socotay in lasoo gudbiyo kiisas weli kasoo horjeeda isir-sooca ciyaal iskuulka reer Rooma ee Jamhuuriyadda Jeeg in ka badan shan iyo toban sano. Qaybta ka masuulka ah la socoshada hirgelinta go'aammada Maxkamada Yurub ee, Guddiga Wasiirrada, ayaa weli u tixgelinaya hirgelinta go'aanka mid "taagan" maadaama oo aanay si dhammaystiran u xalin hay'adaha dalka Jeeg.

Inkastoo horumar siyaasada ah la sameeyay, sannadkan 2022-ka weli waxa jira in ka badan 77 dugsi oo ku yaal Jamhuuriyadda Jeeg kuwaasoo ay ardayda Rooma ka yihiin ardayda ugu badan in yar oo ka mid ah intan ayaana ay sharxi karaysaa boqollayda ardayda Rooma ee ku nool dhulka ku hareeraysan. Isir-sooca reer Rooma ee dugsiyada Jamhuuriyadda Jeeg ilaa maanta waa jirtaa, ka sokow guushii maxkamadeed ee waynayd ee 2007-dii. Dagaalka loogu jiro suulinta isir-sooca dugsiyadu weli waa socotaa.

# KU XISAABTANKA KHARASHAADKA DACWADA (MID DHAQAALE IYO MID AAN DHAQAALE AHAYNBA)

Waxaa jira kharashaad iyo haliso badan oo la socda dacwad qaadista. Dacwadu waa hawl keeni karta is-maandhaaf, oo dhinacba dhinaca kale ka horkeenaysa. Sidoo kale waxay kor u qaadi kartaa sumcada dadka dacwada ku lugta leh taasoo noqonkarta arrin togan ama mid taban. Aad bay muhiim u tahay, marka la bilaabayo dacwad, in halisaha la yareeyo, qarashaadkana qorshe loo sameeyo, sida:

## Kharash dhaqaale

Kiisasku waxay ku kacaan lacag. Shaqo badan ayaa gasha dhisidda iyo ku doodida kiiska, laga bilaabo caddayn ururinta ilaa qabanqaabinta istaraatiijiyada iyo u doodista. Sidoo kale khidmadaha sharciyeed way badnaan karaan, inkastoo marmar ay suuraggal tahay in lagala gorgortamo qareennada inay kiiska khidmad-la'aan ama khidmad yar ku qaataan maadaama uu yahay aragti muhiima. Waxaa suuraggal ah in taakulo lacageed oo bulsho loo helo kiiska haddii lagu kabo "kaalmo sharci".

Khidmadaha sharciyeed waxa dheer, waxa laga yaabaa inaad bixiso khidmadaha maxkamada iyo inaad lacag ka bixiso khubarada, tarjumayaasha, baadhayaasha, iyo la taliyayaasha sharciyeed. Sidoo kale waxaa muhim ah in dadka kiiska wada ay dareemaan taageero iyo danayn inta geedi-socodka lagu jiro, markaa waxaa lagama maarmaan noqonaysa in sidoo kale lacag la siiyo adeeg bixiyayaasha kaalmada ka gaysankara arrintan.

Wadarta kharashaadka kiisku aad ayay u kala duwanaan kartaa, ka bilaw kumannaan ilaa boqollaal kun oo Yuuro. Halista kharashka waxaa uga sii daraya xaqiiqada ah, in kiisaska qaar, dhinaca ku guuldarraysta lagu amri karo inuu bixiyo kharashaadka qareennada dhinaca kale. Sidaa awgeed, in kiis lagu guuldarraysto waxaa la socon kara qiime aad u sarreeya. Inta aanad kiis bilaabin, inaad kharash u dhigato iyo inaad lacag u urursato xaaladahan ayaa aad u muhim ah.

## Cuddud

Inaad awooddo kharash-bixinta hawlaha sharciyeed waa qodob, laakiin ka hor inta aan kiis la furin waxa aad u muhim ah kuwa qorshaynaya dacweynta in ay haystaan cuddudii iyo awooddii ay hawshaa ku geli lahaayeen. Inta aan la diyaarin ee aan kiiska maxkamad loo gudbin waxa jira su'aalo fure u ah oo la is waydiiyo, oo ay ku jiraan:

> *Ma yihiin cuddudaasi kuwa u diyaara in lagu socodsiiyo hindiseyaasha u doodista ee lagama maarmaanka ah, ololayaasha, iyo isgaadhsiinta la socota dacwada?*
>
> *Miyay jiraan xiriirro dhisan oo lala yeeshay qareennada , daraaseeyayaasha, iyo la taliyayaasha sharciga kuwaas oo xoojin kara oo taageeri kara kiiska?*
>
> *Awood ma loo hayaa in si joogto ah loo wado oo loo qaato go'aanno inta lagu guda jiro geedi-socod dheer sida dacwad?*

## Dib u dhacyo

Marka kiis la gelayo, had iyo jeer waxaa jira halista ah in kiiska lagu guuldarraysan karo go'aan tabanna la gaari karo. Go'aankani wuxuu "dib u dhac" ku keeni karaa ujeeddada kiiska maadaama oo uu abuurayo aqoonsi mawqif sharci oo markii hore ay dood ka furnayd. Su'aashu waxay tahay, ujeeddada dacwadu ma xammili kartaa halista dib u dhacaas.

Tani waa xaalad iman karta oo ay tahay in qorshe laga lahaado. Dib u dhacu wuxu niyadjab ku noqonkaraa dhaqdhaqaaqa, laakiin sidoo kale waxay noqonkartaa dhiirigelin. Waxayba ujeeddada dacwada usoo jiidi kartaa dad kale iyadoo loo sababaynayo najiijada go'aanka ee aan caddaalada ahayn. Waxaaba suurtagal ah in guuldarrada libin loo rogo.

## Bedqabka iyo amniga

Dacwadu waxay dadka kiiska wada u keeni kartaa weerar shakhsiyadeed oo ka dhan ah cirdigooda, kalsoonida lagu qabo, ama xataa dadkooda. Waxay hadaf u noqon karaan handadaad joogto ah oo baraha bulshada ah oo ka imanaysa dadka ujeeddadooda ka soo horjeeda.

Walxahani kuma cusba dhaqdhaqaaqayaal iyo ololeeyayaal badan, laakiin khatartu way sii badan kartaa marka laga hadlayo dacwada qaabkeeda loollanka ah awgii. Dhinaca kiiska laga gudbiyay waxaa lagu dhiirrigeliyaa inay riixaan sheekadooda gaarka ah oo weeraraan sugnaanta iyo run-ahaanta sheekada ay soo gudbiyaan kuwa kiiska ka soo gudbiyay.

Tallaabooyin waa in la qaadaa si loo ilaaliyo kuwa ku lugta leh dacwada, tani waxay noqonkartaa ku caawinta tababar warbaahineed ama tababar jireed iyo tababar amniga dhijitaalka ah.

## Dib u noolaynta dhaawacyo hore

Dacwadu waxay la xiriirtaa kiis u gudbinta maxkamad, oo ay ku jiraan caddaymo waxyeello oo dhab ah iyo sheekooyin dhab ah oo taageeraya doodda laga sameeyay kiiska. Sidoo kale, qaabka loollanka ah ee dacwada awgeed, dhinaca kale waxa lagu dhiirrigeliyaa inuu xujo-geliyo run ahaanta iyo sugnaanta xaqiiqada la soo bandhigay, iyo shakhsiyaadka soo bandhigay xaqiiqadaas.

Geedi-socodku keliya lama xiriiro dib u soo noolaynta dhacdooyin dhaawac oo hore, ee wuxu sidoo kale la xiriiraa "sii shidaalinta" walxaha la xiriira dhacdooyinkaas. Waa muhim in dacwada loo wado qaab dhaawac-tixgelin leh waxaana maxkamadaha lagu riixaa inay yareeyaan waxyeellada ku xusan dacwadaha la horgeeyo.

DARAASAD KIIS:

## SAGAALKII REER OGONI: U RAADINTA ISLA-XISAABTAN DADKII AY AADKA U SAAMAYSAY BAABI'INTII DEEGAAN EE AY SHIRKADDA SHELL U GAYSATAY GOBOLKA JIINKA NIIJAR

1950-maadkii, shirkadda Boqortooyada Dutch-ka ee SHELL ayaa ka bilawday hawlahedii gobolka Jiinka Niijar. Qaybo ka mid ah gobolka Jiinka Niijar ayaa degdeg u noqday mid ka mid ah meelaha ugu wasakhda badan dunida. Sannadihii 1976-kii ilaa 1991-kii, dhulka Ogoni waxaa ka dhacay 2,976 daadin wasakh saliideed taasoo u dhiganta labo malyan oo foosto oo saliid ah. Intii lagu jiray 1990-maadkii, Dhaqdhaqaaqa Badbaadada Reer Ogoni ayaa la aasaasay kaas oo u ololayn jiray arrimaha bulshada, dhaqaalaha, iyo caddaalada degaanka iyadoo loo marayo iska-caabbin aan foodo wadan iyo muddaharaad. Sannadkii 1995, sagaal u dhaqdhaqaaqayaal deegaan ayaa dil lagu xukumay waxaana si qarsoodi ah u toogtay ciidamada rajiimka Niijar.

Dhaqdhaqaaqayaashaa waxa la mariyay xukun marmarsiinyo oo ah in kooxdu dhiirri geliyeen dilka afar caaqil oo reer Ogoni ah, xukun aad loogu dhaliilay inuu ahaa wax la dhoobdhoobay iyo caddaalad-darro. Garoobbada sagaalkii reer Ogoni ayaa kiisas ka furtay Maraykanka iyo Holan iyagoo raadinaya in shirkadda Shell lagu la xisaabtamo doorkeedii kaalmada iyo caawimaadda ahaa ee ay ka gaysatay xadhiggii, qabashadii sharci-darrada ahayd, jirdilkii, xukun-qalloocintii, iyo dilkii sagaalkii reer Ogoni. Kiiska maxkamadaha Maraykanku wuxu socday in ka badan lix sano, iyadoo ugu danbayn maxkamada sare ee Maraykanku xukuntay inaan xaajada lagu goyn karin maxkamadaha Maraykanka sababtoo ah si buuxda "uma taabanayso umana khusayso" Maraykanka.

Kiis xigey ayaa laga furey dalka Holan, Maxkamadaha Dhajkuna waxay heleen inaan caddayn buuxda loo hayn ku lug lahaansha shirkadda Shell ee burinta caddaalada. Garoobbadaasi waxay go'aansadeed inaanay racfaan ka qaadan go'aanka, waxayna qareennadooda soo fareen in "arrintu ahayd mid dheer oo habraac u baahan, taasoo ka dhigtay inay dib u maraan dhacdooyin argagax leh, iyadoo aan natiijadana la hubin." Shirkadda Shell waxay sii wadatay diidmadeedii ka dhanka ahayd eedaymaha laga sameeyay dacwaduna ilaa maanta way socotaa iyadoo loo raadinayo magdhow dadkii iyo noloshii ay saamaysay baabi'intii deegaan ee shirkadda Shell u gaysatay gobolka Jiinka Niijar.

## SOO KOOBIDDA GOORTA AAD ADEEGSAN KARTO DACWAD ISTARAATIIJI

Kala doorashada in kiis la geeyo maxkamad iyo in kale ma aha go'aan sahlan. Wuxu la xiriiraa qiimaynta fursado dhawr ah adigoo u eegaya halisaha kale ee ku gedaaman. Tani waxay u baahantahay in la ogaado xilliga "ku habboon" ee aad u beddeli karto ololahaaga dacwad. Waxay kale oo ay la macne tahay hubinta in baahiyaha habraacu diyaar yihiin, in dadaallada kiiska la joogtayn karo, iyo in kharashaadka iyo halisaha ku gedaaman dacwada la maaraynkaro. Intaa waxa dheer, dadka kiiska wada waa inay is waydiiyaan: meesha ay dacwadooda gaysanayaan?

CUTUBKA SHANAAD:

# XAGGEE GEYN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?



# XAGGEE GEYN KARTAA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Iyadoo ku xidhan nooca kiiska la qaadayo, waa in cabasho sharci ah la hor geeyaa cid gaar ah ama nidaam maxkamadeed oo awood iyo amar-maamul leh si go'aan looga gaadho cabashada. Amarkan maamul iyo awoodan waxa loo yaqaan hay'ad ama garsoor maxkamadeed oo xaajada maareeya.

Dhawr tusaale oo ah waaxyo kala duwan ama maxkamado maraayn kara kiisaska dacwadaha istaraatiijiga ah waa:

**Maxkamadaha qaranka**

**Hay'adaha kale ee qaran**

**Maxkamadaha gobollada**

**Hay'ado ama maxkamado caalami ah**

# MAXKAMADAHA QARAN

Badanaa nidaamyada sharcigu waxay leeyihiin maxkamado kala sarreeya, halkaas oo nidaamka maxkamadeed kiisaska racfaanka looga qaato laga soo bilaabo maxkamad hoose ilaa maxkamad sare. Badanaa, midba midka ay ka sarreyso ha'yaduhu ama maxkamaduhu, waa ka awood iyo awood-maamul badanyihiin. Tani waxay la macne tahay in maxkamadaha sare ay meel ku wacan joogaan si ay u jideeyaan ama u riixaan isbeddel baallaadhan.

Marka la eego nidaamyo garsoor oo badan maxkamada ugu sarraysaa waxay noqonaysaa maxkamad Dastuur ama Maxkamad Sare, waxayna badanaa noqonayaan nidaam awoodeedka ugu sarreeya marka ay joogto qeexidda sharcinnimada xeerarka ama ku-dhaqanka marka loo eego nidaamka dastuur ee dal leeyahay.

## QAAB-DHISMEEDKA MAXKAMADAHA EE NIDAAMKA SHARCI:




Maxkamadaha waxaa sidoo kale loo qaybiyaa dhinacyo kala duwan taas oo ku xidhan nooca sharci ama nooca muran ee ay dhegaystaan, tusaale ahaan muranada la xiriira shaqaalaha, baayac-mushtarka, denbiyada, maamulka, iyo maddaniga.

Kiisaska qaar waxa la xalliyaa isla markaba iyadoo aan tallaabo dheeri ah loo qaadin dhanka maxkamadaha. Kiisas kalena waxa loollan lagaga galaa nidaamka maxkamadaha ilaa maxkamadaha sare. Kiisaska inta badan waxaa maxkamadaha sare lagu geeyaa geedi-socod loo yaqaan "racfaan qaadasho", marka ay jirto ismaan-dhaaf iyo hubaal-li'i ku gedaaman miisaanka sharci ee xaajo gaar ah. Tusaale ahaan, marka maxkamadaha hoose ku guuldarraystaan inay sharciga si saxa u dabaqaan. Waxay noqonkartaa sababta in guushu keliya timaado ka dib guuldarrooyin ka dhaca maxkamadaha hoose.

### DARAASAD KIIS:

## IS-MARIWAA KA JIRA MAXKAMADAHA FIINLAAN: JIITAN KIISASKA KA DHANKA AH ISIR-BEEGSIGA

2016-kii, labo dumar oo Madow ah, hooyo iyo gabadheeda, ayaa waxa joojiyay oo baadhay booliska Helsinki. Boolisku waxay sheegeen in saraakiishoodu inay wadeen basaasid dadka ku shaqaysta galmada ayna ku hawlanaayeen baadhitaan ku saabsan hubinta xaaladda soo-galootiga. Way dafireen inay dumarkaas faquuqeen laakiin waxay oggolaadeen in falalkooda uu qayb ahaan saamayn ku lahaa midabka jirka dumarkaas.

Kiiska waxa la geeyay Xarunta Sinnaanta iyo Faquuq-la'aanta, taasoo ogaatay in boolisku isir ahaan u beegsadeen dumarka oo ay faquuqeen. Xaruntu waxay booliska ka mamnuucday inay falkaa soo celiyaan waxayna saartay ganaax shardiyaysan oo dhan 10,000 oo Yuuro si booliska loogu kallifo inay u hoggaansamaan amarka. Go'aankan waxaa markii danbe racfaan loogu qaatay Maxkamada Maamulka, taasoo qaadacday oo laashay go'aankii hore ee Xarunta.

Kiiska waxaa mar kale racfaan loogu qaatay Maxkamada Sare ee Maamulka, taasoo laashay go'aankii Maxkamada Maamulka amartayna in la soo celiyo oo lagu dhaqmo go'aankii hore ee Xarunta. Si kale marka loo dhigo, booliska waxaa mar labaad laga mamnuucay iyadoo ganaax la socdo, inay soo celceliyaan istaajin isiraysan iyo baadhitaan.

# HAY'ADAHA KALE EE QARAN

Dalalka badankoodu waxay dhiseen hay'ado madax bannaan kuwaasoo leh awoodo gaar ah oo dabaggal, la socosho, iyo ka go'aan gaarista cabashooyinka laga qabo arrimo khaas ah ama sharciyo gaar ah, inkastoo aanay maxkamado ahayn. Waxay maarayn karaan arrimaha waxayna korjoogtayn karaan qaybaha-ganacsiga ee ku fidsan guriyanta, waxbarashada, caafimaadka, deegaanka, warbaahinta, daryeelka macaamiisha, xuquuqda aadanaha, iyo sinnaanta.

Hay'adahan waxa marmar loogu yeeraa hay'adaha "maxkamad-la-moodka ah" sababtoo ah waxay caadi ahaan u egyihiin maxkamadaha, laakiin ma leh dhammaan awoodaha garsoor ee maxkamadeed. Hay'adahani waxay awoodaan in ay gaaraan go'aano ama soo rogaan tallaabooyin kaalmayn kara in la helo nooc uun oo ah isbeddel-ballaaran. Xaaladaha qaar, waxaba lagama maarmaan noqonkarta in bilawgaba loo tago hay'ad caynkaas ah inta aan maxkamad la aadin.

Waaxyaha qaar waxay sidoo kale haystaan oggolaanshaha inay maxkamadaha kiisas geeyaan iyagoo metelaya dadka kale iyo danaha bulshada. Tani waxay la macne tahay inay kiiska maxkamad la aadi karaan si ay u taageeraan oo u ilaaliyaan kuwa ay saamaysay amuur gaar ahi.

### DARAASAD KIIS:

## XAYAYSIINTA MIDAB-TAKOORKA: XAYIRAADDA XAYAYSIIS MIDAB-TAKOOR AH OO DAWLADEED

Xagaagii 2022-kii, Wasaaradda Caddaalada Ingiriiska ayaa adeegsatay xayaysiis Facebook si loo socodsiiyo qorshaheeda ah "Shaqooyinka Xabsiga". Xayaysiiskan, waxaa ku jiray sarkaal caddaan ah oo la hadlaya nin maxbuusa oo Madow. Xayaysiisku wuxuu sidoo kale ka koobnaa qoraal ah "Noqo Sarkaal Xabsi. Hal shaqo, oo dhawr door leh", iyo ciwaan dhahaya "Waxannu nahay shaqaale muhiim ah, dhibaato xalliyayaal, nolol beddelayaal. Nagu soo biir si aad uga qaadato door muhiim ah HMP Wormwood Scrubs".

Hay'ada Halbeegyada Xayaysiinta (ASA), oo ah korjoogaha xayaysiisyada ee Ingiriiska, ayaa heshay cabasho ku doodaysa "xayaysiisku wuxuu dabada ka riixayay aragti qawmi oo taban" wuxuuna ahaa mid u badan inuu sababi doono cadho aad u daran. Hay'ada Halbeegyada Xayaysiinta (ASA) ayaa ka masuul ah la socoshada u hoggaansamidda Xeerka Ingiriiska ee Xayaysiisyada aan warbaahinta la marin iyo Suuqgaynta, kaas oo ka kooban qayb mamnuucaysa isgaadhsiinta dhalinaysa cadho ballaadhan "ee ku qotonta sifooyin kala duwan oo la dhawray, sida qawmiyad". Hay'ada Halbeegyada Xayaysiinta (ASA) waxay xukuntay in qaybtan uu jebiyay xayaysiisku.

Dawladdu waxay isku dayday in ay racfaan ka qaadato go'aankan laakiin, racfaan ayay Hay'ada Halbeegyada Xayaysiista (ASA) ku go'aamisay mar kale natiijadeedii. Waxay sheegtay "marka la eego muuqaalka xabsiga, waxaannu tixgelinnay in xayaysiisku uu lahaa saamayn ah inuu dabada ka riixayo aragti isir oo taban oo ku saabsan in ragga Madow yihiin danbiilayaal. Markaa taa lagu saleeyo, waxannu ku soo gunaanadnay in xayaysiiskaasi dhalinayo cadho daran". Waxay codsatay inaan xayaysiisku mar danbe soo muuqan, waxayna u sheegtay Wasaaradda Caddaalada inay qaado tallaabooyin lagu hubinayo inaan cadho danbe dhalan.

### DARAASAD KIIS:

## LOOLANKA MIDAB-TAKOORKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Bishii Noofambar ee 2019-kii, Wakiilka Cabashooyinka Sinnaanta ee Iswiidhan ayaa kiis la aaday maxkamadaha Iswiidhan isagoo metelaya nin u dhintay ka dib markii adeeg caafimaad xumo uu kala kulmay adeegyada ambalaaska. Wakiilka Cabashooyinku wuxu sidoo kale kiiska ku metelayay xubnaha qoyska shaqsiga. Ninka, oo ahaa nin Muslim ah oo ka soo jeeda Afrika, wuxuu ku dhacay gurigiisa natiijo ka dhalatay dhiig madaxa kaga furmay. Ambalaas ayaa la wacay kalkaaliyayaasha degdegga ahna, iyagoo ka duulaya macluumaadka ay xaaskiisu bixisay, waxay diideen inay tixgeliyaan in ninku baahi culus u qabay gargaar degdeg ah.

Marka loo eego qoraalladii kalkaaliyayaasha degdegga ah, adeegga ambalaastu wuxu qeexay in ninku miyirqabay, feejignaa, oo "iska dhigayay mid miyirla'". Qoraallada waxa sidoo kale ku jiray su'aal ah "suuxdimaad dhaqan?". Maadama ninka xaaladdiisa dhab loo qaadanwaayey, isla markiiba lama baadhin oo lama daryeelin, wuxuna geeryooday bilo yar ka dib.

Wakiilka Cabashooyinka Sinnaanta ee Iswiidhan wuxuu kiiska la aaday Maxkamada Degmada ee Gootanisbaag taasoo, bishii Maayo 2021, xukuntay in adeeg-bixiyayaasha caafimaadku ay u faquuqeen ninkaas isirkiisa awgii. Waxay kale oo heleen in ninka xaaskiisa ay faquuqeen bixiyayaasha daryeelka caafimaad sababtoo ah waxay diideen inay dhegaystaan macluumaadka muhimka ah ee ay bixinaysay. Maxkamadu waxay ku abaalmarisay magdhow gaadhaya 11,000 oo Yuuro. Wakiilka Cabashooyinku wuxuu racfaan ka qaatay go'aanka, isagoo ku salaynaya in abaalmarinta magdhowgu ay aad u yarayd.

Bishii Abril 2022-kii, golaha deegaanku waxay isku waafaqeen inay xaajada ka arrinsadaan. Sidaa haddii la yeelayna, waxay waafaqeen go'aankii Maxkamada waxayna soo bandhigeen bixinta magdhow ku dhow 25,000 oo Yuuro.

## MAXKAMADAHA HEER GOBOL

Si ka baxsan maxkamadaha qaran, kiisaska qaar waxaa sidoo kale la gayn karaa maxkamado fadhigoodu yahay heer gobol. Maxkamadahani waxay masuul ka yihiin ka garniqidda arrimaha khuseeya heshiisyo ama sharciyo goboleed, oo ay ku jiraan xuquuqaha heer gobol ee loo qaabeeyay inay ilaaliyaan ama socodsiiyaan xuquuqda aadanaha ee meel gaar ah. Yurub dhexdeeda, laba tusaale oo caan ah oo maxkamadaha caynkaas ah waa Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub iyo Maxkamada Caddaalada ee Midowga Yurub.

## MAXKAMADA XUQUUQDA AADANAHA EE YURUB

Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub waxay masuul ka tahay fasiraada iyo ku dabiqidda  kiisaska shakhsiga ah Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Yurub.

Kiisaskan waxa laga gudbiyaa dalalka saxeexay Axdiga waxana la qaadi karaa keliya marka dhammaan khiyaarradii kale ee suuraggalka ahaa dhammaadeen. Haddii si kale loo dhigo, kiisaska keliya waxa la tixgeliyaa marka lagu soo go'aamiyay ilaa maxkamada qaran ee ugu sarraysa ee.suuraggalka ah.

Go'aannada maxkamadu waxay qabanayaan dalka qaybta ka ah kiiska, taasoo la micne ah inay waajib ku tahay inuu fuliyo go'aannada lagu soo rogay.

Maxkamadu kuma koobna oo keliya inay si sahlan u shaaciso in la baalmaray xuquuqda aadanaha, waxa kale oo ay amri kartaa in magdhow la siiyo qofka kiiska keenay - taas oo loogu yeero "qancinta caddaalada".

Maxkamadu waxay sidoo kale leedahay awood lagu dabaqo "tallaabooyin gaar ah" si loo toosiyo ama loo baabi'iyo baalmar cayiman oo xuquuqda aadanaha ah, sida codsiga ah in qof xabsiga laga sii daayo. Waxay sidoo kale marmar tilmaamaysaa "tallaabooyin guud" oo ay tahay in la dabbaqo si loo taabto arrimo nidaam oo badan, sida in la dalbado in xaaladda xabsiyada la hagaajiyo. Maxkamadu waxay sidoo kale xaaladaha qaar ka soo rogi kartaa tallaabooyin degdeg ah.

### DARAASAD KIIS:

## BILJAMKA OO LAGU AMRAY INUU DEJIYO DADKA MAGANGELYO DOONKA AH

Kiis ayaa la horkeenay Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub kaasoo khuseeya xaaladda dadka magangelyo doonka ah ee Biljamka. Shaqsiyaadka kiiskan geeyay ayaa codsaday daryeel caalamiya oo Biljamka dhexdiisa ah laakiin waxay weli sugayaan in goob laga siiyo xarun qaabilaadeed.

Xarumahani waxay bixiyaan hoy, cunto, iyo dhar, iyo sidoo kale kaalmo caafimaad, bulsho iyo nafsadeed inta codsigoodii daryeelka caalamiga ah la habaynayo. Caqabado ka jira goobaha xarumaha qaabilaadda awgood, dad badan oo magangelyo doon ah ayaa dariiqyada ku nool.

Kiisas ayaa loo gudbiyay maxkamadaha Biljamka, maxkamadahaasina waxay ku amreen Hay'ada Federaalka ee Qaabilaadda Magangelyo Doonka inay dadka hoy la'aanta ah ee magangelyo doonka ah hoy ka siiso xarumaha soo dhowaynta, hudheellada, ama xarumo kale oo ku habboon. Amarradan waa layska dhega-tirey, tiro kiisas ahna waxa markaa la geeyay Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub. Kiisaska mid ayaa khuseeyay 148 qof oo magangelyo doon ah.

Maxkamadu waxay adeegsatay cadaadis dheeriya iyadoo ugu yeedhay Biljamka inay xoojiyaan amarrada maxkamadaha qaran, dadka saamayntu gaadhayna siiyaan hoy iyo kaalmo alaabeed si ay baahiyahooda aasaasiga ah u helaan.

Go'aannada Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub sidoo kale waa laysku hallaynkaraa marka la joogo dalalka kale ee Yurub marka maxkamadaha la faro inay dabaqaan Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Yurub kiisas kale oo la mid ah ama la xiriira awgood.

DARAASAD KIIS:

## XUJO-GELINTA CABBUDHINTA XAYAYSIISYADA LGBTQI+ EE GUDAHA HANGARI

2022-kii, gudaha Hangari korjoogaha warbaahinta ayaa ogaaday in Kannaal telefishan uu baalmaray sharciga qaran ee warbaahinta isagoo tebiyay xayaysiis ku saabsan "qoysaska dadka jinsigooda wax ka daya" xilli maalin ah. Waxay isku dayeen inay ku koobaan tebinta xayaysiiska inta u dhexaysa 9-ka fiidnimo ilaa 5-ta aroornimo. Waxay ku doodeen inuu xayaysiisku saamayn taban ku yeelan karayay carruurta sidaa awgeedna ay tahay in la baahiyo habeenkii.

Kiiska wuxuu markaa u gudbay maxkamadaha Hangari, kuwaasoo ku gacansaydhay go'aankii korjoogaha warbaahinta. Iyagoo sidaa yeelayana, maxkamaduhu waxay si ballaadhan uga soo dheegteen Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub xukummada kiisas hore. Gaar ahaan, waxa la soo dheegtay Maxkamada Yurub sababaynteedii ahayd "in aanay jirin caddayn sayniseed ama xog bulsheed [...] taasoo soo jeedinaysa sheegista dadka jinsigooda wax ka daya oo qudha, ama dood-fagaareed furan oo ku saabsan heerka bulsho ee dadka jinsi ahaan laga tiro badanyahay inay si taban u saamaynayso carruurta ama 'dadka waawayn ee nugul'. Taa liddigeeda, sida keliya ee bulshadu uga hadli karto arrimaha sidaasoo kale u dhafan waa dood fagaareed caddaalad ah". Maxkamadaha Hangari waxay ku celiyeen in sharciyadda Hangari loo fasiro qaab waafaqsan go'aannadii ay mawduuca ka gaadhay Maxkamada Yurub.

# MAXKAMADA CADDAALADA EE MIDAWGA YURUB

Tani waa maxkamada ugu sarraysa ee Midawga Yurub, waxayna korjoogtaysaa dabiqista iyo fasiraada sharciga Midawga Yurub. Kuwani waa sharciyadda ay meel mariyaan hay'adaha Midawga Yurub ee maamula wadammada xubnaha ka ah Midawga Yurub. Sharciga Midawga Yurub wuxu buriyaa sharciga qaranka marka uu jiro khilaaf u dhaxeeya sharciga qaranka iyo sharciga Midawga Yurub.

Waddammada Midawga Yurub waxaa Guddiga Yurub uu horgayn karaa Maxkamada Caddaalada ee MY, oo ah laanta fulinta ee MY, marka uu ku guuldarraysto qaranku inuu buuxiyo waajibaadkiisa ku qotoma sharciga MY.

DARAASAD KIIS:

## SHARCIGA SHAQADDA IYO NAAFADA EE MIDAWGA YURUB WAXA UU TALYAANIGA U KEENAY IS-BEDDEL TOGAN

Sannadkii 2000, Midawga Yurub waxa uu soo kordhiyay sharciyo lagu beegsanayay sidii loo dhimilahaa faquuqa goobta shaqadda. 2011-kii, Guddiga Yurub wuxuu Talyaaniga horgeeyay Maxkamada Caddaalada ee Midawga Yurub iyadoo loohaystay ku guuldarraysasho dhaqangelinta qaybo sharciyaddan ka mid ah kuwaasoo ku shuqul lahaa naafada.

Maxkamadu waxay ku waafaqday guddiga, helitaanka in Talyaaniga aanu wax imkaaniyaad ah ka siin dadka naafada ah dhammaan qaybaha shaqadda iyo dhammaan dhinacyada xiriirka shaqadda.

Sidaa awgeed waxaa Talyaaniga lagu helay inuu ku guuldarraystay dhaqangelinta sharciyadda MY ee ku aaddan. Waxaa xiiso leh, go'aanka dhexdiisa, Maxkamadu waxay aragtay in sharciga Midawga Yurub laftiisu aanu qeexin ereyga "naafo". Maxkamadu waxay tibaaxday in ereygaa loo fahmo inuu koobayo "dhammaan dadka ay haleeshay naafonimo," sida lagu qeexay Axdiga QM ee ee Xuquuqda Dadka Naafada ah.

Kiisaska waxaa sidoo kale Maxkamada keeni kara shakhsiyaad ama cid sheeganaysa inuu si shakhsi ah u saameeyay go'aan aan sharci ahayn (ama tallaabo-qaad la'aan) ay sameeyaan hay'adaha ama waaxyaha MY qaarkood.

DARAASAD KIIS:

## CADDAALAD RAADIN: KU MAXKAMADAYNTA HAY'ADA FRONTEX MAARAYNTA XADKA UGU DHIMASHADA BADAN ADDUUNKA

Frontex waa Hay'ada Ilaalada Xeebaha iyo Xuduudaha Yurub ee Midawga Yurub, taasoo ka masuul ah socodsiinta, isku-xidhka, iyo horamarinta maaraynta xadka Yurub si waafaqsan sharciga MY. Xadka Yurub ee Badda Cad wuxuu noqday in loogu yeero "xadka ugu dhimashada badan adduunka". Hay'ada Frontex waxay taa ugu lugyeesheen dib u riixid qaabaysan oo ay qaxootiga kula kaceen iyagoo adeegsanaya farsamooyin sharci-darro ah.

2021-kii, daraasad ayaa geerida 2,000 oo qaxooti ah la xiriirisay dib u riixidda sharcidarrada ah ee MY. Isla sannadkaas, saddex Ururrada Aan Dawliga Ahayn (front-lex, Progress Lawyers Network, iyo Greek Helsinki Monitor) ayaa kiiskii ugu horreeyay Maxkamada Caddaalada ee Midawga Yurub ka keenay hay'ada Frontex doorkeedii ahaa ku tumashada xuquuqda tahriibayaasha.

Kiiska waxa lagu metelayay labo qof oo magangelyo doon ah, kuwaasoo sheegay in si gacan-ka-hadal ah loo xirxiray, loo garaacay, xabsi loo dhigay, si xoog ah badda loogu celiyay, ugu danbayna lagaga yimi xuduudaha Giriigga iyagoo doon bac ka samaysan saaran. Kiiskan waxaa loo laalay sababo farsamo habraac oo khuseeya in ay jirtay "ku guuldarraysi tallaabo qaadis" oo ah dhinaca hay'ada Frontex. Siday doontoba ha ahaatee, kiiska oo noqday kii ugu horreeyay ee xuquuqda aadanaha ah oo laga gudbiyo hay'ada, waxaa ka daba yimi kiisas kale oo badan oo ay Maxkamada geeyeen Ururrada Aan Dawliga Ahayn iyo dad magangelyo doon ah oo sheeganaya in falalka hay'ada Frontex ay ku tunteen xuquuqda aadanaha.

Qaabka ugu badan ee kiis loo horgeeyo Maxkamada Caddaalada waa codsi ay maxkamadaha qaran ee waddamadda MY u dirsadaan Maxkamada Caddaalada si loo caddeeyo qodob khuseeya fasiraada sharci MY ah oo ku jiray kiisas ka horreeyay.

Marka maxkamadu go'aan gaadho, kiisku wuxuu marwalba ku noqonayaa maxkamada qaranka si ay kiiskaa gaarka ah uga samayso xukun kama danbays ah oo ku aaddan go'aankii Maxkamada. Tan waxay sidoo kale la macne tahay go'aannadaas oo kale ee Maxkamada waxay saamayn isdaba-joog ah ku yeelanayaan gebi ahaan maxkamadaha qaran ee ku jira MY marka loo diro inay dabaqaan isla sharcigaa MY ee la fasiray.

DARAASAD KIIS:

## HUBINTA IN SHARCIGA LA-DAGAALANKA TAKOORKA EE BOOLLAAN LAGU DABBAQO DHAMMAAN NOOCYADA SHAQOOYINKA

2017-kii, warbaahinta bulsho ee Boollaan, waxay ayaa joojiyay qandaraas shaqo oo ay kula jireen tafatire, kaasoo awal kala shaqeeyay mashaariic kala duwan. Qandaraaska waxa la saxeexay laba toddobaad ka hor waxana loogu talagalay inuu bil socdo. Qandaraas joojintu waxay timi laba cisho ka dib markii tafatiruhu soo dhigay barta YouTube muuqaal socodsiinaya u dulqaadashada lammaanayaasha isku jinsiga ah. Wuxu isku dayey inuu warbaahinta ku dacweeyo takoor ku aadan janjeedhkiisa jinsi. Siday doonto ha noqotee, sharciga la dagaalanka Takoorka ee Boollaan waxa lagu dabaqayay dadka haysta qandaraas shaqo oo keliya lagumana dabaqayn shakhsiyaadka haysta qandaraas la talineed.

Maxkamadaha Boollaan waxay su'aal keeneen Maxkamada Caddaalada ee Midowga Yurub, iyagoo waydiinaya in sharciga Boollaan adeecayo sharciga sinnaanta ee MY iyo in kale. Maxkamada Caddaaladu waxay caddaysay in sharciga la dagaalanka takoorka uu ku waajibayo dhammaan cidda "shaqo shaqsi ah" u qabata cid kale, iyadoo aan la eegayn nooca qandaraas ee ay haystaan. Kani wuxuu ahaa go'aan muhiim ah, maadaama oo dhawr waddan oo MY ah ay raaceen waddo la mid ah tan Boollaan raacday ee ah in dadka iskood u shaqaysta loo diido daryeelladaas. Maxkamadu waxay caddaysay in waddadan aan lagu gaadhayn buuxinta waajibaadka hoostaga sharciga la dagaallanka takoorka ee MY.

Kiisaskani waxay kale oo dalban karaan in Maxkamadu muraajacayso sharci ahaanshaha xeerka MY ee loo cuskaday kiiska. Tani waxay iman kartaa, tusaale ahaan, haddii xeerka MY laftiisu jebiyo xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ah ee uu MY aqoonsan yahay. Marka la soo koobo, Maxkamadu waxay xukumi kartaa in xeerarka MY qaarkood aanay ansax ahayn.

### DARAASAD KIIS

## KU DHISITAANKA KHIDMADAHA CAYMISKA SINNAAN JINSI: IS-HORTAAGGA ADEEGYADA JINSIYAYSAN

2012-kii, xeer MY ka jira ayaa oggolaanayay adeegsiga halisaha jinsiga u gaarka ah si loo xisaabiyo khidmadaha iyo faa'iidooyinka caymiska. Caymis bixiyayaasha waxa loo oggolaaday in ay arrintan u samayn karaan si sharciga hoos tegaysa, inta ay ku salaysan tahay "xog tirakoob dhab ah oo taxliilsan oo arrinta khusaysa". Tani waxay ka dhigantahay in ragga iyo dumarka ay caymiska ka bixinayeen khidmado kala duwan oo si toos ah ugu salaysan jinsigooda. Waxay saamayn taas la mid ah ku lahayd faa'iidooyinka caymiska. Tusaale ahaan, dumarku waxay helayeen lacagta sannadlaha ah ee hawlgabka oo ka yar tan ragga sababtoo ah dumarka waxa loo tixgeliyay inay ragga ka cimri dheer yihiin.

Midow ay leeyihiin macaamiisha Biljamka, Testa-Achats, ayaa arrinkan kiis ka geeyay maxkamadaha Biljamka, maxkamada qarankuna waxay waydiisatay Maxkamada Caddaalada ee Midowga Yurub inay go'aan ka gaadho ansax ahaanshaha qaybtan ka midka ah sharciga MY. Maxkamada caddaaladu waxay ku dhawaaqday in qaybtaas ka midka ah sharciga aanay ansax ahayn, iyadoo caddaysay in ay ka koobantahay faquuq sharci-darro ah. Go'aankani wuxuu si toos ah u laalay qaybtii sharciga ee oggolaanaysay faquuqa, sidaa darteed caymis bixiyayaashu mardanbe ma tixgelin karayaan inay faquuq sameeyaan.

## HAY'ADO AMA MAXKAMADO CAALAMIYA

Dalalku waxay qayb ka ahaan karaan heshiisyo caalamiya, ama axdiyo, kuwaas oo ah ilaha sharciga caalamiga ah. Maxkamadaha iyo hay'adaha caalamiga ah waxay qaadi karaan kiisaska khuseeya jebinta axdiyadan, oo uu ka mid yahay axdiga xuquuqda aadanaha.

Tusaale ahaan, Maxkamada Denbiyada Caalamiga ah waxay tixgelisaa ku maxkamadaynta shakhsiyaadka denbiyada caalamiga ah sida xasuuqa, denbiyada ka dhanka ah aadanaha, denbiyada dagaalka, iyo debniyada weerar ku qaadista dal kale. Waxaa kale oo jira tiro kale oo maxkamado iyo hay'ado caalami ah kuwaas oo tixgeliya kiisaska khuseeya sharciga caalamiga ah xuquuqda aadanaha sida ku dhigan axdiyada ay ka mid yihiin Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqaha Siyaasadda iyo Rayidka.

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay waa hay'ad ka kooban khabiirro madax bannaan kuwaasoo dabagala hirgelinta Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Rayid iyo Siyaasadeed ee wadammada qaybta ka ah axdiga. Guddiga waxaa loo gudbin karaa cabashooyin ka dhan ah dalal 100 ka badan oo saxeexay. Cabashooyinkan waa in laga keenaa ama lagu metelaa shaqsi xuquuqdiisa uu jebiyay dalka kiiska laga gudbiyay, waana inay marka hore kiiska soo mariyeen maxkamadaha qaranka.

### DARAASAD KIIS:

## JOOJINTA AQOONSI HUBINTA MIDAB-TAKOORKA LEH: BOOLISKA ISBAYN OO LAGU QASBAY INAY RAALLI GELIN BIXIYAAN

Bishii Diisambar ee 1992-kii, Roosaliinda Wilyam Leekaraafti ayuu sarkaal bilays ahi istaajiyay boosteejo tareen oo ku taal Isbayn ka dibna waydiiyay inay tusto dukumantigeeda aqoonsiga. Waxay su'aashay sababta boolisku iyada gaar ugu soocay si loo baadho, sarkaalkii booliska ahaana wuxuu sheegay in lagu soo amray inuu baadho aqoonsiga dadka "iyada u eg" markaana ay amar ku socdeen si ay u sameeyaan baadhista aqoonsiga dadka midabka ah.

Maalintii xigtay, Roosaliinda waxay cabasho ka gudbisay booliska, taasoo bilawday sannado dacwad ah. Maxkamadaha Isbayn waxay diideen inay u aqoonsadaan in joojinta iyo aqoonsi baadhistu faquuq ahayd, sidaa darteed Roosaliinda waxay kiiskii la aadday Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qarammada Midoobay sannadkii 2006. 2009-kii, Guddigu wuxu helay in ay jirtay faquuq sharci-darro ah Roosaliindana loo diiday xuquuqda magdhow helista. Guddigu wuxuu faray Isbayn in Roosaliinda lasiiyo Magdhow, oo ay ku jirto raalli gelin muuqata, iyo in laqaado "tallaabooyinka lagama maarmaanka ah" ee lagu hubinayo in boolisku aanu mar danbe soo celin joojin iyo baadhis midab-takoor leh.



Hay'adahani waxay go'aan waafaqsan ka gaadhaan cabashooyinka soo gaadha, laakiin saamaynta go'aannadani badanaa way ka daciifsan tahay go'aannada maxkamadaha heer qaran ama heer gobol. Tani waxay la micne tahay in go'aannada togan ay u baahananayaan in lagula socdo ololayn joogto ah, u doodis, iyo dadaallo kale oo joogto ah si loo adkeeyo xoojintooda iyo hirgerlintooda.

Sida Guddiga Xuquuqda Aadanaha, waxa jira hay'ado kale oo axdiga Qarammada Midoobay ah kuwaas oo dhugan kara cabashooyinka laga qabo mawduucyo xuquuqda aadanaha ah oo gaar ah. Hay'adahani waa:

**Guddiga Xuquuqaha Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada iyo Dhaqanka ee QM**
Hay'adani waxay dabagashaa hirgelinta Heshiiska Xuquuqaha Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada iyo Dhaqanka ee Axdiga Xuquuqaha Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada iyo Dhaqanka, kaasoo ay ku jiraan xuquuqaha guriyayn dhammaystiran, waxbarasho, caafimaad, amni bulsho, biyo, nadaafad iyo shaqo.

**Guddiga la dagaallanka Jirdilka ee QM**
Hay'adani waxay la socotaa hirgelinta Axdiga la dagaallanka Jirdilka iyo Hab-dhaqannada Kale ee Arxan-darrada ah, Bini'aadannimada ka baxsan ee Foosha Xun ama Ciqaabta.

**Guddiga QM ee Baabi'inta Isir Faquuqa**
Hay'adani waxay dabagashaa hirgelinta Axdiga Baabi'inta Dhamaan Noocyada Isir Faquuqa.

**Guddiga QM ee Baabi'inta Faquuqa ka dhanka ah Haweenka**
Hay'adani waxay la socotaa Axdiga Baabi'inta Dhammaan Noocyada Faquuqa ee ka dhanka ah Haweenka.

**Guddiga QM ee Xuquuqda Carruurta**
Hay'adani waxay dabagashaa hirgelinta Axdiga Xuquuqda Carruurta, iyo sidoo kale axdiyada caalamiga ah ee khuseeya carruurta dagaallada loo adeegsado, iibinta carruurta, kufsiga carruurta, iyo muuqaallada galmada carruurta.

**Guddiga QM ee Xuquuqda Dadka Naafada ah**
Hay'adani waxay la socotaa hirgelinta Axdiga Daryeelka Xuquuqda Dadka Naafada ah.

**Guddiga QM ee ka dhanka ah Afduubka Sharciddarada ah**
Hay'adani waxay dabagashaa hirgelinta Axdiga Ka Dhawrista Dadka Afduubka Sharcidarrada ah.

### DARAASAD KIIS:

## BULSHADA REER SAAMI EE FAABISTAAN OO KACAY: WAX KA QABASHADA FAQUUQA NIDAAMSAN EE SHARCIYADDA MACDAN-QODISTA EE ISWIIDHAN

2010-kii, saddex dammaanadood oo macdan-qodis ayay dawladda Iswiidhan waxay shirkad gaar loo leeyahay u siisay godadka macdanta ee afka-furan kuwaas oo dhaca meel Iswiidhan ku taal oo bulshada reer Saami ee Faabistaan u ahayd dhul-daaqsimeed caadiya. Tan waxa la sameeyay iyadoo aan wax la tashi ah lagala yeelan bulshada reer Saami. Qodista godadkani boor ayay kiciyeen waxayna waxyeello u gaysateen dhulkii ay deeradu daaqi jirtay, waxayna kala xirtay jidadkii hayaanka ee u dhexeeyay dhul daaqsimeedka xilliyada kala duwan. Tani waxay si taban u saamaysay daaqii deerada ee degaankaas.

Dammaanadahan waxaa lagula loolamay maxkamadaha Iswiidhan, laakiin maxkamaduhu way diideen inay laalaan dammaanadaha. Shan iyo toban xubnood oo ka mid ah bulshada reer Saami ee Faabistaan ayaa markaa cabasho u gudbiyay Guddiga QM ee Baabi'inta Isir Faquuqa. 2020-kii, Guddigu wuxuu arkay in la baalmaray xuquuqda hantida ee bulshada reer Saami waxayna carabka ku adkeeyeen,in dadka Asalka ah ay ku waayeen dhulalkoodii iyo degaankoodii ay lahaayeedn oggolaanshahooda xorta ah la'aantii, waa in tallaabooyin loo qaadaa sidii loogu celin lahaa dhulalkaa iyo degaannadaas.

Guddigu wuxuu ka codsaday Iswiidhan inay dib u eegto dammaanadaha macdan-qodista ka dib geedi-socod ka kooban oggolaansho xor ah oo hore, iyo in xeerka dammaanadaha ee Iswiidhan la beddelo si ay uga muuqato kaalinta reer Saami ee ah inay yihiin dad asal ah markay joogto dhulka iyo xuquuqda khayraadka. Marka si kale loo dhigo, Guddigu wuxuu arkay sharciga macdan-qodista iyo deegaanka ee Iswiidhan inuu si nidaamsan u faquuqayo bulshada deero-daaqsatada ah ee reer Saami waxana loo baahday in la beddelo.

Bulshada reer Saami ee Faabistaan waxay sii wadaan weli u-dagaalanka in dawladda Iswiidhan u hoggaansanto go'aankii Guddiga.

## SOO KOOBIDDA HALKA AAD GAYN KARTO DACWAD ISTARAATIIJI

Waxa jira noocyo maxkamado iyo hay'ado sugan ah kuwaasoo tixgelin kara cabashooyinka sharci, qayb ka mid ah dacwada istaraatiijina waxay khusaysaa ka aqoonsashada maxkamadahan iyo hay'adahan kan ku habboon ee natiijo gaar ah ka gaadhi kara, arrin gaar ah, xilli gaar ah si uu sida ugu wacan ugu adeego ulajeedkaaga.

Maxkamad ama hay'ad kastaa waxay leedahay awood goonniya, qayb mowduuc oo goonniya, qaab goonniya oo ay sharciga u wajahaan, iyo heer kala goonniya oo awood-maamul ah. Lagama maarmaan ayay noqon kartaa in cabashooyinka sharci la mariyo nidaamka maxkamada ee ilaa maxkamadaha sare, ama maxkamadaha heer gobol iyo heer caalami, kuwaasoo laga yaaboo inay booska ku habboon joogaan si ay u keenaan is-beddelka loo baahan yahay.

Cutubka danbe waxa uu tibaaxayaa su'aasha ah yaa maxkamadaha geyn kara cabashooyinka sharci.

CUTUBKA LIXAAD:

# YAA GUDBIN KARA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?



# YAA GUDBIN KARA DACWAD ISTARAATIIJIYADEED?

Dacwad istaraatiiji waxay lahaan kartaa qaabab badan. Sidaasoo kale, cidda loo oggol yahay inay soo gudbiso dacwada way kala duwanaan karaan.

Ciddee ayaa dacwad oogi karta waxay ku xirantahay nidaamka sharci ee kiiska lagu qaadayo. Badiba nidaamyada sharcigu waxay cidda dacwada oogaysa ku koobayaan shakhsiyaad loo tixgeliyay inay haystaan "xuquuq dacwad oogis". Ereyga "xuquuq dacwad oogis" si fudud wuxuu la macne yahay xaqa sharciyeed ee aad dacwad kaga oogi karto cidda ay khusayso ama cidda maxkamad la saarayo.

Aan eegno "dacwad-ku-jire", tibaax loo isticmaalo dadka ama cidaha kala duwan ee kiis gudbin kara.

# SHAQSIYAAD

Nidaamyo sharci oo badani waxay dacwada ku koobaan shakhsiyaadka ay tooska u waxyeelleeyeen ama u saameeyeen dadka ama cidda maxkamada loo soo taagay sharci jebinta.

Marka kiis la qaadayo, shakhsiyaadkaasi waa inay maxkamada u muujiyaan inay toos ula xiriiraan una waxyeelleeyeen falalka ama is-indho-tirka qofka ama cidda ay dacwaynayaan. Kiisaska ay shakhsiyaadku oogaan waxay bannaanka soo dhigi karaan caddaalad-darrooyin baahsan, taasoo la macne ah macal kiisaska khuseeya waxyeello shaqsi inay yeelan karaan saamayn ballaadhan oo dhaafsiisan kuwa kiiska gudbiyay.

Mararka qaar, fikradda xiriirka iyo waxyeellada shaqsi waxaa marmar loo ballaariyaa si loogu soo daro kuwa halista ugu jira inay waxyeellayso ama saamayso fal ama is-indha-tiri. Sidaa awgeed, waxay fursad u furaysaa shakhsiyaadka caynkaas ah si ay xujo u geliyaan xeerarka iyo sharciyadda xataa marka aanay dabaqayn xaaladahooda gaarka ah.

DARAASAD KIIS:

## XUJO-GELINTA QIIMAYNAHA MAGANGELYADA BINI'AADANTINNIMO EE TALYAANIGA: XISAAB KU DARSASHADA BAABA'A DEEGAANKA

Shakhsi ka soo jeeda gobolka Jiinka Niijar ee Nayjeeriya ayaa ka soo tegay hoygiisa isagoo daryeel bini'aadantinnimo oo caalamiya ka raadsaday Talyaaniga. Sababta uu usoo tegey waxaa qayb ka ahaa isku-dhac hubaysan oo u dhaxeeya maleeshiyaad, iyo sidoo kale burbur deegaan oo ay ka mid ahaayeen dhawr wasakh saliid daadineed. Codsigiisa bilawgii waa la diiday, wuxuuna kiiskiisa racfaan ugu qaatay maxkamada ugu sarraysa ee Talyaaniga.

Maxkamada Sare ee Dib-u-eegista Sharciyadda ee Talyaaniga waxay xukuntay in qiimaynaha loo qaado ulajeedka bixinta daryeel bini'aadantinnimo aanay keliya tixgelin xaaladaha isku-dhacyada hubaysan ee sidoo kale ay tixgeliyaan xaaladaha bulsho, deegaan, iyo baaba'a cimilo, iyo sidoo kale xaaladaha qofka dalka uu kasoo jeeda uu la kulmo ka faa'iidaysi xad dhaaf ah oo ku saabsan khayraadka dabiiciga ah. Waxay tibaaxday in daryeelka bini'aadantinnimo la bixiyo marka dalka qofku ka soo jeedo aanu qaadi karin heerka ugu hooseeya ee dammaanadeed ee xuquuqda nolosha ee shaqsiga. Kiiskan iyo codsiyada mustaqbalka ee magangelyada bini'aadantinnimo, waa in qodobbadan loo tixgeliyaa.

DARAASAD KIIS:

## HA AHAATO WAAJIB AMA YAYSAN AHAANE: CADDEYNTA SABABTA DENBI KA DHIGISTA XIRIIRADA DADKA-ISKU-JINSIGA AH AY XADGUDUB UGU TAHAY XUQUUQDA AADANAHA

1977-kii, u dhaqdhaqaaqe ragga jinsigooda wax ka daya, David Norris, ayaa dacwad sharci geeyay maxkamadaha Ayrlaan taasoo uu su'aal-ku-geliyay xeerarka denbiga ka dhigayaa falalka galmo ee u dhaxeeya labo nin. Marna maxkamadayn kalama uu kulmin xeerarkaas laakiin waxa uu soo bandhigay caddayn ah in diiqad badan iyo kelinnimo ay ku keentay ka warqabka inuu wajihi karo maxkamadayn ku salaysan sharciga. Dhakhtarkiisu waxa uu ku waaniyay inuu iska tago kuna noolaado dal laga soo dhoweeyo xiriirrada dadka isku jinsiga ah si looga hortago walaacyadan iska socda ee soo booddada ah.

Maxkamadaha Ayrlaan way laaleen kiiska, intay ku guddo jireena, waxay carabka ku adkeeyeen in wax iska dayga jinsiga isku midka ah uu lid ku yahay xasilloonida bulshada. David waxa uu markaa kiiskii la aaday Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub, taasoo keliya tixgelisa kiisaska ay wadaan "dhibbanayaasha" wax kasoo gaadheen xadgudub ka dhan ah Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Yurub. Ayrlaan waxay maxkamada horteeda kaga doodday in David aanu "dhibbane" ahayn sababtoo ah lama uu kulmin maxkamadayn xeerka ku salaysan. Si kastaba ha ahaatee, Maxkamadu waxay heshay in xeerarku si toosa u saamaynayo isaga sababtoo ah cabsida uu ka qabay denbi-oogis ku timaadda marka uu u badheedho xiriirro jacayl uu la yeesho nin kale.

Maxkamadu waxay hoosta ka xarriiqday in shakhsiyaadku xaq u leeyihiin inay ka doodaan in xeerka laftiisu ku xadgudbayo xuquuqdooda aadane haddii ay u dhowdahay inay halis galaan. Maxkamadu waxay ku soo gunaanadday in hirgelinta xeerku si toos ah oo is dabajoog ah u taabanaysay nolosha gaarka ah ee David sababtuna tahay khatarta jiritaanka denbi-oogis. Xeerkii denbiga ka dhigayay falalka galmo ee u dhaxeeya laba nin waa la buriyay ku dhowaad shan sano ka dib go'aankii Maxkamada.

# KOOXO

Meelaha ay saamaynta ama waxyeelladu shakhsiyaad badan gaadhay, waxa suuraggal ah in kiisaska shakhsiyaadka si wadajir ah loo maareeyo, ama si urursan. Kiisaskan laftoodu waxay yeelan karaan tiro qaabab ah oo kala duwan.

Qaar baa waxay u bilaaban karaan sheegashooyin shaqsi oo sharciya oo kala gaar ah kuwaas oo maxkamaduhu marka danbe isku xiraan ama isku daraan. Tani waxay maxkamadaha u oggolaataa (iyo cidda kiiska ku jirtaba) inay kiiska u qaadaan qaab hagaagsan oo kharash-yar, iyadoo la muujinayo baahsanaanta dhibaatada.

### DARAASAD KIIS:

## BIXINTA QIIMAHA: MAGDHOWYO LOOGU TALOGALAY DIWAANKA QARSOODIGA AH EE CUNSURINIMO EE BOOLISKA ISWIIDHAN

Bishii sebteembar 2013-kii, joornaal hormuud ah oo Iswiidhan kasoo baxa ayaa muujiyay in a ciidanka booliska ee koonfurta Iswiidhan ay ururiyeen diiwan ka kooban 4,700 oo magacyo ah, kuwaas oo badankooda ay leeyihiin bulshada Rooma. Ciwaanka faylkaasi wuxuu ahaa “Kringresande” ama Socdaalayaal. Booliska Iswiidhan waxay isku dayeen inay ku doodaan in diiwaanka loo diyaariyay si uu uga saacido la dagaalanka denbiga xadgudubka ee aanu jirin isir-beegsi.

Kow iyo toban shaqsi oo ku xusnaa diwaanka ayaa kiisas shaqsi ah dawladda ka geeyay maxkamadaha Iswiidhan, laakiin waxay dalbadeen in kiisaskooda loola dhaqmo sidii hal kiis maadaama oo xaaladaha iyo waxa ay ku saabsanyihiin kiisasku isku mid ahaayeen. Maxkamadaha Iswiidhan si wadajir ah ayay u tixgeliyeen sheegashooyinkoodii, waxayna heleen dawladda Iswiidhan inay xog-kaydinta si isiraysan ugu faquuqday shaqsiyaadkaa, waxayna amartay siinta qofkiiba 30,000 Karoone (ku dhawaad 3,000 Yuuro) oo magdhaw ah mid kasta oo ka mid ah 11-ka shaqsi.

Kiiska ka dib, Wakiilka Sharciga ee Dawladda wuxuu shaaciyay in dawladdu magdhaw siin doonto dhammaan cidda lagu daray diiwaankaas booliska, maadaama oo ay sidoo kale xaq u lahaayeen magdhaw ka dib go’aankii maxkamada Iswiidhan. Xilligaa, kani waxa uu ahaa xaddigii lacageed ee ugu badnaa ee ay dawladda Iswiidhan magdhaw ahaan uga bixiso hal dhacdo.

Xaaladaha kale marka la eego, shaqsiyaad bulsho ayaa bilawgaba go’aansan kara inay kiis wadajir u qaadaan. Tani waxay dhalinaysa ka faa’iidaysiga awooda wadajirka, iyadoo la muujinayo heerka caddaalad-darrada ay wajaheen. Sidoo kale waa qaab loogu siyaadiyo cadaadiska cidda kiiska laga keenay. Cidda ama qofka la dacweeyay waxay u badantahay inuu dareemo “qaniinyada”, kana garaabo, ku qasbanaanshaha inuu magdhaw siiyo 500 oo qof marka loo eego keliya hal qof oo magdhaw doonaya.

### DARAASAD KIIS:

## KU HAWLLANAANTA IN MAGDHAW LA SIIYO SHAQAALAHA MAROOKAANKA AH EE JIDADKA TAREENKA: LA DAGAALANKA FAQUUQA KA JIRA ADEEGGA JIDADKA TAREENKA FARANSIISKA

1970-naadkii, sida la sheego si ay u saxaan shaqaale yarida, adeegga jidadka tareenka ee Faransiiska ee (SNCF) waxay shaqaalaysiiyeen 2,000 oo shaqaale Marookaan ah. Shaqaalahan waxaa loo shaqaalaysiiyay shaqaale qandaraas ahaan lamana siin darajada shaqaale rasmiya oo ka tirsan adeegga jidadka tareenka ee Faransiiska ee (SNCF).

Sida uu dhigayay sharciga Faransiiska ee waqtigaasi, waxay ahayd waajib inaad ahaato dhalad Faransiis ah si aad u noqoto shaqaale rasmiya oo ka tirsan adeegga jidadka tareenka ee Faransiiska ee (SNCF). Kala duwanaantaas darajada ku dhisan waxay shaqaalaha Marookaanka ah ka hor istaagtay inay gaadhaan koboc mihnadeed, mushahar sarreeya, xaalado qumman, hawlgabyo la majeerto, iyo faa’iidooyin kale.

Markay qaar badani shaqadda ka fadhiisteen, 848 ka mid ah shaqaalaha ayaa adeegga jidadka tareenka ee Faransiiska ee (SNCF) maxkamad la galay iyagoo hiil ka helaya ururka ganacsatada SUD-RAIL. 2018-kii, Maxkamada Racfaanka ee Baariis waxay heshay inuu jiray faquuq sharci-darro ah oo la xiriira xuquuqaha mihnadda iyo shaqo ka fariisiga shaqaalaha Marookaanka. Waxay ku abaalmarisay qof kastoo shaqaalaha ka mid ah oo la faquuqay 173,000 oo Yuuro mihnad waayid awgeed ah, 60,555 oo Yuuro faa’iido hawlgab waayid awgeed ah, 3,000 oo Yuuro tababar waayid awgeed ah, iyo 5,000 oo Yuuro oo damiirkooda la dhaawacay dartiis ah. Waxa la qiyaasay in adeegga jidadka tareenka ee Faransiiska ee (SNCF) ay noqotay inay 180 malyan oo Yuuro siiyaan shaqaalaha.

Habkan ah in dacwada loo oogo si wadajir ah wuxu badanaa ku kooban yahay xaaladaha qaar, waxana inta badan loogu yeedhaa tallaabo “wadajir ah”, “guud” ama “kooxeed”. Waxyaabaha cayimaya geedi-socodka qaadista tallaabooyinkan kala goonnida ah way kala duwanaan karaan. Tusaale ahaan, nidaamyada sharci qaarkood waxay u baahan karaan in kooxda shaqsiyaadka ah ee kiiska oogaya in si cad loo qeexo, ama in shaqsiyaadku “iyagoo oggol ugu biiraan” si ay qayb uga noqdaan kooxda riixaysa dacwada, halka dalal kalena ay waddo yara debecsan u oggolaan karaan “kooxda” kiiska oogaysa.

Dacwada wadajirka ah waxaa loo adeegsada noocyo xaalado kala duwan. Laga soo bilaabo dareewallada Uber-ka ee raadinaya in loo aqoonsado inay yihiin shaqaale kana faa’iidaystaan xuquuqda shaqaalaha ee ka dhalanaysa darajadaas, ilaa 261 qof oo ah dadka jidhkooda ka ganacsada kuwaasoo xujo-gelinayay denbi ka dhigista ka ganacsiga galmada oo ay horgeeyeen Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub, iyo ilaa in ka badan 13,000 oo Nayjeeriyaan degaan ah oo Maxkamad Sare oo Ingiriiska dhexdiisa ah shirkadda Shell kaga dacweeyay nadiifinta iyo magdhawga baabi’inta deegaan ee waxyeellaynaysa bulshooyinkooda.

# URURRO

Waa suuraggal in ururradu kiisaska oogaan iyagoo metelaya shaqsi ama koox shaqsiyaad ah. Tan inta badan waxaa loogu yeedhaa "tallaabo metelaad ah" sababtoo ah ururku wuxuu oogista kiiska ku metelayaa qof kale. Tani waxay cidda la metelayo siin kartaa amni, maadaama ururku qaadanayo qayb halista dacwada ah uuna noqonayo cidda ku magacaaban geedi-socodka dacwada.

DARAASAD KIIS:

## CADDAALAD U RAADINTA KU XADGUDUBKII XUQUUQDA NOLOSHA EE VALENTIN CÂMPEANU: LA XISAABTANKA DAWLADDA ROOMAANIYA

Valentin Câmpeanu wuxuu ahaa nin dhallinyar oo reer Rooma ah oo aad naafo u ahaa oo ku dhintay da'da 18, ka dib markii si ba'an laysaga indha tiray si xunna loola dhaqmay intii lagu hayay xarun caafimaad iyo bulsho oo ay maamusho dawladda Roomaaniya. Ururka aan Dawliga ahayn ee Xarunta Aggabka Sharciga ayaa kiis oogay iyaga oo isaga ku metelaya, waxayna ku doodeen in xuquuqdiisii dawladda Roomaaniya ku tumatay. Dawladda Roomaaniya waxay isku dayday inay ku dooddo, maadaama Ururka aan Dawliga ahayn ee Xarunta Aggabka Sharciga aanu dhibbane u ahayn xuquuq ku tumashada la sheegay, inaanay kiiska horgayn karin Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub.

Maxkamadu way ku gacansaydhay, waxayna u oggolaatay Xarunta Aggabka Sharciga xaqa ah inay tallaabo ay ku metelayaan Valentin qaadi karaan, si looga hortago diidmo ka dhan ah galaangalka caddaalada. Maxkamadu waxay ku sii socotay helitaanka in xuquuqdii Valentin lagu tuntay, xuquuqahaasna ay ka mid tahay xuquuqdiisii nolosha. Dadaallo ayaa ilaa hadda la wadaa lagu riixayo isbeddel nidaam oo ku wajahan guuldarraysiga laamaha daryeelka bulshada iyo caafimaadka ee Roomaaniya ee salka u ah kiiskan, oo ay ku jiraan hindiseyaal lagu raadinayo dib u qaabayn iyo socodsiinta adeegyadda bulshada-ku-dhisan.

Ururradu waxay sidoo kale awoodaan inay oogaan kiisaska ay dani ugu jirto natiijadooda, tusaale ahaan haddii ay muujin karaan karti gaar ah iyo oggolaansho ay kaga shaqayn karaan arrinta ay maxkamadu tixgelinayso. Tan waxaa badanaa adeegsada ururrada ololaynta si ay arrimo u horgeeyaan maxkamadaha, sida xujo-gelin ka dhan ah xeer ama siyaasad.

DARAASAD KIIS:

## DHALLINYARADA NIYUU SIILAAN OO DALBADAY XUQUUQDA CODBIXINTA

2019-kii, kooxda ololaha dhallinyaradu horkacdo ee Ka Dhig 16 ayaa laga aasaasay Baarlamaanka Dhallinyarada ee Niyuu Siilaan. Hadafkoodu wuxuu ahaa in loo ololeeyo in xuquuqda codbixinta lagu soo daro 16-jirrada iyo 17-jirrada. Waxay gudbiyeen kiis maxkamadeed oo xujo-gelinaya xeerka xuquuqda codbixinta ku soo koobaya muwaadiniinta Niyuu Siilaan ee 18 jirrada iyo ka wayn.

Ka dib saddex sano oo maxkamadaha la hortaagnaa, maxkamada dalka ugu sarraysa ayaa shaacisay in ka joojinta 16-jirrada iyo 17-jirrada inay codeeyaan ay ka dhignayd faquuq da'da ah oo mamnuuc ah. Maalintii go'aanka, dawladdu waxay ku dhawaaqday inay keenayso sharci qabyo ah si da'da codaynta hoos loogu dhigo 16. 2023-kii, dawladddu waxay ka noqotay ku dhawaaqistaas, loollankii ahaa in la beddelo da'da codbixintana waa sii socday.

Ururradu waxay sidoo kale awoodaan inay maxkamad geeyaan kiisas marka ururka laftiisa cid kale waxyeelleeyso ama xuquuqdiisa ku tumato. Tusaale ahaan, haddii urur laga joojiyo inuu guto dhaqdhaqaaqiisa ama hawlihiisa bulsho, tallaabooyin sharci-darro oo cidkale samaysay awgood.

DARAASAD KIIS:

## HAY'ADAHA AAN DAWLIGA AHAYN EE RUUSHKA OO LA DIRIRAYA XEERKA HAY'ADAHA SHISHEEYE

2012-kii, Ruushka ayaa soo kordhiyay Xeerka Hay'adaha Shisheeye. Waxaa la meel mariyay xilli ay jireen kacdoonnadii ugu waynaa ee ka dhanka ahaa boobka doorashada ee Ruushka ka dhaca tan iyo dhicitaankii Midawga Soofiyeedka. Xeerkaa waxa lagu beegsanayey ururrada shisheeye-maalgeliyo, ee aan baayac-mushtarka ahayn ee ay maamuladda dawladu u arkeen inay ka qaybqaataan arrimaha siyaasada. Xeerku wuxuu waajibiyay in ururradani isu diiwaangeliyaan inay yihiin hay'ado shisheeye, buuxiyaana waajibaaddo dabaggal oo adag, soona bandhigaan xaaladda dhammaan daabacadahooda onlaynka ah.

Haddii aanay u hooggaansamin, waxaa soo gaaraya cunaqabatayn maamul iyo denbi. Saddex iyo toddobaatan urur oo ku hawllanaa arrimo dhinacyo badan sida xuquuqda aadanaha, daryeelka deegaanka, xuquuqda LGBTQ+, waxbarashada, daryeelka bulshada, iyo muhaajiriinta, iyagoo badankooda lagu qasbay inay gebagebeeyaan ama joojiyaan hawlahooda natiijada xeerka awgii, ayaa kiisas geeyay Maxkamada Caddaalada ee Yurub.

2022-kii, Maxkamadu waxay heshay in Xeerku ku tuntay xuquuqda xorriyadda wadajirka iyo midowga ee ururrada, iyo xorriyadda hadalka.

## DANTA DADWEYNAHA

Waa suuraggal in kiisas la oogo iyadoo lagu metelayo danta dadweynaha. Tan waxa loogu yeeraa "Ficil Dadweyne".


Dacwada noocaan ah waxaa badanaa adeegsada shaqsiyaadka ama ururrada kuwaasoo naawilaya inay oogaan kiisas su'aal-gelinaya caddaalad-darro dadka kale haysata, iyadoo aan dadkaa kale si cayiman loo tilmaamayn ama aanay kiiska iyaga laftoodu qaadayn.

Haddii si kale loo dhigo, looma baahna in urur wadajir ah uu caddeeyo dan guud oo ku jirta kiiska natiijadiisa. Taa beddelkeeda, kiisku wuxuu khuseeyaa arrin ahmiyad dadweyne leh sidaa awgeedna, danta dadweynuhu waxay waajibinaysaa in la xalliyo. Waxay noqonkartaa qaab hagaagsan oo su'aal lagu gelinkaro caddaalad-darrada nidaamyada, laakiin kama jirto dhammaan nidaamyada sharciyeed.

## QAABABKA KALE EE DACWAD-KU-JIRAHA

Nidaamyada sharcigu waxay ku horumareen inay aqoonsadaan noocyo kala duwan oo dacwad-kujire. Tani waxay sii ballaadhisay fikradda cidda kiis horkeeni karta maxkamadaha si caddaalada loogu adeego.

Si gaar ah waxaa caynkan ah wixii la xiriira dacwada cimilada, taasoo maxkamaduhu aqoonsadeen in dabiicada loo aqoonsado cid sharciga lagu meteli karo, sida Dhulka, biya fariisinnada waawayn, kaymaha, iyo dhulbeereedyada. Iyadoo la siiyay nidaamyada-dabiicadda xaq sharciya oo ah inay wax dacwayn karaan waxay la micne tahay inay maxkamadaha dhexdooda badbaadadooda ugu dagaallami karaan kiisas ay geeyaan ilaaliyayaal meteli kara. Tani waxay sii daahfurtay fursadda ah in noocyo kala duwan oo kiisas ah la gudbiyo si loo gaadho hadaf istaraatiiji oo u gaar ah caddaalada deegaanka.



### DARAASAD KIIS:

## KIIS KA DHAN AH HADALLADA NACAYBKA EE BULGAARIYA GUDAHEEDA

2005-tii, Volen Siderov ayaa xubin ahaan loogu doortay Baarlamaanka Bulgaariya. Wuxuu ahaa saxafi hore iyo aasaasaha xisbiga waddaniyadda midigta fog ee Ataka. Madalo badan oo uu helayay, sida wargaysyo, buugaag, Barnaamijyo Telefishan, ololayaal doorasho, iyo hadaljeedin Baarlamaanka dhexdiisa ah, wuxuu ku dhex faafiyay aragtiyo xagjir ah oo ka dhan ah tiro bulshooyin ah oo la takooro, oo ay ka mid yihiin reer Rooma, Yuhuudda, Armiiniyaanka, iyo dadka Turkida.

Kiis Ficil-Dadweyne ah ayaa lagu dhisay xogtaas, inkastoo dacaayadda uu Siderov faafiyay aanay shaqsiyaadka si toos ah oo shaqsiyaysan u beegsanayn, bulshooyinka iyo kooxaha ay ka tirsanaayeen waxaa si taban u saameeyay aragtiyahan nacaybka ah dantii dadweynahana sidoo kale way saamaysay.

Maxkamadaha Bulgaariya waxay kiiskii Ficilka-Dadweyne u kala qaadeen kiisas u kala soocan si ku salaysan aqoonsi. Sheegashooyinkii laga keenay bulshooyinka Armiiniyaanka iyo Turkida waxa lagu difaacayay helitaan ah in odhaahyadu ay ka dhignaayeen handadaad iyo kicin. Ma jirin helitaan caynkaasa ah oo ay soo saareen maxkamadaha Bulgaariya oo la xiriira hadalladii Rooma-nacaybka iyo Yuhuud-nacaybka ahaa.

Kiiskii wuxuu u gudbay Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub iyaduna, markii ugu horraysay, waxay ka dhex heshay xadgudub ku aadan xuquuqda tixgelinta nolosha gaarka ah iyo faquuq-la'aanta kiis khuseeya hadallo nacayb ah oo guud, sida hadallo nacayb oo ku aaddan koox ama bulsho, ee aan si shaqsiya qof ugu aaddanayn.



### DARAASAD KIIS:

## DHAWRISTA DEEGAANKA EE MAXKAMADA DHEXDEEDA: ILAALINTA WEBIGA ATRATO EE KOLOMBIYA

2015-kii, bulshooyin asal ah oo Afrika kasoo farcamay ayaa kiis geeyay Maxkamada Dastuurka ee Kolombiya iyagoo ku doodaya in xuquuqdoodii nolosha, caafimaadka, biyaha, cuntada, amniga, deegaan caafimaadle, dhaqanka, iyo dhulka ay ku tunteen falal macdanqodis oo deegaankooda laga sameeyo. Falalkaasi waxay sabab aasaas ah u ahaayeen wasakhowga webiga Atrato ee gobolka Joko, Kolombiya.

Go'aankeeda, Maxkamada Dastuurku waxay si rasmiya ugu aqoonsatay in Webiga Atrato uu leeyahay daryeel xuquuqeed, dhawris deegaan, dayactir, iyo hagaajin dawladeed. Waxay u sii gudubtay inay heshay in dawladda Kolombiya ku guuldarraysatay inay ka hortagto wasakhow webiga ku dhaca oo ka dhashay macdanqodis, sidaa awgeedna ay dawladdu ku tumatay xuquuq aasaasiya.


Dawladda Kolombiya waxa la faray inay dejiso oo hirgeliso, iyadoo la shaqaynaysa bulshada degaanka, qorshe lagu nadiifinayo agagaarka webiga Atrato iyo durdurradiisa, laguna soo celinayo nidaamyada-dabiicadda, lagagana hortagayo dhaawac kale oo gaadha deegaanka gobolka. Kiisku wuxuu Maxkamada Sare ee Kolombiya siiyay sees ay ku aqoonsan karto in Kaynta Amasoonka Kolombiya ay sidaasoo kale leedahay daryeel xuquuqeed sannadkii 2018.

# QAABABKA KALE EE LOOGU LUG-YEELANKARO

Waxaa jira waddooyin badan oo dacwadu door ugu yeelan karto u ololayn isbeddel, ka qaybqaadashada dacwad istaraatiiji ahna waxay yeelan kartaa qaabab badan. Maaha lagama maarmaan in shaqsiga ama ururkiisa ay kiiska ka noqdaan dacwad-ku-jire. Waxay dooran karaan inay qaabab kale u taageeraan ama u baritaaraan dacwad-ku-jire kale kiiskiisa.

Waxay taageeri karaan u doodista kiiska cid kale ama ka caawin karaaan habaynta iyo dhaqaajinta marxaladaha ugu muhiimsan ee kiiska. Waxay bixin karaan xirfadahooda si taageero aan sharciga la xiriirin ay u siiyaan kiiska iyo kuwa ku lugleh. Tani waxay noqonkartaa u fududaynta daryeel dhaawac-tixgelin leh iyo taageero cidda ku lugleh ama siinta ololayn iyo tababar warbaahineed cidda kiiska oogaysa. Waxay ahaan kartaa wax u yar sida siinta meel lagu qabto kulammada kiiska. Dacwadu waa dadaal kooxeed ku lugleh dad bulsho ah oo bixinaya khibraddooda shaqsi, xirfadahooda, iyo khayraadkooda.

Geedi-socodka sharci laftiisa wuxu siiyaa qaabab kala duwan shaqsiyaadka iyo ururrada saamayntu gaadhay kana warqaba arrinta si ay uga dhiibtaan aragtiyahooda iyo siday wax u arkaan. Waxay keeni karaan caddayn khibradeed ama waxay keeni karaan markhaatifur maxkamada oo lagu taageerayo doodda kiisku ku dhisanyahay.



### DARAASAD KIIS:

## DENBI DAROOGO OO LA HELAY: GUUL-DARRO CADDAALADEED OO SAYNISYAHAN XOGEED CADDEEYAY

2011-kii, shaybaadh ayaa daahqaaday in mid ka mid ah kiimikaystayaashooda, Annie Dookhan, ay ku kacday anshax-xumo mar ay ka shaqaynaysay tiro maxkamadayno ah oo daroogo. Waxay raacday jidad-gaagaaban markii ay tijaabinaysay muunadaha, waxay beenisay natiijooyinka, waxayna been-abuurtay dokumantiyada shaybaadhka intii ay ku gudajirtay sagaalkeedii sano ee shaybaadhka. Shaqsiyaadka qaar waxay codsadeen in la laalo denbiyadii-lagu-helay, maadaama oo kiisas aad u badan ay arrintaasi saamaysay, in kiis-kiis loo raacona waxay u badnayd inay gaabis noqon doonto kuwo badanna caddaalad la'aan noqon doonaan.


Midowga Xuquuqda Rayidka ee Maraykanka ayaa maxkamad geeyay kiis lagu dalbanayo in codsadayaasha xujada-geliyay denbiyadii-lagu-helay laga ilaaliyo inay ku dhacaan xukunno aad u sii adag oo ka dhalanaya kiisaska dib-loo-furay, iyo in dhammaan kiisaska ay sida ba'an u saamaysay anshax-xumadu ay qasab tahay in la laalo mar haddii xeer-ilaaliyaashu ku guuldarraystaan inay sii wadaan waqti go'an. Maxkamaduhu waxay oggolaadeen ilaalinta codsadayaasha , laakiin may oggolaan laalis badan oo guud.

Saynisyahan xogeed ayaa soo saaray labo qaybood oo shaqo oo markaa maxkamada la geeyay. Tan hore waxay sheegtay in 62% kiisaska ay Dookhan ku luglahayd ay ahaayeen ujeedkoodu daroogo-haysasho keliya. Tan labaad waxay muujisay in 91% kiisaska Dookhan lagu maxkamadeeyay maxkamadaha hoose ee degmada, halkaas oo denbiyada fudud lagu maxkamadeeyo. Caddayntani waxay ka hor tagtay dooddii ay Dawladdu soo bandhigtay ee ahayd in sii daynta mudaacalayaasha ay halis badan ku tahay bedqabka bulsho iyo in kuwa ay khusayso ay ahaayeen "denbiilayaal halis ah", iyo in kiisaska badankoodu khuseeyaan daroogo ka ganacsi ee aanay ahayn daroogo haysasho.

Caddayntani waxay diiwaan-sharci u noqotay ku qancinta Maxkamada Sare ee Garsoorka si ay ugu yeerto xeer ilaaliyaasha degmada si loo laalo denbi-ku-helisyo badan waqti koobaan gudaheed. Go'aammadooda, Waxa Maxkamada Sare ee Garsoorku ku xustay daraasaddii loo soo bandhigay waxayna texgelin siisay saynisyahanadii macluumaadka, Paola Villareal, magac ahaan. In ka badan 20,000 oo kiisas daroogo ayaa lagu buriyay oo lagu laalay wax loo badinayo inayd ahayd laalistii keli ahayd ee ugu waynayd ee denbi-ku-helid qalada ee taariikhda Maraykanka.

Qaab kale oo shaqsiyaadku ama ururradu ay ugu lugyeelan karaan waa ahaanshaha ka-qaybqaate ama "saaxibka maxkamada". Tani waa marka shaqsi ama urur, aan ka mid ahayn dhinacyada kiiska laakiin aad u danaynaya xaajada, uu bixiyo macluumaad ka saacidi kara maxkamada inay natiijo caddaalad ah ku gaadho go'aankeeda.

Erey-bixinta "saaxiibka maxkamada" turjumaadeedu waxay ka timi "amicus curiae" waxayna tusinaysaa xaqiiqada ah inay bixinayaan macluumaad, khibrad, iyo ogaal si maxkamadu u gaadho go'aan habboon oo caddaalad ah. Nidaamyada qaar, looma oggola iyagu inay dhinacna dood ka keenaan, loomana oggola inay ka faalloodaan xaqiiqooyinka gaarka ah ee kiiska.



DARAASAD KIIS:

## ISU IMAATINKA SI XUJO LOO GELIYO XAYIRAADDA TRUMP EE SOCDAALKA

Intii uu xafiiska joogay, Madaxwaynaha Maraykanka Donald Trump wuxuu hirgeliyay falal digreetooyin oo isku xigxiga kuwaas oo loo yaqaan"xayiraadda socdaalka ee Trump". Digreetooyinkani waxaa kale oo loogu yeedhi jiray “xayiraadda Muslimiinta” maadaama oo ay mamnuucayeen socdaalka iyo dib u dejinta tiro dalal Muslim u badan.

Kiisas badan ayaa laga gudbiyay Gobollo badan kuwaasoo lagu raadinayo xujo-gelinta digreetooyinkaas, iyadoo la isku hallaynayo silsilado doodo sharciya oo ku salaysan xeerka socdaalka iyo Dastuurka Maraykanka. Tiro ka mid ah kiisaskan ayaa karay inay helaan xannibaad kumeel gaadh ah oo ka dhan ah tarxiilka ku qotoma xayiraadda socdaalka, taasoo laga arkay kumannaan xadhig ka sii dayn iyo ka joojin tarxiil.

Dhinaca kale ee xusida mudan ee ka mid ah dadaallada sharci ee ka dhanka ah digreetooyinka waxay ahayd ilaa heerka ay ururradu dacwad-gudbin sameeyeen, ama sharraxaadaha kooban ee saaxiibbada maxkamadeed, ee u janjeedhay xujo-gelinta sharciyeed. Tusaale ahaan, dacwad gudbintaa waxa sameeyay in ka badan 100 ururrada madxafyada iyo fanka, Ku dhowaad 100 shirkadaha tignoolojiga, in ka badan 30 jaamacadood, 10 saraakiil hore oo amniga qaranka, in ka badan 60 Ururrada Maxalliga iyo kuwa Qaran ee Qareennada Aasiyaan-Baasifig-Ameerikaanka iyo Ururrada bulshada Muslimka ah sida Golaha Xiriirka Muslim-Ameerikaanka, Horyaalka Caddaalada Muslimka, iyo Golaha Arrimaha Bulshada Muslimka.



## SOO KOOBIDDA CIDDA GUDBIN KARTA DACWAD ISTARAATIIJI

Waxaa jira caqabado gaar ah oo saaran cidda kiis maxkamad horgeyn karta taasoo ku xidhan nooca maxkamada iyo garsoorka, laakiin waxaa weli jira qaabab badan oo shaqsiyaadka iyo ururradu ay ugu lugyeelaan karaan dacwad istaraatiiji.

Waxay noqonkartaa dacwad-ku-jirayaasha laftooda, ama ka mid ahaanshaha urur wadajir ah ama koox kiis oogtaa, ama samaynta urur kiisas u ooga iyagoo ku metelaya bulshada, shaqsi, ama danta bulshada.

Waxay kale oo noqon kartaa taageerista kuwa si uun oo kale kiis ugu dacwoonaya, oo ay ku jirto gaadhsiinta maxkamada bayaano taageero ah.

Mararka qaarna, waxay noqon kartaa hal qof oo haysta xuquuq-dacwad-oogis inuu qaado kiis nooc gaara ah. Marar kalena, waxay noqon inaad go'aan ka gaadho cidda ugu habboon ee kiiska hore u sii wadi karta. Marka ay tan danbe joogto, waxaa muhim ah in si istaraatiiji ah loo fekero si loo kordhiyo fursada lagu gaadhi karayo go'aanka la rabo, iyadoo aan indhaha laga jeedinayn sida go'aanka maxkamada ay u dheefsan karayaan dad tiro badan ama bulshada si guud.



# JAWAAB U HELIDDA SU'AALAHAAGA

Waxaannu rajaynaynaa in haggahani kaa saaciday ka jawaabidda qaar ka mid ah su'aalahaaga ugu muhimsan ee ku saabsan dacwad istaraatiiji, adeegsigeeda, iyo waxay ku kordhiso u-dagaalanka caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha.

Haggaha waxa loo nashqadeeyay si ku salaysan baahiyo lagu aqoonsaday geedi-socod tashi oo lala yeeshay ururrada, bulshooyinka, iyo dhaqdhaqaaqyada ka shaqeeya caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha ee gobolka Golaha Yurub.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan dacwad istaraatiiji oo aanuu ka jawaabin haggahani, na soo ogaysii adigoo iimayl noogu soo diraya knowledgeandpower@systemicjustice.ngo

Waannu sii wadaynaa horumarinta aggabka iyo qalabka dacwada oo qayb ka ah shaqaddayada dhisidda aqoonta iyo awoodda bulshada u dagaallamaysa caddaalada. Waannu soo dhowaynaynaa ka falcelinta haggahan, sidaa darteed fadlan nala soo xiriir haddii aad hayso afkaar ama soo jeedin ku saabsan sida loo hagaajinkaro.

# WAX BADAN OO KALE OO KU SAABSAN SYSTEMIC JUSTICE

Systemic Justice waa “shirkadda sharciga ee dhaqdhaqaaqyada”, taasoo ay ka go’antahay inay ku qalabayso bulshada aqoonta ay u baahan yihiin si ay sharciga ugu adeegsadaan isbeddel nidaam.

Ka Hay’ad (NGO) ahaan annagoo la kaashanayna ururrada iyo bulshooyinka u dagaalamaya inay beddelaan sida sharcigu ugu shaqeeyo caddaalada takoorka, bulshada, iyo dhaqaalaha, waxaannu ururrada, dhaqdhaqaaqyada, iyo kooxaha wadajirka ah ku hormarinnaa ballaadhinta helitaanka xalal garsoor oo ku tacaluqa dacwadaha wadajirka ah. Annagoo sidaa samaynayna, waxaannu kala furfuraynaa nidaamyada joogteeya ee shidaaliya caddaalad darrada ee meel walba.

Wax badan ka oggow Systemic Justice:

**Mareeg:** systemicjustice.ngo
**Iimayl:** info@systemicjustice.ngo
**Twitter/X:** systemicjustic_
**Instagram:** systemicjusticengo
**LinkedIn:** Systemic Justice

SYSTEMIC JUSTICE,
THE MOVEMENTS’ LAW FIRM

SYSTEMIC JUSTICE

This work is licensed under the Creative Commons Attribution Non-Commercial Share Alike 4.0 International license. You can view a copy of this license here. This means that this document can be copied and redistributed in any medium or format, and that it can be remixed, transformed, and built upon, provided it is for non-commercial purposes and appropriate credit is given to Systemic Justice.

The translation of the publication has been funded through The FRi grant, which is part of the Fundamental Rights Initiative; a collaboration between Global Focus and Nyt Europa co-funded by the EU.

We want to thank the translation team for their outstanding work.
We give thanks to:
Ahmed Abdikadir Ali - Freelance Translator - ducoqabe132@gmail.com
Abubakar Hassan - proofreader - ahassan8584@gmail.com